# 10 MAGAC

## QAYBTA LABAAD

Cali Jaabir al-Fiifi

# 10 MAGAC

## DHEELMINTA NAFAHA XASILLOON

### QAYBTA LABAAD

## لأنك الله

## معراج النفوس المطمئنة

### الجزء الثاني

Turjume:

Cabdulxakiim Obsiiye

Xuquuqda Turjumaadda © Cabdixakiim Obsiiye 2024.
Xuquuqda turjumaadda oo dhan way dhowran tahay. Buuggan ama qayb ka mid ah lama daabaci karo, la'aanta idan qoran oo laga helo turjumaha.

Translation Copyright © Abdihakim Obsiye 2024.
All rights reserved. No part of this publication may be reproduced, stored in any retrieval system, or transmitted in any form or by any means, including photocopying, recording, or other electronic or mechanical methods, without the prior written permission of the translator.

Daabacadda 1aad Hargeysa, 2024
Tifaftiraha: Cali-Khaan
Qaabaynta Jeldiga: Asad Aadan
Qalinmaal Publishing.
Tel: +252–63 3333755
qalinmaalpublishing@gmail.com

www.qalinmaalpublishing.com

بِسۡمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحۡمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

# TUSMO


**MAHADNAQ** .......... XVI

**EREYGA AKHRISTAHA** .......... XVII

**AFEEF** .......... XVIII

**HIBAYN** .......... XIX

**HORDHAC** .......... 1

**AR-RAXMAAN (NAXARIIS GUUD BADANAHA)** .. 7

**Godkii** .......... **7**

**Boholyo** .......... **8**

**Dareenka Burqanaya** .......... **10**

**Weyddii Xog-ogaalka** .......... **11**

**Cadaabka Raxmaanka** .......... **12**

**Hoyga Waayeelka** .......... **13**

**Fiiriya** .......... **14**

**AL-JAMIIL (QURUX BADANAHA)** .......... 19

**Subxaanallaah!** .......... **19**

**Salladdii Cajiibka ahayd!** .......... **20**

**Liin iyo Rummaan** .......... **20**

**Balanbaalista** .......... **21**

**Codka Waaberiga** .......... **22**

**Isdoqomayn** .......... **23**

**AL-WAHAAB (HIBO BADANAHA)** .......... 27

**Hibo Badane** .......... **27**

Qiimaha Aragga ........ 29
Joogso ........ 29
Guuldarradii Barakaysnayd! ........ 30
Baryooyin aan xad lahayn ........ 31
Aqbal Iyo Ijaabo ........ 34
Hibooyin ........ 35
Al-XAQU AL-MUBIINU ........ 39
Fiiriya ........ 39
Habeen-badhka ........ 42
Xog-ogaal baad tahay ........ 42
Dabeecadda Dabeecadda! ........ 43
Ma Shaki baa ka jira? ........ 44
Meydkii ........ 45
AL-XAKIIM (MURTI BADANAHA) ........ 49
Nafihiinna ........ 49
Muraayadda ........ 50
Amarka ........ 51
Dhaxalka Iyo Dheddigga ........ 52
Xikmadda Abuuraha ........ 53
Eebbe ma ciyaaro ........ 54
Ii warran ........ 54
Jaangoyn ........ 56
Asaasaq ........ 57
Miskiin ........ 58

Al-CALIIM (OGAAL BADANAHA) ........................... 63
Waa uu maqlay ........................................................ 63
Waa uu og yahay ..................................................... 64
Salafkii .................................................................... 65
fudud ....................................................................... 66
Kitaabka Ibnu Kasiir .............................................. 67
Xasillooni ................................................................. 68
Cabsi ........................................................................ 69
Badda Gunteeda ..................................................... 70
Sirmaqabe! .............................................................. 72
AL-FATAAX (BANNAYN BADANAHA) ................. 76
Bishaaro .................................................................. 76
Furidda Cilmiga ..................................................... 77
Furidda Baryada ..................................................... 79
Oohintii Nawawi AHUN ........................................ 80
Deeqaha Indhodaaliska ah ..................................... 80
Hibooyinka Fataaxa ............................................... 82
AL-QADIIR (AWOOD BADANAHA) ....................... 87
Biyo aan Shubmayn ................................................ 87
Dhulkii Indhodaraandarrada ................................. 88
Qaylo ....................................................................... 89
Biyo Fatahaya ......................................................... 89
Dayaxii kala dillaacay ............................................ 90
Kala firdhin ............................................................. 91

Mustaxiil .......... 92
Marka ay diidaan .......... 93
AL-WALIYU (MICIIN BADANAHA) .......... 97
Bus .......... 97
Bilawga Loollanka .......... 98
Naxariista Eebbe .......... 99
Qalbi Cabsada .......... 100
Dirac-Adag .......... 100
Agoonkii .......... 101
Warbixin waafiya .......... 102
Mudanta Bulshada .......... 102
AL-QAWIYU (XOOG BADANAHA) .......... 107
Awoodi waa ta Eebbe .......... 107
Faynuuskii Weynaa .......... 108
Xanuunka .......... 109
Kibir-Jabiye .......... 110
Kabbasho .......... 111
Buuraha .......... 111
Kaneeco .......... 112
Teendhooyinka .......... 113
Dhimay .......... 114
Wadne-Qabad .......... 115
Dabayl Daran .......... 116
AL-BADIIC (HALABUUR BADANAHA) .......... 121

Mucjisada Codka .......... 121
Codka Nolosha .......... 122
Sirta Codka .......... 123
Cida Diigga .......... 124
Ma shaki baa ka jira Ilaahay?! .......... 124
Mucjisada Indhaha .......... 124
Mucjisada Midabka .......... 125
Koob .......... 127
Udugga .......... 128
Canbarka .......... 128
Luul .......... 129
Amakaagga Abuurta! .......... 129
Nafihiinna .......... 130
Qorraxda .......... 131
Ogsajiinta .......... 132
GUNAANAD .......... 133

Ib wixii ka dhiiqiyo
Webiyada irmaanoo
Inta ay la ooyeen
Kalgacaylka Eebbaha
Ilmadooda lagu qoray
Asmaadaada qaarkood
Samadoo albaabkiyo
Inta oodda laga rogay
Malaa'iguhu idilkood
Alxamdulilla qaadeen
Intaas oo addooniyo
Ficil iyo astaama ah
Haddii ay wax kale odhan
Ammaantaada mooyee
Ma idlayn karaynee
Keligii Ilaahoow!!

*Cabdiqaadir Xirsi Siyaad (Yamyam)- AHUN*

# MAHADNAQ

Mahad aan dhammaan waxaa iska leh Allaha awoodda iyo arrinka leh ee igu hanuuniyey, iina fududeeyay turjumaadda buuggan qiimaha badan ee ka hadlaya macnaha, miidda iyo murtida ku duugan kow iyo toban ka mid ah magacyada Eebbaha wanaagsan ee sarreeya. Naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaato Nebi Muxammed. Garashada abkeedow, Aqoon macallinkeedow. Hoygii ammaantiyo, Kalgacayl ururiyo, Astaamaha jacaylkow!

Intaa ka dib, waxa aan si guud ugu mahadcelinayaa akhristayaasha sharafta leh ee akhriyay, kana soo falceliyey qaybtii hore ee buuggan. Si gaar ah, aan u xuso macallin Xamse Mustafe Cumar Kujoog iyo marwo Amal Sh. Mawliid oo meel dheer gaadhsiiyay qaybtii hore. Waxa aanan illaawayn Sakariye Haaruuni oo qayb libaax ka qaatay faafintii iyo fidintii qaybtii hore. Mar kale ayuu Sakariye dib u akhrin iyo sixidba ku sameeyay qaybtan labaadna. Waxa aan si weyn ugu mahadcelinayaa Ayaan Diiriye oo ila wadaagtay xaalad xanuun badan oo soo foodsaartay, iyo sidii uu buuggani ugu noqday dawo iyo dugsi ay ku diirsatay. Mar kale, Ayaan waxa ay igu dhiirrigelisay soo saaridda qaybtan. Waxa aan si weyn ugu mahadnaqayaa saaxiibkay Asad Aadan oo naqshadeeyay jaldiga buugga iyo Muxammed Shaaxuur oo turjumay qaybo ka mid ah suugaanta ku jirta buuggan. Waxa aan si kal iyo laab ah ugu mahadcelinayaa Sheekh Muxammed Gaanni, Muxiyadiin Cali Barkhad, Muxammad Arabsiyo iyo Kaafiya Cabdiraxmaan oo muddadii ay hawsha turjumaaddu socotay si toos ah iyo si dadbanba uga qayb qaatay. Ugu dambayn aynnu u wada ducaynno laba abwaan oo aan qayb ka mid ah suugaantooda aan aad u adeegsaday: Abwaan Hadraawi iyo Abwaan Cabdiqaadir Xirsi Yamyam.

Abaal badha, abaal bura, abaal bur iyo dheeraad ah
Ninba kiisa kaan ugu beddeli, beerka ka ogsooni.

Mahadsanidiin

## EREYGA AKHRISTAHA

Runtii labada qaybood ee dhiganaha (10 Magac), waa laba qaybood oo is-dhammaystiraya. Qaybtii kowaad ee (Socdaalka Samada Toddobaad), waxa ay barbilow u ahayd la-xidhiidhidda Alle. Waxa ay ibafur u ahayd nolol cusub, oo ku salaysan dib-isugu-noqosho. Halka ay qaybta labaad ee (Dheelminta Nafaha Xasilloon), ka tahay heerka labaad ee uu gaadhayo qofkii qaybtii hore ka soo gudbay, ee nolol cusub oo Alle ku xidhan bilaabay. Heerkan dambe waxa weeye in uu qofku dhex dhunbado quruxda iyo qaayaha samayska Alle. Waa in uu wax badan ka fekero abuurka Alle ee cajabta badan, kaas oo ka bilaabmaya naftiisa. Ka dibna uu Alle jeclaado.

Waxa iyaduna tognaan dhiganaha ku sugan ah, in erayada iyo isi-saarka weedhaha, ee uu adeegsaday Turjumuhu ay yihiin kuwo fudayd iyo fidsanaan suugaaneed isku darsaday. Alle haka abaaliyo shaqadaas qaaliga ah ee uu qabtay.

Sakariye Haaruni, 04/ Shacbaan/1445H

# AFEEF

Maadaama oo uu buuggani yahay turjumaad toos ah oo aan ku sameeyay kow iyo toban ka mid ah magacyada Ilaahay SWT iyo nuxurka ay xambaarsan yiihin, isla markaana ay adag tahay in uu af naqo shakhsi sidayda oo kale beydgaabii; waxa aan mar kasta ka afeefanayaa wixii gefaf iyo gaabisyo ah ee aad ku aragto buuggan, kuwaas oo aan iga ahayn kas iyo kutalagal, balse iga ah awooddayda iyo itaalkaygu halkii ay i gaadhsiiyeen.

Akhristaha sharafta leh, waxa aan ka rejaynayaa in uu wixii khalad ah iigu cudurdaaro, isla jeerkaasna uu ila turxaan bixiyo wixii i seegay. Taladaada, tusaalayntaada iyo toosintaada, gacmo furan iyo qalbi xaadhan baa aan ku soo dhowaynayaa. Eebbena, waxa aan ka baryayaa in uu i waafajiyo tubta toosan, in uu ii naxariisto iyo in uu ii dambidhaafo labada daaroodba.

Ka nastahan Ilaahay

In af lagu tilmaamee

Addoon qirasho mooyee

Wax kaloon idhaahdaa

Iima ay ekoonine!

Yamyam (AHUN)

# HIBAYN

Aniga oo lix jir ah ayaa aan riyooday. Dabadeeto, aabbahay baa aan uga warramay riyadaydii. Ilaa ilbidhiqsigan, waxa aan sii xusuustaa dhoollacaddayntiisii iyo qaabkii uu ugu bishaaraystay! Sannado ka dib, waxa la iigu fasiray kitaab aan ka qori doono Ilaahay SWT!

Waxa aan u hibeeyay aabbahay AHUN.

# HORDHAC

Eebbow, adiga ayaa mahadsan xilli walba iyo xaalad kasta. Naxariis iyo nabadgelyana korkiisa ha ahaato hoggaankeennii iyo haldoorkeennii Muxammed, ehelkiisii, asxaabtiisii iyo cid kasta oo raacday.

Tani waa qaybta labaad ee buugga 10 Magac oo soo baxay lix sano ka hor. Waxa aan isku dayay in ay isku mid noqdaan labada buug oo ay iska waafaqaan qaabka iyo xogaha. Alle SWT, waxa aan weyddiisanayaa in uu qaybtanna siiyo barakadii iyo soo dhowayntii uu siiyay qaybtii hore, iyo in uu barakadiisa gaadhsiiyo qoraaga, akhristaha iyo waalidkoodba.

Dhigaalkan ku horyaallaa waa qaybtii labaad ee buugga 10 Magac oo aan Alle weyddiisanayo in uu ka dhigo mid waxtara qalbiyada iyo mid baraarujiya dadka u socda xagga Ilaahay. Isla hannaankii hore ayaa aan u qoray qaybtanna oo ma aha buug cilmiya oo ka hadlaya qeexitaannada, qaybaha, hadallada iyo raddinta baadilka. Balse waa qalin suugaanyahan -haddii ay sax tahay in aan ahay suugaanyahan- iyo qalbi wax u fiirsaday, -haddii ay sax tahay in aan wax u fiirsaday- kaas oo Alle u jecel sida ay u jecel yihiin Muslimiinta oo dhami. Ilaahay SWT, ehel ayaa uu u yahay in la jeclaado, in la caabudo iyo in la iska jiro. Waxa aan jeclaystay in aan ku qoro warqadahan kooban wax ka mid ah jacaylka aan u hayo Rabbigay. Haddii uu khayr ku qoran yahay, Alle ayaa iska leh, haddii kalena waxa aan ka magangelayaa in uu cadaabo qalbi jeclaaday! Sidoo kale, waxa aan weyddiisanayaa cafis, dambidhaaf iyo saamaxaad.

لساني لا يطيق لكم    ثناء فهو منعقد
وفي أعماق أوردتي    مساجد ما لها عدد

Abaal badha, abaal bura, abaal bur iyo dheeraad ah
Ninba kiisa kaan ugu beddeli, beerka ka ogsooni.

Eebbe SWT, waxa aan weyddiisanayaa in uu ka abaalmariyo qof kasta oo buuggan jeclaaday, akhriyay, ugu baaqay saaxiibkii, faafiyay, ama soo abaabulay kulan akhris iyo aqooneed uu ku tartansiinayo ardayda dhigata madarasadaha iyo markasyada.

Waxa aan ka tuugayaa Rabbi SWT, in uu inna barakeeyo iyo in uu u dambidhaafo innaga, waalidkeen iyo Muslimiinta oo dhan[1].

Naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaato Sayidkeenna Muxammed.

Cali Jaabir al-Fiifi: 01/Safar/1444H

[1] Rabbow ifka nooga door
Dedaalkana noo rumee
Rabbow danbe noo ogow
Wixii tegey duudsi yeel
Hadraawi (AHUN)

*Rabbow dunidaada weyn*
*Dabaylo fayow ku xeer*
*Intii dulin baas dhex taal*
*Rabbow digo-xaadh ku fiiq!*

Hadraawi (AHUN)

# الرَّحْمَنُ

Waa maxay unugga gaarka u ah dareennadani? Muxuu yahay dheecaanka ku dhiirrigeliya qalbiga hooyada dareenka naxariista? Waa maxay dabeecadda nudaha masuulka ka ah dareennadan ku kaydsan jidhka hooyada?!

## AR-RAXMAAN (NAXARIIS GUUD BADANAHA)

Alle, ayaa aan in badan uga mahadnaqayaa in uu yahay *ar-Raxmaan iyo ar-Raxiim.* Qaabkee ayaa ay noqon doontaa noloshani, haddii aanu Rabbigeen innoo naxariisanayn? Naxariistiisu waxa ay ka muuqanaysaa neef kasta oo aynnu qaadanayno, humaag walba oo aynnu arkayno iyo hadal kasta oo aynnu maqlayno. Waxa aan Ilaahay SWT, in badan ugu mahadceliyaa in uu ka dhigay magacan mid si weyn uga dhex muuqda nolosha Muslinka. Waxa la inoo sharciyeeyey in aynnu arrimeheenna oo dhan ku bilawno *Bisinka,* si uu innoogu soo jiido naxariista, barakada iyo waafajinta. Rakcad kasta oo aynnu tukanno, waxa ku jira magacyada ar-Raxmaan iyo ar-Raxiim; si ay u noqdaan waxa ugu wanaagga badan ee lagu furfurto camalka ugu fiican! Suurad kastana waxa ka horraysa naxariista si ay u noqoto furfurasho barako leh. Naxariistu waxa ay ku soo aroortay in ka badan laba boqol iyo lixdan aayadood Qur'aanka ka mid ah. Sidoo kale, waxa ay gaar ku tahay suuradda cajiibka ah ee **ar-Raxmaan.** Magacyada *ar-Raxmaan iyo ar-Raxiim* ayaynnu ku duulinnaa ruuxdeenna, isla markaana ugu dheelminnaa cirarka naxariista.

### Godkii

Dhalinyartii godku waxa ay ahaayeen da'yar rumeeyay Rabbigood oo ka cararay tolkood oo Alle wax la wadaajiyay. Waxa ay ka baxsadeen noloshii ballaadhnayd, oo waxa ay magansadeen god cidhiidhiya! Waxa ay galeen god madow, qabow oo cabsi leh oo u baahan dhammaan kaabayaasha nolosha deggan! Sidee ayay ahayd noloshii godku? Qaabkee ayaa uu ku dhaafi jiray habeenku goobtan uu buuxdhaafiyay carrotuulkii ay habeennada jiilaalku tuulayeen sannadaha badan? Muran la'aan waxa ay ahayd nolol cabsi leh oo uu habeenkeeda qabowga iyo cabsida lihi qunyar u socdo. Docda kale haddii aad akhrido aayadda ka sheekaynaysa godkan, waxa aad ogaan doontaa sidii uu u ahaa mid iftiimaya iyo laambadihii widhwidhayay ee ka laalaaday gidaarradiisu in ay ahaayeen naxariista Alle, iyo in lagu gaaryeelay jaad ka mid alaabaha qaaliga ah, deedna uu noqday hoy ka qurux badan qasriyada oo dhan.

*Dhab ahaantii, alaabtani waxa ay ahayd naxariista!*
Alle SWT, waxa uu ku yidhi Qur'aanka kariimka ah:

﴿ وَإِذِ ٱعۡتَزَلۡتُمُوهُمۡ وَمَا يَعۡبُدُونَ إِلَّا ٱللَّهَ فَأۡوُۥٓاْ إِلَى ٱلۡكَهۡفِ يَنشُرۡ لَكُمۡ رَبُّكُم مِّن رَّحۡمَتِهِۦ ﴾ الكهف: ١٦

*"Xus markii aad ka fogaateen iyaga iyo waxa ay caabudayaan Alle mooyaane. Gala godka, Rabbigiin baa idinku saydhaya wax ka mid ah naxariistiisa e'."*

Naxariis guud badanuhu haddii uu naxariistiisa ku faafiyo meel mugdi ah, waa ay iftiintaa, godka cidhiidhiga ah baa faalal noqda, qalbigii dhintayna waa uu soo noolaadaa. Sidaas awgeed, ayay naxariistani uga dhigtay qaar aan u baahan cunto muddo saddex boqol oo sano ah! Waxa ay ka dhigtay kuwa ku jira naxariis dhammaystiran, oo sababtay in aanay ka kicin hurdada sannado badan. Murugadii ayay ka ilaalisay, cabsidii ayay ka durkisay qalbiyadooda, umana ay soo dhowaan oo waabay ka cararaysay iyada oo argagaxsan. Alle, haddii uu kugu gaaryeelo naxariistiisa, dhab ahaantii waxa uu kaaga filnaaday guud ahaan walaaca iyo walbahaarka noloshan. Barakooyinka naxariistii uu Alle ku faafiyey godkii cidhiidhiga ahaa, waxa ka mid ah in uu ka dhigay sheekadan **bayaan** (Qur'aan) ay akhriyaan Muslimiintu toddobaad kasta si ay uga soo qaataan iftiin iyo hanuun. Naxariista Eebbe, korkooda ha ahaato dhalinyartii Rabbigood rumeeyay, deedna uu u kordhiyay hanuunka[1].

## Boholyo

*N*axariista Alle SWT, waxa ka mid ah in uu og yahay waxa ku dhex sugan naarta jahannama, oo ah cadaabka iyo xanuunka taabanaya jidhka iyo ruuxda iyo sababaha lagu galaba. Deedna waxa uu ku soo dejiyay addoomihiisa kitaab ay xujooyinka oo dhami tilmaameen in uu yidhi oo

[1] Naxariis adaa liyo
Cibro lagu qaboobo
Ilsan kaad u eegtaa
Waligii ma iishee!
Cabdi-Qays

ku hadlay. Kitaabkan ayay boqollaal jeer ku sheeggan yihiin: *jahannama, saciira, xudama, ladaa, haawiya iqb,* sababaha lagu galo iyo aamminaadaha keena in lagu waaro. Ujeedkuna waa in uu Alle uga digo, una naxariisto.

Nusuus aad u badan oo ka mid ah Qur'aanka kariimka ah iyo Sunnada ayaa uu Alle ugaga warramay addoomihiisa in uu yahay dambidhaaf badane (Qafuur); si ay u joojiyaan xumaanta, uguna soo laabtaan. Waxa uu uga warramay in uu ku farxayo towbaddooda haddii ay soo laabtaan. Alle, waa uu isjeclayasiinayaa addoomihiisa isaga oo xusuusinaya galladihiisa, abuurtiisa ashqaraarka ah, quruxda awoodihiisa, weynida dulqaadkiisa, dambidhaafkiisa iyo samafalkiisa; si ay ugu soo xiisaan qaabka iyo qorshaha ay ugaga mid noqonayaan addoomaha wanaagsan.

Alle SWT, addoomihiisa ayaa uu u naxariisanayaa; waayo, waxa uu doonayaa in ay galaan jannooyinkiisa. Ka dib, waxa uu xusayaa cagaarka dhirteeda, macaanka biyaheeda, quruxda qasriyadeeda, farshaxanka dhismaheeda iyo nolol wanaageeda. Marar badan ayaa uu xusuusinayaa jannada oo waxa uu ku celceliyaa aayadaha kicinaya dareenka u hilowga hoyga waaritaanka. Si haddii ay u soo marto aayad iyaga oo mashquulsan, ay mid kale u soo marto iyaga oo soo jeeda. Haddii ay dhaafto aayad labaad, mid saddexaad ayaa baraarujinaysa. Halkaas uun ka sii ambaqaad: *erayo-macaan, hannaan weyn iyo xusuusinta faahfaahiinno dheeraada.* Akhristaha Qur'aanku, haddii aanu xiisayn cagaarka dhirta, waxa laga yaabaa in uu xiiseeyo quruxda iyo qaabka wabiyada cartamaya. Haddii aanu sawiran qasriyada, waxa suurtagal ah in uu xuska xuural-cayntu si fiican u cariyo.

Alle SWT, ayaa addoomihiisa xusuusinaya camallada xunxun. Waxa kale oo uu nacsiinayaa natiijada ka dhalan doonta, si ay uga badbaadaan halisaha iyo waxa ka dhalan doona oo ah: cadhadiisa iyo aargudashadiisa. Mar kale, hab aad u sarreeya iyo erayo qurxoon, ayaa uu kugu xusuusiyaa camallada suubban. Deedna nafta toosan ayaa kala imanaysa shaqadan wixii uu Alle uga furo ee uga fududeeyo. Hoygeeda ayaa weynaanaya, darajadeeduna waa ay sarraynaysaa. Xumaan oo dhan waxa ka hufan Allaha naxariisanaya naxariista guud iyo midda gaarka ah.

## Dareenka Burqanaya

Abu Hurayra RC ayaa ka wariyey Suubbanaha ﷺ:

**"إن لله مائة رحمة، أنزل منها رحمة واحدة بين الجن والإنس والبهائم والهوام، فبها يتعاطفون، وبها يتراحمون، وبها تعطف الوحش على ولدها، وأخرها الله تسعة وتسعين رحمة، يرحم بها عباده يوم القيامة."**

*"Alle, waxa uu leeyahay boqol naxariisood. Mid Keli ah ayaanu u soo dejiyay jinka, insiga, mayeedhaanka iyo dugaagga. Xabbaddaas ayay iskugu tudhayaan, iskuguna naxariisanayaan. Midhaas ayuu dugaaggu ugu naxariisanayaa ilmihiisa. Eebbe, sagaal iyo sagaashan naxariisood ayaa uu dib dhigtay; addoomihiisa ayaanu ugu naxariisanayaa maalinka qiyaame[1]."*

Naxariista Rabbi SWT waxa ka mid ah in uu ubadka u dhigay qalbiga waalidka shay aanay suurtagal ahayn in ay noolaadaan la'aantii, oo ah naxariiso iyo dareenno aanay cidina awoodayn joojintooda. Haddii hooyada la siin lahaa hantida taalla dunidan oo dhan, si ay ilmeheeda uga soo tuurto dhisme dheer, ma yeelayso. Haddii aabbaha loo ballanqaadi lahaa kaydadkii Qaaruun, si uu ilmihiisa ugu dhigo gaadhi, ma yeelayo!

Waa maxay dareennada ka hortegaya ballanqaadyadan amakaagga ah? Qaabkee ayay fikradda ilxaadku u kartay in ay ka gudubto dareennadan aanay suurtagalka ahayn in uu dafiro mulxidku in ay ku jiraan gudihiisa?! Waa maxay unugga u gaarka ah dareennadani? Waa maxay dheecaanka dareenka naxariista ku dhiirrigeliya qalbiga aabbaha? Waa maxay dabeecadda nudaha ka masuulka ah dareenkan ku jira jidhka hooyada?! Bal hadda weyddii mulxidka: sababta ay bisaddu iskugu beddesho dugaag halisa marka aad u dhowaato ilmeheeda? Qaabkee ayay suurtagal u tahay in ay aragtida Darwin u fasirto dareenkan? Haddii dareenkani yahay abuur, yaa ku abuuray noolaha?

Tani waa naxariista keli ah ee uu Alle u soo dejiyay addoomihiisa, si ay iskugu naxariistaan dhexdooda. Mana jirto maaddo xadayn karta halka ay deggan tahay. Ma jiro shaybaadh qiyaasi kara muggeeda, lamana soo helayo soo-dhoweeye lagu arki karo waaxyaha dareenkan burqanaya.

---

[1] Saxiixa Muslin: 4/2108.

## Weyddii Xog-ogaalka

Weynaanta astaantan (*naxariista*) iyo labadan magac (*ar-Raxmaan iyo ar-Raxiim)* waxa ka mid ah in Alle SWT u doortay bisinka lagu furfurto Qur'aanka kariimka ah. Muslinka ayaana ku celceliya xilli kasta oo waxa aad mooddaa sababta khayr kasta oo aynnu gaadhnay iyo gaashaanka xumaan walba oo aynnu ka cabsanno. Waa tiir aan la'aantii nololi jirayn, lamana qiyaasi karayo nolol aan naxariis lahayn. Sidaas awgeed, ku celcelinteedu waa muhiim. Waayo, nafta Muuminka ayay ku abuuraysaa dareen ku baraarujiya naxariista Rabbigii iyo gundheeraanta dareenkan.

Weynida sifada naxariista iyo magaca *ar-Raxmaan* waxa ka mid ah in Alle SWT amminkii uu xusay in uu ku dul sugan yahay carshigiisa uu magacani laba jeer ku soo arooray Qur'aanka kariimka ah:

﴿ ٱلرَّحۡمَٰنُ عَلَى ٱلۡعَرۡشِ ٱسۡتَوَىٰ ﴾ طه: ٥

﴿ ثُمَّ ٱسۡتَوَىٰ عَلَى ٱلۡعَرۡشِۛ ٱلرَّحۡمَٰنُ فَسۡـَٔلۡ بِهِۦ خَبِيرٗا ﴾ الفرقان: ٥٩

Waxa aad mooddaa dareemidda carshiga weyn iyo in Allaha awoodda badani uu ku dul sugan yahay, dareen iskugu dhafan cabsi, haybad iyo baqasho, oo taabanaya qalbiyada nool. Dabadeeto, Ilaahay SWT, ayaa ka dambaysiiyay magacan ay ka soo burqanayaan iftiinnada naxariista iyo barakadu; si uu u dejiyo qalbiyada addoomaha Eebbe ka cabsada. Ku dulsugnaanshaha Eebbe ee carshigiisa iyo daalacashada camallada ay qarsadaan ama ay muujistaan addoomuhu, haddii ay keensanayaan cabsi, docda kalena waa in aanay hilmaamin in uu yahay naxariis badane, haddii uu ogaado dambigaaga jecel in uu kaa dhaafo xumaha. Haddii uu maqlo xadgudubkaaga, waxa uu jecel yahay towbad-keenkaaga. Haddii uu kaa arko gefna, waxa uu doonaa soo-laabashadaada! *Alle, waa Raxmaanka ay aqoontiisa, naxariistiisa iyo cafiskiisu ka hormareen dulqaadkiisa, cadhadiisa iyo aargudashadiisa.* Mar kale dhuux aayaddii aynnu hore u soo xusnay:

﴿ فَسۡـَٔلۡ بِهِۦ خَبِيرٗا ﴾

Alle SWT, waxa uu ku farayaa in aad warsato, aqoontaadana aad ka korodhsato. Ibnu Kasiir AHUN oo sharraxay aayaddan ayaa yidhi:

*"Ka warso cilmigan mid kaaga aqoon iyo waayo-aragnimo badan. Deedna raac oo ku dayo[1]."* Weynida naxariista Alle waxa ka mid ah in aanu ka dhigin faridda aqoontan sharafta leh mid ku kooban waxa uu ku abuuray nafaha addoomihiisa oo ah jeclaanshaha barashadiisa. Balse amar buuxa ayaa uu ku siiyay barashadeeda; si ay uga dhaxlaan daahirnaan iyo hanuun.

## Cadaabka Raxmaanka

Waxa aan iswaydddiiyey oo aan baadhay xikmadda ku jirta magaca *ar-Raxmaan* ee ku soo arooray aayadaha ka hadla cadaabta iyo ciqaabta. Tusaale: suuradda Maryan waxa ku jirta aayaddan:

﴿يَٰٓأَبَتِ إِنِّيٓ أَخَافُ أَن يَمَسَّكَ عَذَابٌ مِّنَ ٱلرَّحۡمَٰنِ﴾

*"Aabbe, waxa aan ka cabsanayaa in uu ku taabto cadaab ka ahaaday Allaha naxariista badan."*

Wax aan isweydiiyay: *maxaa uu Alle u odhan waayay: cadaab ka ahaaday Allaha qasbidda badan?!* Maxaa yeelay, waxa aan u malaynayay in aanay cadaabta iyo naxariistu kulmi karin! Hase yeeshee, gadaal baa aan ka ogaaday in Eebbe uu u naxariisanayo cadawgiisa amminka uu cadaabayo! Tusaale: Alle waxa uu u cadaabaa addoomihiisa si ay uga soo noqdaan gaalnimada iyo madax-adayga. *Waana naxariis Rabbi.* Dulmifalaha ayaa uu cadaabayaa, si ay ugu cibro qaataan qayrkii. *Waana naxariis Alle.*

Haddii addoomaha badhkood la iska cadaabo, waa dulmi badhax la'. Sidaas awgeed, ayaa uu yimid *magacani,* si uu ugu jeediyo aragga Muslinka in aanu ahayn cadaabkani dulmi ku aaddan addoomaha. Waayo, Alle waa uu ka dheer yahay falkan. Mar kalena, waa caadil ku xisaabiya dambiilaha waxa uu muto oo qudha.

Xikmadaha uu magaca *ar-Raxmaan* ugu soo arooro aayadaha cadaabta waxa ka mid ah; in ay naxariista Alle ka mid tahay in uu cadaabo gaalka ama cidda mudata ciqaabta. Laguma cadaabo wax aanu galabsan, suurtagalna ma aha in ay malaa'igta cadaabtu xadkeeda soo dhaafto oo ay ku qaaddo addoonka kiis aanu mudan.

---

[1] Tafsiirka ibnu Kasiir: 6/119.

Arrimahani waa naxariista Eebbe, waana isku munaasib magaca *ar-Raxmaan* ee ku soo arooray aayaddan iyo wixii la midka ah. Docda kale, Eebbe waxa uu ka leeyahay arrinkan xikmado kale oo aynaan garanayn. Balse waxa aan leeyahay: haddii ay naxariista Alle ka mid tahay in uu ciqaabo, kana aarguto addoonkiisa gaalka ah; qaabkee ayay noqonaysaa naxariista uu siinayo addoonka rumaysan ee qirsan abaalmarintiisa iyo siintiisaba?!

## Hoyga Waayeelka

Maankaaga wali ma ku soo dhacday in ay dhimashadu ka mid tahay naxariista Alle? Iyo in aanay noloshani qiimo yeelateen haddii aanu wed jiri lahayn? Sawiro in Alle ugu talagalay dadku in ay noolaadaan kun sano. Ii warran oo ilaha iyo kaabayaasha dhaqaale ee kownkani ma ku filnaan lahaayeen konton bilyan oo qof iyo dheeraad? Iska dhaaf ilaha nolosha sida: Ogsajiinta, biyaha, dhirta iyo xayawaanka oo isweyddii: *ma la heli lahaa dhul qaada balaayiintan qof?!* Weyddiimahan madaxdaaliska ah iska dhaaf oo sawiro adiga oo ka soo noqday shaqada, gurigana ay kugu sii sugayaan 50 waayeel ah oo iskugu jira awoowyaashaa iyo ayeeyooyinkaa, waajibna ay kugu tahay quudintooda iyo daryeelkoodu! Runtii, waxa aad masuul ka noqon lahayd guri-waayeel ay ka buuxaan waalidkaa oo ay waajib kugu tahay u samafalkooda, quudintooda iyo ka fududaynta xanuunnadii boqollaalka sano! Sidee ayaa aad u heli lahayd waqti aad ku qabsato hawlahaaga iyo mid aad kula ciyaarto ubadkaaga?! Afar iyo labaatan saac, ku ma filna in aad qabato hawlaha waalidkaa!

Docda kale haddii aad sii noolaato, dhab ahaantii waxa aad ku biiri doontaa waalidka oo awoow ayaad noqon doontaa, waxa aanad dareemi doontaa xanuunnada nolosha iyo diihaalkii boqollaalka sano! Dunidani fadeexad iyo foolxumo ayay isku rogi lahayd haddii aanay jirin dhimasho! Xumaan oo dhan waxa ka hufan Allaha ay naxariistiisu ka muuqato shayga aynnu neceb nahay in ka badan ka aynnu jecel nahay[1]!

---

[1] Haddaad dhimato geeridu mar bay, nolosha dhaantaaye.
Salaan Carrabey (AHUN)

## Fiiriya

Layaabyada amarka Eebbe waxa ka mid ah in uu faray addoomihiisa fiirinta raadadka naxariistiisa (roobka)! Arrinkanna waxa inna illawsiiyay waayaha noloshan qallafsan iyo maalmeheeda qadhaadh. Badankeennu ma fulinno amarkan, oo badhkeen baan xusuusan in uu jiro. Naxariista Alle ayaa ka muuqata arrimo badan. Si cadna waxa ay uga sii muuqataa dhulkan cagaarka isku rogaya amminka ay ku hoorto naxariistu. Rabbi Weyne waxa uu ku yidhi Qur'aanka kariimka ah:

﴿ فَٱنظُرۡ إِلَىٰٓ ءَاثَٰرِ رَحۡمَتِ ٱللَّهِ كَيۡفَ يُحۡيِ ٱلۡأَرۡضَ بَعۡدَ مَوۡتِهَآ ﴾ الروم: ٥٠

*"Fiiri raadadka naxariista Alle. Qaabkee ayaa uu u soo noolaynayaa dhulkan dhimashadiisii ka dib!"*

Marka aad aragto aabbe ciyaarsiinaya inankiisa yar oo ay qalbigiisa buuxiyeen jacayl iyo farxadi; fiiri naxariista Alle iyo qaabka ay qalbigiisa ugu samaysay raadkan quruxda badan iyo dareenkan hufan. Marka aad dhaayaha saarto qof gaajaysan oo macaansanaya dhadhanka raashinka, fiiri naxariista Ilaahay. Waayo, naxariistiisa ayaa ka dambaysa dareenkan diirran. Xitaa in aad fiiriso raadadka naxariista, ayaa ka mid ah naxariista! Haddii aanay jiri lahayn in Eebbe kuu naxariistay, waxba ma aad fiiriseen, waxba ma aad maqasheen, waxbana ma aad dareenteen! Ii sheeg goob ka mid ah kownkan oo ay ka maqan tahay naxariista Alle? Ii tilmaan walaxda aan ku dhaqaaqin naxariistiisa?!

In aad waaberiga maqasho codadka shimbiruhu, waa naxariis Alle. Alle, ayaa ogaaday in uu laxanka shimbiruhu ku illawsiinayo xanuunkii iyo daalkii shalay. Shimbir baa ka heesaya daaqaddaada. Adna waxa aad u malaynaysaa in uu iska ciyaarayo, balse waa naxariis Eebbe.

Qaariga codka macaan ee ku xarragooda Qur'aanka kariimku, waa jaad ka mid ah naxariisaha Rabbi ee ugu waaweyn! *Muxammed Rafcat, Cabdibaasid, Manshaawi iyo Xusari* oo aad ku bilaabato subaxaaga nuuraya, ayaa ka mid ah naxariista Alle. Qaabkee ayay u ekaan lahayd noloshaadu, haddii aanay jirin codadkan macaan ee qalbiga ka buuxinaya khushuucda iyo jacaylku?!

Ka fur qalbigaaga daaqad adiga oo u hoggaansamaya amarka Alle ee ku aaddan fiirinta kownka iyo ashqaraarradiisa. U fiirso naxariistan Ilaahay ee kugu hareeraysan. Ku noolee qalbigaaga raadadkan, adiga oo korodhasanaya jacaylka, weynida iyo qaddarinta Rabbigaa!

# الْجمِيلُ

Aniga oo qoraya weedhahan ayaan weyddiiyey wiilkayga: ii sheeg shay qurux badan! Waxa aan u qaadan la’yahay warcelintii uu bixiyay isaga oo siddeed jir ah! Nolosha oo dhan ayaa qurux badan, ayaa uu igu yidhi!

# AL-JAMIIL (QURUX BADANAHA)

Ma jirtaa naf fayow oo aan jeclayn, raadin, xiisayn, ka sheekayn, isla jeerkaasna aan ka helin quruxda raaxo, wehel iyo dhaymo?! Rabbigeen waa qurux badane, Suubbanaha oo dadka ugu aqoon badnaana waxa uu yidhi: *"Alle, waa qurux badane, jecel quruxda[1]."* Alle, iskii ayaa uu u qurux badan yahay, wixii ka soo hadhayna waxa uu la jecel yahay quruxda. Sidaas awgeed, ayaa uu Eebbe noolaha ugu uumay nidaam qurux badan, diimahana ugu soo dejiyay hab waafaqsan xeerarka quruxda!

Ibnu Qayim AHUN waxa uu yidhi: *magacyada Ilaahay ee wanwaanagsan waxa ka mid ah al-Jamiil, quruxdiisuna waa afar heer: quruxda laf ahaantiisa, quruxda sifooyinkiisa, quruxda falalkiisa iyo quruxda magacyadiisa*[2].

Si siman aynnu ula dawaafno magacan, si aynnu daaha uga qaadno wax ka mid ah quruxdiisa, weynidiisa iyo dhammaystirnaantiisaba.

## Subxaanallaah!

Waxa la wariyey Saleebaan binu Daa'uud baa baxay isaga oo saaran kursigiisii boqortinnimada, hareerahana ay ka fadhiyaan saaxiibbadii. Dabayl baa wadday, daruuruhuna waa ay u hadhaynayeen. Isaga oo xaaladdan ku sugan, ayaa uu ku soo baxay laba dumar ah oo reer banii Israa'iil ah. Inta ay dumarkii la dhaceen wixii ay arkeen ayay yidhaahdeen: *Subxaanallaah! Dhab ahaantii, reer Daa'uud waxa la siiyay boqortinnimo weyn!* Saleebaan baa maqlay hadalkoodii. Dabadeeto markii uu la sinmay, ayaa uu istaagay, waxaanu weyddiiyey: *markii aad i aragteen maxaad tidhaahdeen?* Waxa ay ugu warceliyeen: wax aan wanaag ahayn ma aannu odhan. Waxa aannu nidhi: Subxaanallaah! Dhab ahaantii, reer Daa'uud boqortinnimo weyn baa la siiyay! Saleebaan ayaa ugu jawaabay: "*Subxaanallaah", ayaa ka wanaag badan wax kasta oo la siiyay reer Daa'uud*[3].

---

[1] Muslin: 1/93

[2] Kitaabka al-Fawaa'id ee uu qoray Ibnu Qayim: 182.

[3] Taariikhda Dimishiq ee Ibnu Casaakir: 22/275.

Ma sawiranno in Alle abuuray makhluuq weyn oo qurux badan, ama layaab leh, dabadeeto uu qof ka mid ah addoomihiisu ka yidhi waqti waqtiyada ka mid ah: *Subxaanallaah!* Alle waxa uu abuuraa shay qurux badan, waayo isaga ayaa qurux badan. Allaha quruxda badan, fal qurux badan baa ka soo fula. Wax qurux badan baa uu abuuraa, sababta oo ah, quruxda ayaa uu jecel yahay! Waxa uu u abuuraa quruxda; si uu addoonku ugu tasbiixsado, uguna mahadnaqo isaga oo fiirinaya quruxda. Alle, Wuxuu u abuuraa quruxda; si ay nafaha addoomuhu ula qabsadaan!

## Salladdii Cajiibka ahayd!

Bari hore ayaan u fiirsaday quruxda weyn ee ku jirta waxyaabo fudud oo aynnu si maalinle ah u aragno, u maqalno ama gacanta ugu qaadno. Arrinkani waxa uu igu dhaliyay in aan tago tukaan oo ka soo iibsado wax ka mid ah walxahan; si aan ugu fiirsado quruxda soo-jiidashada leh ee ku jirta abuurta iyo samaynta Rabbi SWT! Makhluuqan cajiibka ahi waa khudradda! Ugu yaraan jaad kasta oo ka mid ah khudradda, ayaa aan ka soo iibsaday xaddi aad u kooban, ka dibna weel baa aan ku riday. Aniga iyo ubadkayga ayaa fadhiisannay annaga oo mid mid ugu fiirsanayna, Allena xumaanta ka hufayna.

Ma aan ogayn in aan daymo gaar ah u yeelan doono feker bari dambe igu xoogaystay: *quruxda abuurta iyo la abuuraha, iyo dareennada quruxda iyo raaxada leh ee ay ku dhaliyaan naftu in ay ka mid yihiin ujeeddooyinka abuurta, iyo in ay quruxda abuurtu ka mid tahay xujooyinka sida cad innoo tusaya quruxda abuuraha. Allaha quruxda badan ayaa abuura shay qurux badan.*

Waxa dhab ah tasbiixda ku badan Qur'aanka kariimka ah iyo in la innagu faray Sunnadu, in ay tahay abuuraha oo ku taagay kownka tiirar cajiiba; oo qaab abuura u tasbiixsada, una baahnayn feker iyo daliiltoona!

## Liin iyo Rummaan

Tusaale: jiritaanka liinta ayaa mudan in aad tidhaahdo: *Subxaanallaah!* Jiritaanka shay aanad Eebbe ka baryin in uu abuuro, shay aanad sii ogayn baahida aad u qabi doonto, isla markaasna koobsanaya dheefo aad u badan, ayaa ku filan in aad Rabbi kaga hufto xumaan oo dhan!

In uu Alle u abuuray habkan wareegsan ee quruxda badan iyo muggan fudud, ayaa iyaguna keensanaya tasbiix labaad! Midabkan soo-jiidashada leh ee uu Rabbi u sameeyay ayaa isna sababaya tasbiix kale.

Habkan cajiibka ah ee uu u qaabeeyay ee ay isku haystaan gudeheedu, ayaa mudan tasbiix gundheer! Macaanka ay naftu ku raaxaysato ee uu u sameeyay, ayaa ka dhiga wadnaha mid la garaacma tasbiix iyo weynayn!

Xabbad liina ayaa u baahan in boqol jeer loogu tasbiixsado abuuraha Weyn, ee bal ka warran sallad khudrad ah oo ay ka buuxaan midabbada quruxda iyo jaadadka dhadhanku! Ka warran haddii aad u fiirsan lahayd waxyaabaha ka sarreeya salladda ee ah layaabyada noolayaashan mar la aragga ah! *Subxaanallaah. Eebbow, maxaa kaa weyn!*

Maalin maalmaha ka mid ah ayaan arkay xabbad rummaana oo saafiya oo midhaheeda u nidaamisay hab sugan oo cajiib ah. Muuqaalkeeda ayaa qalbigayga ka buuxiyay dareen cusub, aniga oo la dhacsanna waxa aan qoray: *muuqaalka rummaanka ee cajiibka ah, midabkiisa soo-jiidashada leh, dhadhankiisan macaan iyo habka sugan ee ay u siman yihiin madhihiisu, waxa ay ku filan yihiin burinta doodaha mulxidka ugu madaxa adag adduunkan!*

Weyddiin ayaa igu soo dhacda mar kasta oo aan u fiirsado khudradda: muxuu Alle u abuuray khudraddan quruxda badan? Miyaanay ku filnayn in ay koobsato nafaqooyin, fiitamiinno iyo faa'iidooyin caafimaad? Maxaa ay u qurux badan tahay? Weyddiintan oo marar badan igu soo noqnoqotay, uma helin warcelin ku filan, laakiin waan dareemi jiray.

## Balanbaalista

Mulxidiintu waxa ay arkaan quruxda balanbaalista, abuurta Alle ee ka muuqata baalasheeda cajiibka ah iyo midabbadeeda bilicdasan. Haddana, caqliyadooda uma hoggaamiyaan abuuraha iyaga oo leh: *Subxaannallaah!* Taa beddelkeeda, xalal kale ayay raadiyaan iyagoo odhanaya: midabbada iyo naqshadaha ay dabeecadda indhaha li'i siisay jaadkan ka midka ah cayayaanka, ujeedkiisu waa in uu soo jiito jinsiga kale oo ay isguursadaan, ka dibna ay sii jirto oo sii socoto noloshani!

Run ahaantii, waa wax lagu qoslo in ay keenayaan sababo ay Alle kaga baxsanayaan! Laakiin, meel dheer ma jiraan.

Maxaa ay kaga jawaabayaan sirta ka dambaysa quruxda ubaxa? Ma doorashada dabeecadda ayaa siisay midabkan, muuqan iyo dhadhankan macaan; si ay ugu soo iishaan midhaha bacriminayaa! Maxaa ay kaga warcelin doonaan cananiska, cinabka iyo tufaaxa? Waa maxay aragtida ay ku xalliyaan dhibaatada rummaanka? Waa maxay baahida ku dirqiday shinnida isqaabayntan quruxda badan?!

Haddii ay dabeecaddu si kedo ah u ogaatay midabka cawlaanku in uu soo jiito labka, maxay iskugu ekaan waayeen balanbaalisuhu? Maxaa ay u jiraan balanbaalis cawlan, mid buluug ah iyo mid caddaan-madow ahi?

Haddii uu labka balanbaalistu raadiyo dhedigga, isla markaana uu u baahan yahay midabbo soo jiidasho leh, waa maxay sirta ka dambaysa in uu isku dhabooqo midabbada quruxda badan, maadaama oo ay ahayd in ay isqurxiso dhedigga la doonayaa?! Maxay labka cayayaanka iyo dadku u wadaagaan dhadhanka? Waayo, waxa aad arkaysaa iyaga oo la dhacsan midabbo iyo muuqaallo isku mid ah!

Haddii ay dabeecaddu awooddo kala-beddelidda midabbada iyada oo tixgelinaysa dookha labka balanbaalista, maxaa ay sidoo kalena u beddeli weyday dhaqanka labka, oo ay dhediggu u soo jiidan waayeen labka iyada oo aan la tixgelinayn midabkeeda?

Mulxidku inta aanu ka gaaloobin Rabbigii, waxa hurran ka jawaabidda dhammaan su'aalahan badan ee banka keenaya dareenkiisan qarsoon ee qiraya jiritaanka Eebbe, weynidiisa, awooddiisa iyo quruxdiisa!

Mar aan qorayay weedhahan ayaan weyddiiyey wiilkayga yar: ii sheeg shay qurux badan! Waxa aan layaabbanahay warcelinta siddeed jirkan. *Nolosha oo dhan ayaa qurux ah!* ayaa uu igu yidhi. Run baa uu ku addimay. *Ma waxa jirta xagal ka mid ah kownkan oo aan qurux lahayn?!*

## Codka Waaberiga

Imaamu Maalik ayaa waxa u yimid nin aad u murugaysan oo ku dhawaaqay hadal uu u maleeyay in ay kaga furantay xaaskiisii. Ninkii baa yidhi: sheekhow, xaaskayga ayaa aan ku idhi: *haddii aanad ka qurux badnayn dayaxa, waa aad iga furan tahay*. Imaamkii ayaa ugu warceliyey: ma

aad furin xaaskaaga! Ninkii ayaa yidhi: sidee? Saw dayaxu ka ma qurux badna?! Imaamkii: iyada ayaa ka qurux badan! Miyaanad akhriyin:

﴿ لَقَدۡ خَلَقۡنَا ٱلۡإِنسَٰنَ فِيٓ أَحۡسَنِ تَقۡوِيمٖ ﴾ التين: ٤

*"Waxaannu u abuurnay dadka, qaabka ugu wanaagsan."?*

Dhibka ina haysta ayaa ah in aynnu quruxda insaanka ku koobnay muuqaalka indhaha, astaamaha wajiga iyo quruxda dhoollacaddayntiisa. Waxa aynnu hilmaamnay quruxda joogga iyo laba lugood oo lagu socdaa in ay ka qurux badan tahay afar! Waxa aynnu hilmaamnay quruxda hadalka insaanka iyo qaabka uu Alle SWT uga duway xayawaanka! Iyo qaabka uu u foolxumaan lahaa haddii la huwin lahaa harag iyo dhogor!

Waaberiga hore waa xilli ka mid ah xilliyada quruxda, shay kasta oo la xidhiidhaana waa qurux! Waxa aad ku toosaysaa eedaanka salaadda subax ee soo jiidashada leh, iyo iftiinka buluugga ah ee aragga sixraya. Dabadeeto waxa soo baxa fallaadhaha qorraxda ee astaanta u ah maalin cusub. Haddana, shimbiraha ayaa heesa! Ma waxa aan idhi: shimbiraha?! Oo ma waxa jirta qurux loo dhigo laxanka iyo luuqda kala duduwan ee shimbiraha! Xitaa codka xamaamka ee qarsoon ayaa astaan u ah in abuuraha quruxdu uu waxyaabaha qaar qarsoon ka dhigay qayb ka mid ah quruxda, taas oo aan qiimahan yeelateen haddii aanay dahsoonayn.

Haddaba, si aad u aragto quruxda Alle, iyo in uu jecel yahay quruxda lafteeda, fiiri shimbirahan iyo guud ahaan jaadadkooda, midabbadooda iyo dhaqdhaqaaqooda! Eebbe, ma jecla qurux qudha, balse waxa uu jecel yahay duni wada qurux ah oo la ciirciiraysa farsamooyinkiisa cajiibka ah!

## Isdoqomayn

Waxba ugama baahnid in aad xujooyin maangal ah u laqinto gaalkan diiddan jiritaanka abuurihiisa; si uu ugu soo laabto jidka hanuunka. Balse waxa lagaa doonayaa in aad dhegta ugu riddo luuqda kala duduwan ee shimbiraha. Qofka diidaya ee dafirsan jiritaanka Alle, waxa uu u baahan yahay in uu u dhiibo caqligiisa yar arrimaha maqan ee aanu xaqiiqadooda uga war roonayn xitaa ka rumaysani!

Sidoo kale, midka dafirsan jiritaanka Alle, waxa uu u baahan yahay in uu noqdo qaybi[1]; si uu indhaha uga laliyo daliillada iyo tilmaamaha aadka u badan ee daqiiqad kasta oo noloshiisa ka mid ah farta ugu fiiqaya jiritaanka Eebbe! Alle-diidku waxa uu u baahan yahay in uu ku biiro bahda ku fooggan dabeecadda, si uu u rumeeyo isburinno, khayaali iyo doqonniimooyin tiro beel ah!

[1] **Qaybi:** waa eray afCarabiya oo uu asalkiisu ka yimid **qayb,** oo ah maqnaasho. Halkan waxa looga jeedaa dadka aadka isugu mashquuliya arrimaha maqan sida: Ilaahay, Malaa'igta, Qiyaamaha, Jannada iqb.

# الوَهَّابُ

Tusaale qof indho la' oo haysta hantidii Qaaruun ayaa kaa codsaday in aad xoolihiisa oo dhan kaga beddelato araggaaga. Hanti intee le'eg ayaa aad ka codsan lahayd? Waxa run ah in aanad araggaaga ku beddelateen hantidii Qaaruun oo dhan! Galladdani (araggu) waxa ay ka mid tahay nimcooyinka ay dhif iyo naadir tahay dareemiddoodu!

# AL-WAHAAB (HIBO BADANAHA)

Magacyada wanwanaagsan ee Ilaahay waxa ka mid ah; *al-Wahaab* oo u taagan maamuus, deeqsinnimo iyo hodantinnimo! *Al-Wahaab* waxa uu tusayaa xeeldheeri, Eebbena ma aha hibo-bixiye oo qudha, hase ahaatee waa hibo-badane. Sidaas awgeed, ayaa uu Alle iskugu bixiyay *Al-Wahaab!* Waxa uu wax siiyaa ka weyddiisata iyo ka aan weyddiisan, ka baahan iyo ka hodanka ah iyo ka caabuda iyo ka aan caabudin!

## Hibo Badane

*Eebbe waa hibo badane; waayo wax badan baa uu bixiyaa.* Deeqsiyadu mar ayay wax ku siiyaan, haddii aad mar labaad wax weyddiisana, waa ay kaa meermeeraan, Allena, siintiisu xuduud ma laha, raalli baanu kaa noqdaa mar kasta oo aad wax weyddiisato. Waxa kale oo uu ku faray baryadiisa:

﴿ ٱدۡعُونِيٓ أَسۡتَجِبۡ لَكُمۡۚ ﴾ غافر: ٦٠

Marka ay addoomuhu
Niyad ku Alle-tuugaan
Naxariiste Eebbow.
Yamyam (AHUN)

Haddii aad isku daydo tirinta hibooyinka uu Alle ku siiyay, adiga uun baa daali doona.

Marka aad doonayso in uu Alle SWT kuu hibeeyo shay, jidadka loo maro waxa ka mid ah in aad ku xusto baryadaada hibooyinkii hore; si ay kuugu noqdaan xadhig aad ku soo dabato hibooyin cusub. Kani waa ergaygii Alle ee Sakariye CS oo ku leh baryadiisii weynayd:

﴿ وَلَمۡ أَكُنۢ بِدُعَآئِكَ رَبِّ شَقِيّٗا ﴾ مريم: ٤

*"Eebbow, ma ahayn mid ku guuldarraysta baryadaada."*

Ma ahayn mid ku hungooba baryadaada ee Eebbow tanna iga aqbal!

Ibnu Caashuur AHUN[1] ayaa yidhi: *"Baryooyinkaygii hore iguma aad soo celin jirin: Sakariye waxa uu Alle uga bartay in uu ka aqbalo duco kasta [2]."*

*Eebbe waa hibo weyne; waayo wax weyn ayaa uu bixiyaa:* deeqsiyada ilma Aadan -sida caadada ah- hanti ayaa ay hibeeyaan. Hase ahaatee, deeq uu Rabbi weyne bixiyo, hantida ayaa ugu yar oo waxa uu bixiyaa *nolol, caqli, ubad, nebinnimo, madaxtinnimo, boqortinnimo iyo karaamooyin lagu dawakhayo!*

Haa, siintiisu waa wareer, oo Saleebaan CS ayuu siiyay boqortinnimo aan u cuntamin cid ka dambaysa. Sakariye CS oo cad iyo lafo noqday, ayaa uu ugu deeqay carruur. Nuux CS ayaa uu guusha siiyay, markii uu da'siiyay roobkii qarqiyay gaal kasta oo ku dul sugnaa arlada! Muuse CS ayaa uu u kala dhambalay baddii. Ciise CS ayaa uu u qaaday xagga sare. Muxammedna CS waxa uu u dheelmiyey Sidratu al-Muntahaa[3].

*Eebbe cadawgiisa ayuu siiyaa hibadiisa:* suurtagal ma aha in uu ina Aadan maamuuso cadawgiisa iyo cidda ay is hayaan. Alle SWT, xitaa cadawgiisa u badheedha caydiisa, ayaa dheef ku leh hibadiisa iyo siintiisaba! Hibada jaadkan ah ayaa ka dhigta qalbiga addoonka mid qirsan deeqsinnimada Alle. Ma jiraa cadow ka daran Ibliiskii uu Eebbe u dheereeyay da'da?!

﴿ قَالَ رَبِّ فَأَنظِرۡنِيٓ إِلَىٰ يَوۡمِ يُبۡعَثُونَ ﴾ الحجر: ٣٦

*"Ibliis baa yidhi: Rabbiyow, ii kaadi ilaa maalinka isa-soo-saarka."*

Alle, Ibliis ayaa uu u hibeeyay nolol aanu siin nebiyadiisa ugu dhow!

﴿ قَالَ فَإِنَّكَ مِنَ ٱلۡمُنظَرِينَ ، إِلَىٰ يَوۡمِ ٱلۡوَقۡتِ ٱلۡمَعۡلُومِ ﴾ الحجر: ٣٧ - ٣٨

*"Waxa aad ka mid tahay kuwa loo kaadiyey ilaa maalin cayiman."*

Sababahan iyo qaar kale dartood, ayaa uu Rabbi u yahay *al-Wahaab.*

---

[1] **Maxammed Daahir Caashuur (1879-1972kii):** waa caalim iyo fiqiyaqaan Tuunisiyaan ah, oo ay qoyskiisu ka soo jeedaan waddanka Isbeyn. Waa buuni ku talaxtegay laamaha kala duduwan ee culuumta shareecada iyo suugaanta. Dhaxalka uu innooga tegay sheekhu waxa lagu qiyaasay afartan kitaab oo ay ugu caansan yihiin labada kitaab ee al-Taxriir wa at-Tanwiir iyo Maqaasid ash-Shariica al-Islaamiya.

[2] At-Tanwiir wa At-Taxriir: 16/66.

[3] **Sidratu al-Muntahaa:** waa geedkii ay ag istaageen Nebiga NNKH iyo Jibriil CS habeenkii la dheelmiyay. Waa geed ku yaal midigta Carshiga, waana halka uu ku dhammaado cilmiga Malaa'igtu.

## Qiimaha Aragga

Dhibaatooyinka inna haysta waxa ka mid ah in aynaan ogayn qiimaha galladaha uu Ilaahay SWT innoogu deeqay. Haddii aynnu garan lahayn nimcooyinkan, macnaha *al-Wahaab* ayaynnu fahmi lahayn, ka dibna isaga ayaynnu weyddiisan lahayn! *Ma taqaannaa qiimaha araggaaga iyo Allaha kugu siiyay dalab la'aan intii aanad dareemin baahida aad u qabto!* Ka soo qaad qof indho la' oo haysta hantidii Qaaruun oo dhan ayaa kaa codsaday in aad xoolihiisa oo dhan kaga beddelato araggaaga. Hanti intee le'eg ayaa aad ka codsan lahayd? Waxa run ah in aanad araggaaga ku beddelateen hantidii Qaaruun oo dhan! Qodobkani waxa uu ka mid yahay nimcooyin ay dhif iyo naadir tahay dareemiddoodu! Ka warran haddii aad isku daydo tirinta nimcooyinka kale ee soo hadhay, ama ugu yaraan kuwa kuugu muhiimsan! Jidhkaaga oo qudha ayaa ka kooban balaayiin galladood. Ma taqaannaa sababta? Alle waa hibo badanaha bixiya hibooyinkiisa iyaga oo aan laga codsan! Waxa iswayddiin mudan: *haddii uu dalab la'aan ku bixiyay galladahan, ka warran kuwa la wayddiistana?!*

## Joogso

Wiil dhalinyar ah oo iska casilay xil sare oo uu ka yahay shirkad uu ka qaadan jiray mushahar fiican, haystayna gaadhi, guri iyo gabadh cad, isla jeerkaasna ku noolaa nolol fiican, ayaa ii warramay: nimcooyinkan oo dhami iima ay dhadhami jirin; waayo waxa aan iska dhex dabbaalan jiray xumaanta. Waqti waqtiyada ka mid ah ayaan aaday Maka; si aan u soo cumraysto. Xilligan, ayaan go'aansaday in aan faraha ka qaado xumaantii aan sannado badan ku dhex jiray. Eebbe ayaa aan kula ballamay in ay cumaradani soo afjarto maalmihii madoobaa, barbilawna u noqoto nolol cusub! Aniga oo ku gudajira guclayntii ayaa aan la kulmay saaxiib hore. Salaan iyo isxaalwaraysi ka dib, waxa aan weyddiiyey xarunta shirkad hebla ee Maka. Waa uu i tilmaamay saaxiibkay. Maalinkii xigay ayaa aan aaday xaruntii shirkadda. Halkaasna waxa aannu isku barannay masuul la dhacay qofnimadayda. Nasiib-wanaag, barri oo kale ayaa la gelayay waraysi shaqo (interveiw). Ninkii ayaa ii fududeeyay in aan ka qaybgalo.

Alle mahaddii, waa aan ku guulaystay oo shaqo ayaan helay, albaabada liibaantuna waa ay ii furmeen!

Hibo badanaha ayaa ku maamuusay deeqdiisa maadaama oo uu si dhab ah ugu soo noqday jidkiisa. Maalin qudha ayaana u dhexeeyay towbaddiisii iyo noloshan cusub ee badhaadhaha iyo barwaaqada leh!

Arrinkani ku ma koobna inankan, balse waxa la soo helayaa boqollaal uu Alle ku maansheeyay risiqiisa ka dib nolol macne la'aan ah oo ay ku jireen. Allaha Wahaabka ah ayaa meel kasta dhigay hibadiisa, ee keli ah dheh: *Allahayow, ka dibna filo wanaag!*

## Guuldarradii Barakaysnayd!

In badan baa aan la yaabay hadalkan Saleebaan CS:

﴿ رَبِّ ٱغۡفِرۡ لِى وَهَبۡ لِي ﴾ ص: ٣٥

*"Eebbow, ii dambidhaaf, iina hibee."*

*Qaabkee ayaa uu Saleebaan CS u kulmiyey dambidhaaf iyo dalab?!*

Waxa aynnu aamminnay *Codsigu (baryadu)* in uu ku ladhan yahay cibaadada iyo u dhowaanshaha Eebbe. Waaba Saleebaan oo ina baraya cashar ka mid ah casharrada baryada: *ka-soo-laabashada guuldarrooyinkaaga, uga faa'iidayso in aad codsato humaagyadaada ugu fog ee ugu durugsan!*

Ma codsan Saleebaan, guri qurux badan, qasri dheer iyo jasiirad dahab ah! Hase ahaate, waxa uu codsaday boqortinnimo aan u cuntamin cid ka dambaysa. Ka dibna, waxa uu ku soo xidhay baryadiisa magac ka mid ah magacyada Alle. Waxa uu ku soo afmeeray magac u qalma in la iskugu bihinbihiyo Allaha nool ee aan dhimanayn.

﴿ إِنَّكَ أَنتَ ٱلۡوَهَّابُ ﴾ آل عمران: ٨

*"Waxa aad tahay hibo badane."*

Waxaad tahay Alle aanay ku cuslaan hibooyinka waaweyni amminka uu bixinayo. Kan ku rejaynayaa ma fogaysanayo in aad siinayso waxa ugu weyn ee uu sawiranayo!

Nebi Saleebaan, wuxuu doonayay boqortinnimo gaara. Dabadeedna Allaha hibada badan baa siiyay tan ugu cajiibsan: *dabayl ku socota amarkiisa*

*iyo shayaadiin iskugu jira qaar wax dhisa, qaar badda quusa iyo kuwo xidhxidhan.* Muddo kooban ayay dabayshu Saleebaan iyo xertiisa iskaga gudbin jirtay bari iyo galbeed. Shayaadiintuna waxa ay quusayeen badaha guntooda, si ay ugu keenaan kaydadka iyo macdanaha ugu qaalisan. Waxa kale oo ay dhisayeen dabaqyada ugu quruxda badan dunida.

Ma waxa ay kula tahay in Alle innoogu sheegay layaabyadan in aynnu ku xidhanno Saleebaan oo dhintay boqollaal sano ka hor, mise in aynnu ku xidhanno ma-dhintaha, galladahanna uga codsanno qaab kalsooni ku dheehan tahay? Ma waxa ay kula tahay in Eebbe u sheegay deeqdan si ay u noqoto tix Qur'aan wanaagsana, oo aynnu akhrisanno iyada oo aan macno lahayn, mise in aynnu u rogno ducooyin iyo wardiyo aynnu ku qurxinno sujuuddeenna saqda dhexe habeenkii?!

Alle SWT, ayaa noloshaadan ka buuxiyay baahiyo, ka dibna ku leh: *hibo badane ayaa aan ahay!* Adna waxa aad garan la'dahay qaybta saddexaad ee is le'egtan: *i barya, waa aan idin aqbaliye.* Ma fahantay hadda?! Eebbe wax weyddiiso, baryadaadana ka dhig heerka ugu sarreeya.

Waxa aan kaaga warrami doonaa baryooyinkii aan xadka lahayn!

## Baryooyin aan xad lahayn

Waxa aynnu og nahay xikmadaha loogu xusay Qur'aanka kariimka ah qisooyinka nebiyada in ay ka mid tahay in aynnu ku dayanno. Haddaba waxyaabaha i soo jiitay waxa ka mid ah dhufsane-yaraha ay wadaagaan ducooyinka nebiyadu. In badan oo ka mid ah ducooyinkii la aqbalay, ayaa ku suntan astaan cajiib ah oo aad la yaabayso marka aad u fiirsato. Astaantani waa *duco u-qaadanwaa ah!*

Anbiyadu CS ma ay weyddiisan jirin Alle waxyaabo iska caadiya, balse waxa ay ka baryi jireen arrimo u qaadanwaa ah!

Kani waa Saleebaankii CS aynnu hore u soo xusnay ducadiisa:

﴿رَبِّ ٱغۡفِرۡ لِي وَهَبۡ لِي مُلۡكٗا لَّا يَنۢبَغِي لِأَحَدٖ مِّنۢ بَعۡدِيٓۖ إِنَّكَ أَنتَ ٱلۡوَهَّابُ﴾

*"Rabbiyow ii dambidhaaf, iina hibee boqortinnimo aan u qalmayn qof iga dambeeya, maxaa yeelay waxa aad tahay hibo-badane."*

Saleebaan CS ma weyddiisanayo Rabbi boqortinnimo weyn oo keli ah, balse waxa uu waydiisanayaa mid aan cidi uga dambayn! Haddaba, qaabkee ayay noqotay aqbalaaddii ducadani? Si toos ah ayaa loo aqbalay.

﴿ فَسَخَّرْنَا لَهُ ٱلرِّيحَ تَجْرِي بِأَمْرِهِۦ رُخَآءً حَيْثُ أَصَابَ ﴿٣٦﴾ وَٱلشَّيَٰطِينَ كُلَّ بَنَّآءٍ وَغَوَّاصٍ ﴿٣٧﴾
وَءَاخَرِينَ مُقَرَّنِينَ فِي ٱلْأَصْفَادِ ﴿٣٨﴾ هَٰذَا عَطَآؤُنَا فَٱمْنُنْ أَوْ أَمْسِكْ بِغَيْرِ حِسَابٍ ﴿٣٩﴾ ﴾

*"Waxa aannu u sahalnay dabayl dabacsan, oo ku soconaysa amarkiisa, taas oo aadaysa halka uu doono. Shayaaddiintana waxa aannu uga shakhirnay mid kasta oo muquurta badda, kuwo wax dhisi og iyo qaar kale oo katiinado lagu xidhxidhay. Tani waa deeqdayadii ee bixi, ama hayso xisaab la'aan."*

Kani waa Nuux CS oo amminkii ay dhibeen tolkii laga filayay in uu habaaro. Laakiin, gaalo oo dhan ayaa uu habaaray, oo waxa uu yidhi:

﴿ رَّبِّ لَا تَذَرْ عَلَى ٱلْأَرْضِ مِنَ ٱلْكَٰفِرِينَ دَيَّارًا ﴾ نوح: ٢٦

*"Rabbiyow, gaalada arladan joogta, madhi oo midh haka tegin."*

Tani waa duco cajiiba. In ay tahayna, waxa caddaynaya sida degdegga ah ee uu uga soo warceliyay Alle SWT:

﴿ فَفَتَحْنَآ أَبْوَٰبَ ٱلسَّمَآءِ بِمَآءٍ مُّنْهَمِرٍ ﴿١١﴾ وَفَجَّرْنَا ٱلْأَرْضَ عُيُونًا فَٱلْتَقَى ٱلْمَآءُ عَلَىٰٓ أَمْرٍ
قَدْ قُدِرَ ﴿١٢﴾ ﴾ القمر: ١١ - ١٢

Markuu Nuux ololihii
Aayadihii iyo diintii
Alle faray la yimidee
Ummadihii markaa jiray
Intaa ku addimayee
Dhegta uga afuufee
Ashahaata yidhiyee
Ay aqoonsan waayeen
Awooddiisa gaarka ah
Kii u isticmaalee
Arlada iyo samadii
Biyo uga afuufee
Afgambiyey Allahayow! (Yamyam AHUN)

Waa nebi Sakariye oo ay baryadiisu cajiib tahay. Nin da'a oo noqday cad iyo lafo soconaya, madaxu uu caddaaday, ooridiisuna ay madhalays tahay ayaa qaabkan cajiibka ah u ducaysanaya:

﴿ رَبِّ لَا تَذَرْنِي فَرْدًا وَأَنتَ خَيْرُ ٱلْوَٰرِثِينَ ﴾ الأنبياء: ٨٩

*"Rabbigayow, ha igaga tegin keli, adigaa ugu wanaagsan mid wax dhaxla e'."*

Saadaalaha oo dhan ayaa sheegay in aanay suurtagal ahayn ducadani! Haddaba, ma is dhiibay Sakariye CS? Maya, ee waxa uu ku ducaystay arrin ka sii yaab badan:

﴿ فَهَبْ لِي مِن لَّدُنكَ وَلِيًّا ۝٥ يَرِثُنِي وَيَرِثُ مِنْ ءَالِ يَعْقُوبَ ۖ وَٱجْعَلْهُ رَبِّ رَضِيًّا ۝٦ ﴾ مريم: ٥ - ٦

Ilaahii Sakariyiyo
Madhashada islaanta ah
Ubad ugu yaboohee
Siiyay inanka nebigee
Ka aqbalay su'aashee
Magacaan la aragiyo
Isamkana u bixiyee
Yaxye Eebbihiisow! (Yamyam AHUN)

Keli ah ma doonayn wiil, balse waxa uu codsaday mid gaar ah. Sidaas oo ay tahay, Allaha hibada badan ayaa yidhi:

﴿ فَٱسْتَجَبْنَا لَهُۥ وَوَهَبْنَا لَهُۥ يَحْيَىٰ ﴾ الأنبياء: ٩٠

*"Sakariye waa aannu ka aqbalnay oo waxa aannu u hibaynay Yaxye."*

Nebi Muuse CS ayaa qaab khushuuc ah u baryay Rabbi. Waxyaabihii uu weyddiistayna waxa ka mid ahaa arrin cajiib ah! Muuse, oo hadda uun nebi noqday, ayaa Alle ka baryay in uu walaalkiina ka dhigo nebi!

﴿ وَٱجْعَل لِّي وَزِيرًا مِّنْ أَهْلِي ۝٢٩ هَٰرُونَ أَخِي ۝٣٠ ﴾ طه: ٢٩ - ٣٠

*"Allahayow, kaaliye iiga samee ehelkayga. Haaruun oo walaalkay ah."*

Ma jiro qof aan Muuse ahayn oo walaalkii ugu duceeyay nebinnimo!

Allaha deeqsiga ah ayaa yidhi:

﴿ قَالَ قَدۡ أُوتِيتَ سُؤۡلَكَ يَٰمُوسَىٰ ﴾ طه: ٣٦

*"Dhab ahaantii, Muusow waa lagu siiyay weyddiintaadii."*

Eebbe ayaa ka dhigay Haaruun nebi garabsiiya walaalkii Muuse CS. Nebinnimada oo ah darajo aad u sarraysa, ayuu Alle u hibeeyay addoon ku mashquulsan noloshiisa oo aanay waligii ku soo dhicin nebi baa aad noqon doontaa. Sababtuna waa in walaalkii Muuse CS ugu duceeyay!

**Aqbal Iyo Ijaabo**

Markii aan u fiirsaday Qur'aanka kariimka ah, waxa aan ogaaday in uu xidhiidh xooggani ka dhexeeyo magaca hibo badane, hibada iyo ubadka! Haa, waxa laga yaabaa in Qur'aanka lagu xuso arrimo kale, sida: aqoonta iyo boqortinnimada. Hase ahaatee, xidhiidhka ka dhexeeya siinta ubadka iyo magacani waa mid adag oo sugan. Akhri aayadahan:

﴿ هَبۡ لِي مِن لَّدُنكَ ذُرِّيَّةٗ طَيِّبَةًۖ ﴾ آل عمران: ٣٨

*"Agtaada iiga hibee ubad wanaagsan."*

﴿ ٱلۡحَمۡدُ لِلَّهِ ٱلَّذِي وَهَبَ لِي عَلَى ٱلۡكِبَرِ إِسۡمَٰعِيلَ وَإِسۡحَٰقَۚ ﴾ إبراهيم: ٣٩

*"Waxa mahadsan Allaha weyni iigu hibeeyay Ismaaciil iyo Isxaaq."*

﴿ فَهَبۡ لِي مِن لَّدُنكَ وَلِيّٗا ﴾ مريم: ٥

*"Agtaada iiga hibee wiil."*

﴿ رَبِّ هَبۡ لِي مِنَ ٱلصَّٰلِحِينَ ﴾ الصافات: ١٠٠

*"Rabbiyow, ilme wanaagsan ii hibee."*

﴿ وَوَهَبۡنَا لَهُۥٓ إِسۡحَٰقَ وَيَعۡقُوبَ نَافِلَةٗۖ ﴾ الأنبياء: ٧٢

*"Waxa aannu u hibaynay Isxaaq, iyo Yacquub oo dheeraad ah."*

﴿ فَٱسۡتَجَبۡنَا لَهُۥ وَوَهَبۡنَا لَهُۥ يَحۡيَىٰ ﴾ الأنبياء: ٩٠

*"Baryadii waannu ka aqbalnay oo waxa aannu u hibaynay Yaxye."*

﴿ وَوَهَبۡنَا لِدَاوُۥدَ سُلَيۡمَٰنَۚ ﴾ ص: ٣٠

*"Daa'uud waxa aannu u hibaynay Saleebaan."*

﴿ يَهَبُ لِمَن يَشَآءُ إِنَٰثًا وَيَهَبُ لِمَن يَشَآءُ ٱلذُّكُورَ ﴾ الشورى: ٤٩

*"Alle, cidda uu doono ayaa uu u hibeeyaa dheddig, cidda uu doonana lab."*

Arrimaha ka dhasha cilmiga ay ku dheehan yihiin iimaanka iyo caqligu waxa ka mid ah in ay iswaafaqaan doonistaada iyo jidka aad u maraysaa. Tusaale: suurtagal ma aha boqor aad ka doonayso hanti in aad ku ammaanto *miskiinnimo iyo geesinnimo!* Waa in aad ku tilmaanto *maamuus, deeqsinnimo, waxbixin iyo samafal!* Sidaas si la mid ah, haddii aad Alle ka doonayso ubad; ma jiro wax ka qumman in aad adeegsato *al-Wahaab,* adiga oo soo xaadirinaya qalbigaaga, ku celcelinaya ducada, kuna kalsoon baryadiisa; waayo waa deeqsi hibo badan oo aanay waxba ku adkayn.

## Hibooyin

Deeqsinnimada Rabbi waxa ka mid ah in uu qaab hibayn ah u bixiyo darajo sare ilaa ay caqliyada qaar maamuuskiisa la dawakhaan!

Tani waa xaaskii Cimraan oo Alle ugu nadartay ilmaha uurkeeda ku jira in uu ka shaqayn doono guriga dahiran (Baytal Maqdis). Lab ayay u malaynaysay, balse waa dheddig! Labada jinsina isku mid ma aha. Hase yeeshee, Alle ayaa aqbalay nadarkii. Laakiin sidee? Hooyadan waxa uu u hibeeyay Maryan CS oo isku darsatay hoggaansan, khushuuc iyo cibaado badan, kana mid ah haweenka kooban ee dhammayska tiran! Alle SWT, deeqsnnimadiisa ayuu sii waday oo Maryan ayaa dhashay mid ka mid ah haldoorka aadanaha iyo shanta nebi ee xulka ah! Ciise CS!

*Xaaskii Cimraan, ma is lahayd ilaa heerkan ayaa la aqbalay nadarkaagii?!*

Alle SWT, ayaa u waxyooday nebi Ibraahin CS:

﴿ إِنِّي جَاعِلُكَ لِلنَّاسِ إِمَامًا ﴾ البقرة: ١٢٤

*"Dadka oo dhan ayaa aan hoggaamiye kaaga dhigayaa."*

Rabbi ayaa u hibeeyay hoggaamin oo xitaa raadkiisii baa noqday meel dahiran. Docda kale, isaga oo da'a ayaa la siiyay Ismaaciil, Isxaaq iyo Yacquub CS oo ka sii dambeeya. Ka dibna Alle waxa uu yidhi:

﴿ وَكُلًّا جَعَلْنَا نَبِيًّا ﴾ مريم: ٤٩

*"Dhammaantoodna nebiyo ayaa aannu ka dhignay."*

Ilbidhiqsigan, Ibraahin waxa u darnaa ilme keli ah, balse waxa arrin lala yaabo iyo deeqsinnimo xadhkaha goosatay ah waalid, wiilkiisii iyo wiil uu awow u yahay in ay wada noqdaan nebiyo!

Muuqaallada ina tusaya deeqsinnimada Rabbi SWT, waxa ka mid ah in uu camal yar kuugu gudo abaal weyn, waase haddii uu camalkani yahay mid loola jeedo Alle dartii!

Tani waa gabadh reer banii Israa'iil ah oo waraabisay Ey oomman. Alle ayaa geliyay janno ballaceedu le'eg yahay cirarka iyo dhulka.

Bal hadda isbarbardhig jannadan iyo kabbasho biyo ah! Mar kale isku halbeeg abaalmarintan iyo shaqada ay qabatay! Siintan waxa bixin kara uun Allaha Wahaabka ah ee aanay deeqdiisu xisaabta lahayn!

# الْحقُّ الْمُبينُ

Habeenku aad iyo aad ayaa uu u dhibaa gaalada iyo Alle-diidka; sababta oo ah, waxa uu xambaarsan yahay xasillooni hoos u dhigaysa buuqa Alle-diidnimada. Ka dibna, aayadaha Ilaahay ayaa ka soo dhex muuqda ninka maalinka cad diiddanaa jiritaanka Rabbiga weyn!

# Al-XAQU AL-MUBIINU

Magacyada Alle ee wanwanaagsan waxa ka mid ah *al-Xaqu al-Mubiinu* oo macnihiisu yahay Allaha runta ah ee aanu ka dambayn baadil, iyo Rabbiga sida cad u muuqda ee aan muran la gelin karayn *jiritaankiisa, sarrayntiisa iyo weynidiisaba. Shay kasta ayaa caddayn buuxda u ah jiritaankiisa.*

Addoonku, wax kasta oo uu fiiriyo, cod kasta oo uu maqlo iyo dhaqaaq walba oo uu sameeyaa, waa astaamo ina tusaya abuuraha iyo raadadka naxariistiisa; maxaa yeelay, waa Eebbe run ah oo muuqanaya, wixii ka soo hadhaana waa baadil fog iyo baadi cad.

## Fiiriya

Ma jiro shay u cad sida uu u cad yahay Allaha abuuray kownku. Dhan kasta oo aad fiirisana, waxa ka muuqda shay ku tusaya jiritaankiisa! Run ayaa uu sheegay Abu Nawaas[1] AHUN markii uu lahaa:

**وفي كل شيء له آية تدل على أنه الواحد**

Waxa kastoo dunidan yaalla
Waa aayad weynoo
Qirta waaxidnimadiisa[2]

Si joogto ah ayaa ay ii yaabgelisaa aayaddan weyn ee ku jirta suuradda Yuunus, muddo dheerna waan dul istaagaa. Alle isaga oo u jawaabaya Mushrikiintii codsaday astaamo tusaya jiritaankiisa, waxa uu yidhi:

﴿ قُلِ ٱنظُرُواْ مَاذَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِۚ ﴾ يونس: ١٠١

*"Dheh: u fiirsada astaamaha ku dhex sugan cirarka iyo dhulka."*

Aynnu dib ugu yar noqonno aayadda labaatanaad ee suuradda.

[1] **Abu Nawaas (762-813M):** Xasan binu Haani oo ku caanbaxay Abu Nawaas, waa gabyaa Carbeed oo ka mid ahaa foolaadkii suugaanta ee dawladdii Cabbaasiyiinta. Ahwaas ayaa uu ku dhashay, Basrana waa uu ku barbaaray. Abu Nawaas bilawgii noloshiisa waxa uu ahaa khamriile weyn oo ay waayaha noloshu jeexjeexeen. Hase ahaatee, waayadii dambe waa uu towbad keenay.

[2] Maxamed Shaaxuur.

﴿ وَيَقُولُونَ لَوۡلَآ أُنزِلَ عَلَيۡهِ ءَايَةٞ مِّن رَّبِّهِۦۖ ﴾ يونس: ٢٠

*"Waxa ay odhanayaan, miyaa lagu soo dejiyo aayad ka timid Rabbigii."*

Qureysh ayaa tidhi: *si aannu u islaamno, waxa aannu u baahannahay aayad keli ah! Ka dibna, aayadda labaatanaad ee suuradda Yuunus ayaa soo degtay:*

﴿ قُلِ ٱنظُرُواْ مَاذَا فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِۚ وَمَا تُغۡنِي ٱلۡأٓيَٰتُ وَٱلنُّذُرُ عَن قَوۡمٖ لَّا يُؤۡمِنُونَ ﴾ يونس: ١٠١

*"Dheh: u fiirsada aayadaha ku dhex sugan cirarka iyo dhulka. Aayadaha iyo digniinuhu waxba uma taraan duul aan Alle rumaynayn."*

Waxa jira boqollaal aayadood oo ka muuqanaya hareereheenna oo innooga baahan fiirin qudha; si aynnu u dareenno jiritaanka Rabbi SWT! Aayadahani waa kala *jaadad, qaabab iyo heerar.* Sidaas awgeed, ayaa uu Alle u yidhi: *"aayadaha ku dhex sugan cirarka iyo dhulka.";* si uu qof kastaa ugu fiirsado aayadaha ku hareeraysan ee uu ka dhex arkayo, ama uu ka dhex fahmayo weynida Alle. Daahir binu Caashuur waxa uu yidhi: *"waxa la xusay aayad kasta oo ku dhex sugan cirarka iyo dhulka, ujeedkuna waa in lagu jeediyo naf walba aayadda ugu dhow iyo daliilka ugu fudud[1]."*

Gaalada ayaa lagu yidhi: keli ah u fiirsada hareerihiinna. Waayo, shay kasta oo idiin muuqdaa waa astaan cad oo tilmaamaysa Eebbe SWT.

*Waa maxay aayadda aad codsanaysaan? Saw ma ogidin xitaa idinku in aad ka mid tihiin aayadaha Alle ina tusaya!*

Muuqashada Alle waxa ka mid ah in ay magaciisa ku dhawaaqaan xitaa kuwa ka gaaloobay ee diiddan jiritaankiisu! Sababta oo ah, waxa jira iimaan lafta iyo dhuuxa kaga jira oo ay isku dayaan in ay dedaan. Eebbe SWT, ayaa daaha ka fayday dabeecaddan oo waxa uu yidhi:

﴿ وَجَحَدُواْ بِهَا وَٱسۡتَيۡقَنَتۡهَآ أَنفُسُهُمۡ ﴾ النمل: ١٤

Damiirku hadduu qallalo
Hadduu dufan-raadis yahay
Daliilka hortiisa yaal
Waxaa kaga beegan daah (Hadraawi AHUN)

---

[1] At-Taxriir wa at-Tanwiir: 11/295.

Waxa jira iimaan ku dhex xididaystay oo ay ku qariyaan gaalnimada iyo la dirirka Alle! Haddaba, weyddiinta xanuunka badan ayaa ah: maxaa ay uga baxsanayaan Allaha kalgacalka badan? Maxay u diidaan jiritaanka Allaha islaweynida iyo sarraynta badan? Maxaa ku riixaya in ay dafiraan Allaha tudhaha iyo xog-ogaalka ah?!

Aqoonyahanka Physicska ee mulxidka ah Stephan Hawking ayaa ku yidhi buug ka mid ah buugta uu ku diiday jiritaanka Rabbi: *"markaas ayaynnu baran doonnaa sida uu u fekerayo Alle"* Alle ayaa ka hufan ereyadan liita! Akhriste, u fiirso sida uu Allaha xaqa ahi uga soo dhex muuqday qoraagan guud ahaanba diiddan jiritaankiisa. Waxa aad ogaanaysaa in ay dafirayaan waxyaabo ay si khasab ah ugu dhawaaqayaan qalbiyadoodu!

Mulxidka Steven Weinberg ayaa isna hoosta ka xarriiqay waxyaabaha uu tusayo magaca *al-Mubiin* oo yidhi: *dadka qaar ayaa ka aamminsan Eebbe, aragtiyo badan oo ilaa xad isbeddeli kara, halkaas oo ay ka heli doonaan meel kasta oo ay ka raadiyaan!*

Raadadka tusaya Alle ee ka muuqda noloshan oo dhan, si fiican ayaa ay u og yihiin kuwa diiddan jiritaankiisu. Mulxidiintu waxa ay la dhibban yihiin farabadnaanta aayadaha tusaya Rabbi. Sidaas awgeed, maalinba maalinka ka dambeeya waxa soo badanaya buugta ay muxlidiintu ku dafirayaan jiritaankiis; waayo, fartii dhaqaaqdaaba waa astaan tusaysa!

Markii uu magaca الله aad uga muuqday buugta aqoonyahanka xisaabta ee Albert Einstein oo ka mid ah madaxda ilxaadka ee casrigan, ayaa uu nin ka mid ardaydiisu isku hawlay sidii uu u caadiyeyn lahaa aragtidan oo waxa uu u bixiyay **Diinta Albert Einstein.**

Richard Dawkins ayaa cutub ka mid ah buuggiisa caanka ah ee God Delicios ku lafaguray arrinkan xanuunka badan. Yacnii in ay weedho iyo dabeecado huwan iimaan gundheeri ay ka soo muuqdaan hadallada Mulxidiinta. Dawkins waxa uu isku hawlay in uu arrinkan ka dhigo wax iska caadiya oo aan ka hor imanayn xeerarka ilxaadka ee diiddan jiritaanka Alle SWT! Shayddaankan, waxa hoosmartay in uu magacyada Alle ka mid yahay *al-Mubiin* oo ah meel kasta ka soo mudhe. Xitaa kuwa dafirsan jiritaankiisa, ayaa ka arka jiritaankooda!

## Habeen-badhka

Qof baa yidhi: *mulxidka ugu madaxa adag ayaa habeenkii isku beddela badh Muumin*! Habeenku aad iyo aad ayaa uu u dhibaa gaalada iyo Alle-diidka; waayo waxa uu xambaarsan yahay xasillooni hoos u dhigaysa buuqa Alle-diidnimada. Docda kale, aayadaha Rabbi ayaa ka soo dhex muuqda gaalka maalinka cad diida jiritaanka Rabbiga Weyn!

Qoraaga buugga Bilaa Isir ayaa yidhi: *saacaddu waa saddexdii habeennimo. Waxaan dhammeeyay qormo aan ku dafirayo jiritaanka Alle. Haddaba, markii aan is idhi seexo, ma aan awoodin in aan damiyo iftiinka; waayo, waxaan ka baqayay waxa uu Alle igu samayn doono*[1]*!*

Alle, waxa uu ka weyn yahay mid la diido, waanu ka muuqasho badan yahay mid aragga laga laliyo. Isla amminka aad isku dayeyso diyaarinta xujooyin maangal ah oo aad ku diidayso jiritaankiisa, ayaa aad arkaysaa qaar kale oo awood badan oo sugaya jiritaankiisa.

*Habeen-badhka marka aad jiifto sariirtaada, cabsida gelaysa qalbigaaga xilliga aad maqlayso onkodka roobku; waa xujo tusaysa Allaha ku abuuray qalbigaaga cabsidu in uu doonayo in uu islaweynidaada ku buriyo cabsi; si aad u rumayso!*

## Xog-ogaal baad tahay

Muuse CS ayaa ku yidhi Fircoon:

﴿قَالَ لَقَدۡ عَلِمۡتَ مَآ أَنزَلَ هَٰٓؤُلَآءِ إِلَّا رَبُّ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِ﴾الإسراء: ١٠٢

*"Dhab ahaantii, waad og tahay in aanay soo dejin xujooyinkan cid aan ahayn Allaha abuuray cirarka iyo dhulka."*

Run ahaantii, si wanaagsan ayaa aad u og tahay xaqiiqada oo naftaada ayaa kuugu filan fadeexad, Rabbinnimada aad sheegatayna waxa diidaya arrimo badan oo aad yaqiinsan tahay. Laakiin, sida uu Rabbi SWT xusay:

﴿إِن فِي صُدُورِهِمۡ إِلَّا كِبۡرٞ مَّا هُم بِبَٰلِغِيهِۚ﴾ غافر: ٥٦

---

[1] Naftiisa qofkii dulmiyey
Deyrkaaga Rabbow ka baxay
Muxuu halis daaqayaa!
Hadraawi (AHUN)

*"Laabohooda waxa ku jirta islaweyni aanay gaadhayn."*

Kibirku waxa uu duugaa midhaha iimaanka. Waxa uu isku dayaa in uu masaxo aayadahan xilli kasta ka muuqanaya kownkan iimaanka leh. Waxa uu ka shaqeeyaa sidii uu iimaanka uga tirtiri lahaa nafahan liita!

Albert Einstein ayaa si cad u yidhi: *"wax kasta oo aynnu baranno ama dareenno, waxa ka dambeeya shay aynaan ogaan karin*[1]*. Shaygani, si dadban ayaa uu inoo taabsiinayaa quruxdiisa iyo sarrayntiisa."*

Waa maxay shaygan uu Einstein gudaha ka dareemayo, balse aanu ku dhawaaqi karayn? *"Xaqii ayaa ay dafireen, hase ahaate nafahooda ayaa qiray."*

## Dabeecadda Dabeecadda!

Waa hore ayaa aan maqlay mulxid mar kasta oo uu shay carrabka ku adkaynayo ku dhaarta Alle! Ninkani waxa uu ku sigtay in uu yidhaahdo: *Alle ayaa aan ku dhaartay ee ma jiro Ilaahay!*

Waxa la wariyaa bandhig-suugaaneed ayay isku raaceen gabyaa Xaafid Ibraahin[2] iyo saaxiibkii Masheel oo mulxida. Haddaba, mar kasta oo ay dadweynuhu la dhacaan gabay, waxa ay ku dhawaaqayeen: *Allaah Allaah!*

Xaafid oo fiirinaya saaxiibkii ayaa ku yidhi: *Masheelow, maxaad ku dhawaaqaysaa saaxiib?* Masheel baa ku yidhi: *dabeecadda dabeecadda!*

Muran la'aan, qofka diiddan jiritaanka Allaha xaqa ahi waa doqon liita marka uu ku dhawaaqayo dabeecadda, amaba hadalladiisa caadiga ah!

Duufaan aad u daran oo geed iyo guriba garaacday ayaa ku dhufatay magaalada Istanbul. Runtii xaalad adag iyo dareen cabsi leh baa soo foodsaaray shacabka oo daaqadaha kala socday waxa dhacaya. Mid ka mid ah buundooyinka magaalada, waxa marayay mulxid ku laafyoonayay baaskiilkiisa. Waxa uu si toosa u daawanayay dabeecadda uu caabudo oo ku qaylinaysay. Isaga oo isqaadqaadaya ayaa uu isku maqiiqay buundadii. Haddaba, markii uu badhtanka marayay, ayuu la kulmay Allaha awoodda badan! Waxa uu arkay awoodda qasbaha (Alle) iyo xujo cad oo tusaysa

---

[1] Xaqiiqada daahirka ah
Dulmay kaga hoos jiraan.
Hadraawi (AHUN)

[2] Xaafid Ibraahin (1872-1932): waa suugaan dhaadhi Masaariya.

jiritaankiisa. Ninkan waxa uu la kulmay cabsi iyo walaac. Isaga oo ku jira xaaladdan, ayuu go'aansaday in uu faraha ka qaado ilxaadka, iimaankana u soo laabto! Mar dambe ayaa laga sheegay: *mulxid baa aan ahaa markii aan gelayay buundada, aniga oo iimaan lehna waa aan ka soo baxay*[1]*.*"

Ninkani isaga oo muumina ayaa uu ka soo baxay buundada; sababta oo ah Alle SWT waa xaqa muuqanaya!

## Ma Shaki baa ka jira?

Shan iyo labaatan sannadood ka hor, mar aan joogay dooxa *Qasaal* ee magaalada Daa'if, ayaa ay hurdo la'aani igu dhacday. Dabadeeto waxa aan ka baxay teendhadii aan jiifay. Runtii waxa amakaag iyo afkalaqaad igu noqday muuqaalka weyn ee kownkan la ciirciiraya nolosha. Waxa aan u fiirsaday xiddigaha widhwidhaya iyo gantaallada hadba dhinac u ridmaya! Xaqiiqdii, waxa aan dareemay in Alle SWT ka weyn yahay mid qarsoomaya. Waayo, ka uumay farshaxankan cajiibka ahi uma baahna in lagu sugo jiritaankiisa xujo ay fahmi karaan uun dadka maskaxda badani!

﴿أَفِي ٱللَّهِ شَكٌّ﴾ إبراهيم: ١٠

Xaqiiqada daahirka
Dulmay kaga hoos jiraan (Hadraawi AHUN)

*Sidaas ayaa uu Rabbi inna leeyahay! Ma waxa jira shay muran gelinaya Alle?!*

Nin reer miyi ah oo la wayddiiyey: maxaad ku baratay Rabbigaa? ayaa ku jawaabay abuurtiisa: *saaladu geela ayaa ay astaan u tahay, raadku kii maray ayaa uu ku tusaa, ee samadan wada xiddigaha ah iyo dhulkan wada waddooyinka ahi miyaanay ku tusayn Allaha maqalka iyo aragga badan!*

---

[1] Nin diiday inaad run tahay
Ku dooday inaanad jirin
Rabbow dunidaada bilan
Dunteeda ma sheegi karo.
Hadraawi (AHUN)

## Meydkii

Sidee ayaanu u jirin Allaha ku aqbala marka aad barido! Sidee ayaanu xaq u ahayn Allaha amminka ay musiibo kugu habsato aad dhankiisa u cararto, haddii uu xanuun ku taabtana, aad habeenkii baryayso!

Lorance Brown waa dhakhtar mulxida! Waxa uu dhalay inan qabta xanuun ka dhiga midabka jidhka *buluug;* maadaama oo aanay Ogsajiintu wada gaadhayn xubnaha jidhka oo dhan! Maalin maalmaha ka mid ah ayaa uu si degdeg ah inantiisa u geeyay cisbital. Ninkani, waxa uu sii ogaa in aanay waxba ka qaban karin dhakhaatiirtu xaaladdeeda maadaama oo uu hayay xanuun dilaa ahi! Dr. Lorance waxa uu yidhi: markii aan geeyay cisbitalka, bahda caafimaadka ayaa la wareegay, waxa aanay u gudbiyeen qaybta gargaarka degdegga ah. Waxa aan galay qol ka mid ah cisbitalka, oo aan kula khalaaweeyay abuuraha kownka oo aanan aamminsanayn!

Shan iyo toban daqiiqo ayaa aan ku jiray qolkii, waxa keli ah ee aan sugayeyna waxa uu ahaa qaado meydkaaga! Runtii waxa uu ahaa xilli adag. Ninkani in kasta oo uu diiddanaa Alle, haddana qolkan ayaa uu si cad ugu arkay! Si rejo leh ayaanu u yidhi: *Ilaahayow, haddii aad jirto ii bogsii inantayda*. Hadalkan ayaa uu ku dhawaaqay isaga oo og in aanay jirin cid wax bogsiisa oo aan Alle ahayn! Ogow oo waa dhakhtar sare, haddana ma awoodo in uu daweeyo inantiisa. Waa aan soo baxay. Mise waa bahdii caafimaadka oo si cajiiba u xanshaashaqaya! Isha ayaa aan wada mariyay. Waaba inantaydii oo fadhida, xanuunna aan dareemayn! Dhakhtarkii ugu weynaa ayaa isku deyayay in uu sheego sababaha ay u soo miiraabtay. Ka dhakhtar ahaanna, waxa aan ogahay in aanu run ka sheegayn arrinkan!

*Isaga oo mulxid ah, ayaa uu galay cisbitalka, isaga oo iimaan lehna waa uu ka soo baxay!*

﴿ وَيَعۡلَمُونَ أَنَّ ٱللَّهَ هُوَ ٱلۡحَقُّ ٱلۡمُبِينُ ﴾ النور: ٢٥

*"Waxa ay ogaanayaan in uu Ilaahay yahay xaqa muuqanaya."*

# الحكيمُ

Weedhaha caanka ah ee uu ku tiraabay aqoonyahanka xisaabta ee mulxidka ah Albert Einstein, ka dib markii uu sannado badan u fiirsanayay kownkan, lana dhacay sugnaanta abuurtiisa iyo amakaaga samaysankiisa, waxa ka mid ah in uu si khushuuc leh uga yidhi abuurihiisa: Alle ma ciyaaro laadhuuda!

# AL-XAKIIM (MURTI BADANAHA)

**Xikmaddu** waa arrinka oo lagu hubsado halka uu ku habboon yahay, falsamuhuna waa ka falkan sameeya! Murtidu, sifooyinka Eebbe ayay ka mid tahay, falsamane waa magaciisa wanaagsan. Alle SWT ayaa iska leh murtida xeeshadheer ee ay sireheedu ka muuqdaan wax badan oo ka mid ah abuurtiisa iyo arrinkiisa. Qaybo badan baa uu qariyay, wax ka mid ah murtidiisana waxa uu ku gaaryeelay addoomihiisa fekera, deedna waxa kordha kalsoonida, jacaylka iyo weynida ay u hayaan!

*Haddaba, sadarrada soo socdaa waa dalxiis iimaaniya oo ku saabsan magaca Alle ee al-Xakiim, iyo isku-day ruuxiya oo aynu daaha kaga feydayno raadadkiisa waaweyn ee ka muuqanaya noolayaashiisa, amaarradiisa iyo doonistiisaba.*

## Nafihiinna

Soddon sannadood iyo dheeraad ka hor, aniga oo ah wiil aad u yar, ayaa aannu la fadhiisannay qof. Wali waxa aan maankayga ka bixin hadal qiimo leh oo uu shakhsigani ka soo xigtay sheekh ka mid ah culimada. Qofkani waxa uu ka sheekeeyay wax ka mid ah xikmadaha Alle ee ku jira abuurta isaga oo soo daliishanaya Qur’aanka kariimka ah:

﴿ وَفِيٓ أَنفُسِكُمۡۚ أَفَلَا تُبۡصِرُونَ ﴾ الذاريات: ٢١

*“Abuurta nafihiinnana waxa ku dhex sugan astaamo tusaya awoodda Eebbe ee miyeydaan arkayn.”*

Shakhsigani waxa uu xusay arrin layaab leh oo ku saabsan abuurta Alle ee gacanta insaanka. Ka dib, araggayaga ayaa uu ku jeediyay jaadka haragga dabacdasan ee saaran dusha sare ee gacanta iyo midka adag ee ku dadan qaybta hoose ee gacanta. Xikmadda ka danbaysa ayaa uu nooga warramay oo waxa uu yidhi: haddii haraggan jilicdasan ee sare, la marin lahaa hoosta, waxba ma aynnu qaban karneen; waayo, dabacsanaanta haraggan ayaan u adkaysan karayn kulaylka iyo qabashada walxaha qaar. Docda kale, qaybta hoose ee gacanta haddii la marin lahaa dusha sare, waxba ma aynnu qaban karneen, sababta oo ah, waa harag adag!

Waa baraarujin fudud oo ku saabsan shay aynnu si maalinle ah u aragno boqollaal jeer, isla markaana aynaan u fiirsan! Xumaan oo dhan waxa ka hufan Allaha abuuritaanka iyo aqoonta badan!

## Muraayadda

Eebbe SWT, waxa uu ku yidhi Qur'aanka kariimka ah:

﴿أَلَا لَهُ ٱلۡخَلۡقُ وَٱلۡأَمۡرُۗ﴾ الأعراف: ٥٤

Keligii Arrimiyow
Waxay talo agtaallaa
Abuuraha makhluuqee Yamyam (AHUN)

Xikmadda Alle ee xeeshadheer ayaa si fiican uga muuqata labadan tiir ee waaweyn: *Abuurta iyo Amarka.*
Fiiri noolayaasha Alle, dabadeeto dhuux amarradiisa iyo sharciyeyntiisa. Waxa aad la yaabi doontaa *xikmaddiisa, weynidiisa iyo sarrayntiisa.*

Marka aan doonayo in aan ka sheekeeyo unugga iyo layaabyadiisa jidhka noolayaasha, iyo atomka iyo cajiibyadiisa, waxa suurtagal ah in aan ku laabto buugta ka hadla siraha noolayaasha. Laakiin, ii ogolow aan ku tuso waxyaabaha qaar aad aragto maalin kasta adiga oo hortaagan muraayadda iyo arrimaha kugu soo maraya noloshaada. Si aad u ogaato qodobbadanna, uma baahnid tijaabo iyo weyneeye toona!

Iiga warran dhegtaada? Maxaa ay ugu muuqataa qaabkan? Maxaa uu Alle uga dhigi waayey laba god? Haddaba, si aad u garato xikmadda Alle ee ka danbaysa qaab-samayska dhegtaada, waxa habboon in ay mar uun ku xanuunto; waayo, waxaad ogaan lahayd sababta uu Alle ugu abuuray qaabkan, in ay tahay si uu kaaga ilaaliyo biyaha kaa gelaya gudaha iyo gunta dhegta xilliyada maydhashada, kuwaas oo kugu keeni kara xanuun daran! Allaha ku abuuray waa falsame, xubin kasta oo ka mid ah jidhkaaguna dheef ayay kuu leedahay. Xitaa haddii aadan hadda ogayn, sayniska ayaa ku bari doona xikmaddeeda iyo faa'iidadeeda.

﴿ سَنُرِيهِمْ ءَايَٰتِنَا فِى ٱلْءَافَاقِ وَفِىٓ أَنفُسِهِمْ حَتَّىٰ يَتَبَيَّنَ لَهُمْ أَنَّهُ ٱلْحَقُّ ۗ أَوَلَمْ
يَكْفِ بِرَبِّكَ أَنَّهُۥ عَلَىٰ كُلِّ شَىْءٍ شَهِيدٌ ﴾ فصلت: ٥٣

*"Aayadahayaga ayaannu ka dhex tusi doonnaa dhinacyada iyo nafohooda inta ay u caddaanayso xaqnimada Qur'aanku. Miyaanay ku filnayn in uu Rabbigaa wax kasta markhaati ka yahay."*

Sanku waa dalool muuqda oo ka samaysan laba qaybood: *qayb sare oo adag iyo qayb hoose oo jilicsan!* Sawiro sankaaga oo ilaa xad dabacsan. Saw xaaladaha qaar iskuma kaa dhegeen?! Haddii ay qaybta hoose adkaan lahayd, qaabkee ayaa aad u qaadan lahayd, ama u saari lahayd hawada?!

U fiirso timaha sunniyaha iyo qaabka ay biyo iyo boodh badan kaaga celiyaan! Aad ugu fiirso xirribaha iyo timohooda lagu daday indhaha! Xikmadda Alle ayaa keensatay in habdhiskan xasaasiga ah lagu xifdiyo saddex ilaaliye oo dhawraya nadaafaddiisa iyo badkaqabkiisa!

Arrinka qudha ee ay waajibka kugu tahay in aad ogaato si aad u barato xikmaddiisu waa siraha ku duugaan jidhkaagan ka kooban cajaa'ibta!

وتزعم أنك جرم صغير        وفيك انطوى العالم الأكبر

Waxaad tahay ugaaskii
Hanashada adduunkiyo
Ifka loogu hiishee,        Hadraawi (AHUN)

## Amarka

Sida ay xikmadda Rabbi uga muuqato abuurtiisa, si la mid ah ayaa ay uga muuqataa amarkiisa. Alle SWT, waxa uu ina farayaa waxyaabo ina la tamar iyo taag ah oo ay ku jiraan danaheenna iyo liibaanteennu.

Marka aad u fiirsato salaadahan uu Eebbe SWT inna faray, waxa kugu adkaanaysa ogaanshaha xikmadaha iyo siraha ka danbeeya! Haddii ay ka bataan shan salaadood, gudashadooda ayaa ku adkaanaysa addoonka, marka ay ka yaraadaanna, macnaha addoonnimada oo ah ujeeddada loo abuuray insaanka ayaa ka baxaysa qalbigiisa! Haddii aad dhuuxdo qaabka

salaadda, heerka rooxaaniyaadka dhadhaqaaqeeda iyo iimaaniyaadka wardiyadeeda; waxa aad arkaysaa xikmad ku suntan *qurux, sharaf iyo weyni!*

Dhuux macnaha soonka iyo sirihiisa! Soonku waa gaajo iyo harraad ku xusuusinaya saboolka iyo baahidiisa. Soonku waa bog madhnaan kaa leexinaysa adduunkan iyo dhaldhalaalkiisa. Soonku waa hoggaansan xeeldheer oo nafta ku baraarujiya macnaha addoonnimada dhabta ah!

U fiirso camallada xajka si aad u aragto tallaabooyin ku soconaya qorshe waafaqsan rabitaanka Alle, dadkana xusuusinaya in ay addoomo u yihiin Eebbe Weyn oo falsame iyo xog-ogaal ah!

Xikmadda Rabbi ee abuurtiisu waa mid ku joongo'an amarkiisa iyo sharciyeyntiisa. Mana jiro shay koryaal arladan oo ka madhan xikmadaha abuurihiisa, jirsiiyihiisa iyo sharciyeeyihiisa.

## Dhaxalka Iyo Dheddigga

Qof baa ka hor yimid masalo ka mid masalooyinka dhaxalka. Haddii ay dhaxal ku kulmaan wiilaal iyo hablo ama walaalo iskugu jira lab iyo dheddig, qaabkan ayaa loogu qaybinayaa dhaxalka:

﴿ لِلذَّكَرِ مِثْلُ حَظِّ ٱلْأُنثَيَيْنِۚ ﴾ النساء: ١١

*"Labkii waxa uu helayaa dhaxalka laba dheddig ah."*

Shakhsigani waxa uu ismoodsiiyay sharciyeyntan weyni in ay yastay xuquuqda haweenka! Culimada ayaa siiyay jawaab ku habboon! Labku xitaa haddii uu qaato labanlaab, waxa saaran xilka quudinta ehelkiisa oo dhan. Gabadhu kala badh ayaa ay qaadanaysaa, mana saarna wax xil ah, oo iyada ayaa iska leh hantideeda oo dhan. *Arrinkani waxa uu ka mid yahay xikmadaha Alle ee xeeshadheer!*

Xikmadaha Alle, waxa ka mid ah in uu adkeeyay fahanka qaar ka mid ah sharciyeyntiisa; si uu ugu imtixaamo addoonkiisa. Xaaladdan oo kale, waxa kala miirma muuminka iyo munaafiqa, daacadda iyo mushakiga iyo hoggaansamaha iyo didaha! Xikmadaha ku duugan sharciyeynta Alle ma wada muuqdaan, ujeedkuna waa in ay kala hufmaan addoomuhu!

Siraha ku duugan qarsoonaanta sharciyada qaar, waxa ka mid ah in lagu imtixaamo aqoonyahanka iyo culimada; si ay u dedaalaan, u

baadhaan, una kala hufaan qaybo ka mid ah siraha Eebbe. Arrinkanina waxa uu culimada u noqdaa jihaad ay ku daahiriyaan cilmigooda, isla markaana ay dhidibbada ugu aasaan qalbiyada liita, aakhirkana waxa ay ku helaan darajooyin iyo sharaf sarreeya!

Alle, xikmado cajiib ah ayaa uu ka leeyahay amarkiisa iyo abuurtiisa!

## Xikmadda Abuuraha

Hadal liita ayaa ka soo yeedhay gabyaa mucaariday xukunka gacan-goynta tuugga. Ninkan kharribani waxa uu ku gabyay:

يد بألف مئين عسجد وديت     ما بالها قطعت في ربع دينار
تناقض ما لنا إلا السكوت له     وأن نعوذ بمولانا من النار

Gacantii qofkii jara
Konton geela laga dhiibo
Dhawr gini hadday qaaddo
Hala gooyo gabigeed
Waa dood i geliweyday
Anna waan ka gaabsaday
Godadkii cadaabaha
Guullow ha nagu gurin!     (Maxamed Shaaxuur)

Ninkan, shayddaankii rartay ayaa u soo dhiibay shakigelintan!

Aqoonyahankii uga jawaabay weyddiintu, waxa uu yidhi: *"amminkii ay aaminka ahayd, qaali ayaa ay ahayd, balse markii ay khiyaamo samaysay ayaa ay qiimobeeshay!* Waxaa isna ka jawaabay Cabdiwahaab al-Maaliki AHUN[1]:

لا تقدحن بنود الشرع عن شبة     شعائر الدين لا تقدح بأشعار
عزالأمانة أغلاها وأرخصها     ذل الخيانة فافهم حكمة الباري

Heedhe qodobbadii diinta
Haku durin ismoodsiis
Daliillada Shareecada

---

[1] **Cabdiwahaab al-Maaliki:** waa xubin ka tirsanaa haldoorkii iyo hormuudkii culimada Maalikiyada. Magaalada Baqdaad ayaa uu ku dhashay, ku barbaaray, waxna ku bartay. Aabbihii wuxuu ka mid ahaa culimadii iyo foolaadkii Baqdaad. Walaalkiinna waxa uu ahaa suugaan dhaadhi gaasabaxay.

Gabay laguma dumiyee
Ruux dafiray ammaanadi
Naftiisii dulleeyee
Daa'im xigmaddiisiyo
Dulucdiyo ujeeddada
Dammiinyohow ha baalmarin. (Maxamed Shaaxuur)

## Eebbe ma ciyaaro

Weedhaha caanbaxay ee laga hayo caalimkii xisaabta ee mulxidka ahaa Albert Einstein markii uu sannado badan u fiirsanayay kownka, lana dhacay sugnaanta abuurtiisa iyo amakaagga samayskiisa, waxa ka mid ah in uu si khushuuc leh uga yidhi Eebbe: *Alle ma ciyaaro laadhuuda!*

Albert waxa uu ka mid yahay mulxidiinta ugu caansan. Hase ahaatee, xeerarka kownkan iyo qawaaniintiisa aadka u xeeshadheer oo uu aqoon badan u lahaa ayaa ka keenay weedhan cajiibkaa. Docda kale, Qur'aanka kariimka ah waxa ku soo arooray macne u dhow hadalkiisa.

﴿ وَمَا خَلَقْنَا ٱلسَّمَآءَ وَٱلْأَرْضَ وَمَا بَيْنَهُمَا لَٰعِبِينَ ﴾ الأنبياء: ١٦

Idan bay ku joogtaa
Duluc iyo ujeeddiyo
Ahab bay ku tahay duni. (Hadraawi AHUN- Afku-Siran)

Arrinku ma aha dheel-dheel iyo ciyaar-ciyaar. Eebbena uma abuurin macne la'aan: *dadka, meerayaasha xiddigaha kala duduwan, unugyada dhiigga, elaktoroonnada, badaha, dhirta, fulkaanayaasha, ilayska, codka iyo dareennada!* Balse, wuxuu u abuuray xikmad xeeldheer iyo ujeeddooyin waaweyn!

## Ii warran

Meelaha uu ka muuqdo magaca Alle ee *al-Xakiim* waxa ka mid ah kala fogaanta baryada addoonka iyo aqbalaadda Rabbi. Weynuhu SWT waa uu awoodaa in uu daqiiqad ku aqbalo baryada addoonkiisa. Hase ahaatee falsamidiisa ayaa keenaysa in aanu arrinkaasi dhicin marar badan!

Ma doonaysaa in aan kuu faahfaahiyo? U fiirso addoonkan baahan ee salaad walba gacmaha taagaya; si loogu ballaadhiyo arsaaqda. Wali la gama aqbalin baryada! Aynnu isku dayno xikmadaha ka danbeeya!

Iiga warran addoonkan hadh iyo habeenba baryaya Rabbi! Haddii aad og tahay in uu Alle la jeclaaday baryada -illeyn dhab ahaantii cibaado ayaa loo abuuray addoonka- ka dibna, aad ogaatay baryadu in ay ka mid tahay cibaadooyinka ugu mudan ee ay waajib tahay in aanay sina uga maqnaan nolosha Muslinka. Waxa kale oo aad ogaatay in la helo xaalad keenaysa baryadan iyo isdhiibiddani in ay tahay arrin uu Alle jecel yahay; waayo, addoonku wuu isdhiibay oo waxa uu mudan yahay hibooyinka Rabbigii!

Qof baa yidhi: *"ha murugoon haddii ay waayuhu ku jeexjeexaan, iyo haddii uu dhulku cidhiidhi kugu noqdo; sababta oo ah, waxa laga yaabaa in uu Eebbe jeclaaday baryadaada!"* Baahidu waxba ma aha marka la barbardhigo roobka naxariista iyo barakooyinka iskugu jira ee jiho kasta kaga hooraya addoonka, iyo waliba abaalka weyn ee sugaya aakhiro! *Waa qodob.*

Iiga warran midka baahan ee Alle weyddiistay hodantinnimo, deedna uu siiyay. Alle, waxa uu og yahay in ay karkaarka weydaarinayso oo uu qooqi doono. Waxa kale oo uu sii ogaa in ay noloshiisu gabaabsi tahay.

*Maxay u tari doontaa lacag aad u badan oo qooqisa, mashquulisa, guuldarrana u horseedda! Maalmo yar ka dib ayaa uu dhimanayaa isaga oo ka durkay xayndaabka addoonnimada, if iyo aakhirana khasaaray! Waa qodob labaad.*

Iiga warran addoon baahan oo Alle weyddiistay hodantinnimo! Alle waxa uu og yahay in aanay maanta dani ugu jirin hanti oo uu ku fiican yahay saboolnimo! Sidaas awgeedna, ay fiican tahay in loogu dib dhigo xilli ay xaaladdiisu deggan tahay, hantiduna ay u horseedayso badhaadhe iyo barwaaqo! *Waa qodob saddexaad!*

Waxa la heli karaa qodobbo kale oo badan. Mar kasta oo aad u fiirsato xikmaddiisana, waxaad arkaysaa naxariistiisa, awooddiisa iyo weynidiisa.

Xikmadaha Rabbi SWT haddii ay ka muuqdaan saboolka, bukaanka, iyo dhibbanaha baahanna waa ay ka muuqdaan ee ha moogaanina.

Hadalka aan ku soo xidho weedh uu ku hadlay suugaanyahan aan ku fiicnayn diinta, balse markan runta ku addimay: *"Alle ayaa ku imtixaamaya addoomihiisa wixii uu doono oo ah fudayd iyo culaysa. Waxa uu muujiyaa sida uu*

*u jeclaaday ka uu jecel yahay iyo ka uu neceb yahayba. Xilli kastaana waxa uu leeyahay maslaxo, imtixaan iyo cibaado u gaar ah."*

## Jaangoyn

Xikmadaha Ilaahay SWT waxa ka mid ah in uu jaangooyay arrimaha noolayaashiisa, iyo in uu u dejiyay xuduudo aanay ka gudbi karin.

﴿ ٱلَّذِى لَهُۥ مُلْكُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ وَلَمْ يَتَّخِذْ وَلَدًا وَلَمْ يَكُن لَّهُۥ شَرِيكٌ فِى ٱلْمُلْكِ وَخَلَقَ كُلَّ شَىْءٍ فَقَدَّرَهُۥ تَقْدِيرًا ﴾ الفرقان: ٢

Allaha Allaha Allahayow
Kii aan Aabbe dhalinee
Hooya laga abuurinow
Ehel iyo xigaaliyo
Abtirsin lahaynow
Amarkiisu fulayee
Keli loo ogaayow (Cabdi-Qays)

Ka gayoonmayno haddii aynnu soo bandhigno sargoynahan cajiibka ah, hase ahaate aynnu ku gaabsanno dhegta! Sida aynnu ka warqabno, dhegtu waxa ay ka kooban tahay laba qaybood: *qayb hoose iyo qayb sare.* Qaybta hoose waxa ay kuu dammaanad qaaddaa in aadan maqal codadka aadka u hooseeya, halka ay qaybta sarena kaaga dammaanad qaaddo in aanad maqalin codadka aadka u sarreeya! Sawiro adiga oo maqla labadan cod. Haddii la yar kordhiyo labada qaybood ee maqalka, waxa kale oo la kordhaya codadka aad maqlayso. *I rumayso, ma aad hesheen nolol wacan!*

Waxa aad u baahan lahayd cudbi badan oo aad ku awddo dhegaha; si aanay u maqal sawaxanka ka baxaya hareerahaaga. Noloshaaduna waxa ay noqon lahayd sida shaqaalaha ka hawlgala warqshadaha waaweyn ee ay ku baxaan guuxa iyo gariirka mishiinnada waaweyni! Hurdo wacan ma aad laddeen, sababta oo ah waxa ku toosin lahaa codka onkod ka baxaya magaalo kaa fog boqollaal mayl. Xitaa sanqadha qudhaanjada iyo kaneecada ka yuusaysa qolka kugu xiga, ayaa ku toosin lahayd.

Noolayaashu isku maqal ma aha oo xayawaan badan baa maalmo ka hor sii dareema dhurgariirka. Qaar kale, ayaa maqla codka iyo cabaadka ka baxa xabaalaha. Sidaas awgeed ayay u didaan marka ay u dhowaadaan!

Haddaba, ha u malayn codkan aad maqlayso wax iska dabiiciya, oo aan lagu gudbi karin. Maya, ee naxariista Alle ayaa ka dhigtay qaabkan cajiibka ah. Maqalkaaga oo lagu koobo xuduud gaar ah, waa gallad weyn oo aad mooggan tahay. Iska dhaaf in aynnu ugu mahadnaqno Allaha u sameeyay habkan sugan, ee waxa aad mooddaa shay iska dabiiciya oo aan mudnayn u fiirsasho. *Allahayow, ku mahadsanid abuurtaada sugan!*

## Asaasaq

Eebbe, si joogto ah ayaa uu indhaha addoomaha ugu soo jeedinayaa tamardarradooda, wahsigooda iyo fekerkooda kooban, ujeedkuna waa si uu ugu baraarujiyo awooddiisa, kartidiisa iyo xikmaddiisa.

Waxa aan fadhiyay maqaaxi cunto, markii uu wiil caato ah oo gacanta ku sita xabbad sigaar ahi soo galay gudaha. Waa uu isla sheekaysanayay, muuqaalkiisuna soo-jiidasho ayuu lahaa. Gudaha ayaa uu soo gaadhay. Dabadeeto waa uu qayliyay isaga oo isku deyaya in uu qanciyo qof hortaagan oo aan noo muuqan. Runtii aad ayaa uu u qayliyay! Waxa aan ogaaday in uu waalan yahay. Markii uu ka baxay maqaaxidii isaga oo wali la hadlaya qofkii, ayaan ka warsaday xaaladdiisa shaqaalihii meheradda.

Si murugo leh ayaa ay iigu yidhaahdeen: laba bilood ka hor, waa uu caafimaad qabay oo wax dhib ah ma qabin. Si kedo ah ayaa uu u waashay wiilkani! *Waa sidaas xaaladda insaanku!*

Waxa aad arkaysaa isaga oo iswayddiinayaa xikmadaha Ilaahay ee ku saabsan arrinkan iyo siraha ku duugan sharciyeyntiisa? Ma hanan karo caqligiisa, haddana waxa uu raadiyaa xikmadaha abuuraha iyo falsamaha!

Gabadh ka mid ah qaraabadayda oo da'a, ayuu ku dhacay xanuunka asaasaqu. Runtii aad iyo aad ayay ii jeclaan jirtay. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa aan u galay si aan u bariidiyo. Hase ahaatee, iima ay muujin dareenkii farxadda watay. Qof ka mid ah dadkii la joogay ayay fiirisay oo weyddiisay: *waa kuma qofkani?* Awood la'aan ayaa aan dareemay, waanan ilmeeyay. *Maxaa ka tamardaran insaanka!*

Saaxiibkay oo aannaan is arag muddo toban sano ka badan, ayaa aannu kulannay. Runtii isbeddel aad u weyn ayaa ka muuqday jidhkiisa. Sababta ayaa aan weyddiiyey? Kiniinnada aan cuno ayaa kordhiyay miisaankayga ayaa uu igu yidhi. Si hoose ayaan ugu idhi: *maxay yihiin kiniinnadani?* Cod liita oo ay quusi ka muuqato ayaa uu ku yidhi: *waxa igu dhacay xanuunka gooni-socodka.*[1]

Caqliga dadku ilaa xad ayuu xasaasi yahay. In kasta oo uu ka caawiyo sawirashada caalamka, haddana dhib yar oo soo gaadha ayaa dhanka kale u rogta oo ka dhigta mid sawirta khuraafaad aan jirin. Markan, magacyada ayaa uu isku dhex khaldaa oo Cumar iyo Cali ayaa iskaga qasma, shaygii laga ooyijiirayna, waa uu ku qoslaa!

﴿ ثُمَّ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ بِرَبِّهِمۡ يَعۡدِلُونَ ﴾ الأنعام: ١

*"Intaa ka dibna, kuwa gaaloobay Rabbigood ayaa ay wax la wadaajinayaan."*

## Miskiin

Xanuunnada ku dhaca garaadka liita ee insaanka, waxa ka mid ah *Cabsida*. Dadka qaar ayaa dhibsada meelaha madow, qaar baa aan fuuli karin meelaha dhaadheer, qaar kalena waxa lagu dhibay hor-istaagga dadka oo haddii ay duruufuhu ku qasbaan; dhidid baa ka dareera, wajiga ayaa casaada, waxa aanay ku sigtaan in ay sarajoogga ka dhacaan.

*Waa maxay caqligan liita ee sawiranaya waxyaabo aan jirin iyo dareenno aan sabab lahayn? Miyaanu ahayn insaankii caqliga weynaa!*

Xanuunnadan waxa ka mid ah **Waswaaska** oo ka mid ah jirrooyinka ku dhaca garaadka insaanka. Ibnu Jawsi ayaa ka qoray buug weyn oo uu ugu magac daray: "*Talbiisu Ibliis*" oo uu kaga warramayo dhacdooyin aan

[1] Waa isku dhexyaac caqli oo daran, kaas oo saameeya habfekerka, dareenka iyo habdhaqanka qofka. Qofka uu ku dhaco xanuunkani, waxa uu maqlaa codad aan jirin, ama wuxuu aamminaa in ay dadku ku hawllan yihiin waxyeellayntiisa. Sababta keenta xanuunkani ma cadda. Hase ahaatee khubarada caafimaadku waxa ay aamminsan yihiin in ay keenaan sababo badan oo iskugu jira dhaxal iyo deegaan. Daraasaduhu waxa ay tilmaamayaan in uu xanuunkani ku dhaco labada jinsi, balse uu ku badan yahay ragga. (turjumaha).

qalinka lagu soo koobi karayn. Waxa jira dadka qaar saacado qubaysta! Kuwo kalena saaladda ayaa ay ku celceliyaan!

Saaxiibkaygii aannu wada deganayn qolkii jaamacadda ayaan u kiciyay salaad subax. Suuliga ayaa uu galay, aniguna salaadda ayaa aan u baxay eedaankii. Sunnihii ayaa aan tukaday, Qur'aan baa aan akhristay, muddo dheer ka dibna salaaddii baa la galay. Salaad deggan baa aannu tukannay, haddana masjidka ayaa aan iska fadhiyay ilaa qorrax-soo-bixii. Markii aan ku soo laabtay qolkaygii, waxaan ogaaday in uu saaxiibkay waysaysanayo. Albaabka ayaa aan ku garaacay. Waayo, waxa aan mooday in uu dhintay. Isaga oo argagaxsan ayaa uu ka soo baxay suuliga, waxa aanu i weyddiiyey: *miyaad ka soo baxdeen salaaddii?* Ma dareemin waqtigaa dheer. *Maxaa ka miskiinsan insaanka!*

Gabadh aannu qaraabo nahay ayaa iiga warrantay waswaas kaga dhacay salaadda. Waxa aan u malaynayay in ay labalaba jeer ku celiso takbiirta iyo faataxida. Laakiin, si murugo leh ayaa ay iigu tidhi: salaadda oo dhan ayaa aan ku celceliyaa afar ilaa shan jeer!

**Shakigu** waxa uu ka mid yahay xanuunnada ku dhaca garaadka insaanka ee ka dhiga mid u dhaqma qaab cajiib ah. Tusaale: nin ayaa la soo hadlay xaaskiisa. Maadaama oo ay mashquulsanayd, ka ma ay qaban telefoonka. Deedna shayddaanka ayaa ku qanciyay nin kale ayaa ay xidhiidh la samaysatay! Laba qof baa isfiirinaya, ka dibna wax baa kugu yidhi adiga ayaa ay ku shirqoolayaan!

Haddii aynnu dul istaagno heerka ugu sarreeya muuqaallada ogaalka dadku waa **Yaqiinta**. Waa maxay yaqiintu? Waa muuqaalka bilawga ah ee aad ka haysato aqoonta runta ah. Arrinkani halkee ayaa uu ka taagan yahay yaqiinta dhabta ah? Iyo xitaa yaqiinta lafteeda? Xaqiiqadu -sida uu qof xusay- waa *lix qaablay*. Haddii aynnu ogaanno dhinac ka mid ah, ka ma dhigna in aynnu diidno shanta dhinac ee innaga maqan. Ma habboona in aynnu ku faraxno qayb ka mid ah xaqiiqada, halka ay qaybaha kale ee maqani ka muhiimsan yihiin tan aynnu og nahay.

Caqliyadeenna ay ku dhacayaan xanuunnadan iyo qaar kale oo badan, uma fiicna in ay iswayddiiyaan sharciyeynta iyo abuuridda noolayaasha.

Hase ahaatee, ugu yaraan waa in ay ogaadaan xaqiiqooyinka ku xeeran si ay ugu gudbaan masalada xikmadaha iyo ujeeddooyinka arrimaha!

Intaas soo dhan ka dib, saw ma qummana in aynnu ruuxdeenna u sujuudinno Allaha falsamaha iyo xog-ogaalka ah. Saw ma qummana in ay xikmaddiisu ka weyn tahay su'aaleheenna. Saw sax ma aha in aanu inoo qaddarin wax aan dani innoogu jirin. Saw ma aragtid in aanu inoo sharciyeyn shay aan ahayn kan ugu wanaagsan iyo in aanu inoo xukumin wax aan wanaag ahayn!

# الْعَلِيمُ

Waxa uu iga codsaday in aan qaab aan ku-talagal ahayn u furo bog uun. Ka dibna, aan wax ka akhriyo kuwii dhintay bari hore ee ay noloshu hilmaamtay astaamohoodii. Mar kale ayaa uu iga codsaday in aan istaago; si aan ugu fiirsado qaabka uu Eebbe warkooda u hayo!

# Al-CALIIM (OGAAL BADANAHA)

Boqollaal jeer ayaa uu cilmiga Alle SWT ku soo arooray kitaabkiisa! Hababka uu ugu soo aroorayna waa Magac iyo Fal laga soo dheegtay *al-Caliim, al-Khabiir, as-Samiic, al-Basiir iyo ash-Shahiid.* Waa qodob uu Eebbe ka doonayo addoonka in uu rumeeyo oo ka fekero, layaabyadiisana ku ladho *hadalkiisa, camalkiisa iyo aamminaaddiisa;* waayo, safarka uu ugu jiro jidkiisu, ma toosayo, mana tanaadayo haddii aanu jirin iimaan go'an oo rumaysan cilmiga ku hareeraysan shay kasta oo ka jira dunidan!

Mar aad iyo aad ayaa ay u deggan tahay ka sheekaynta cilmiga Alle. mar labaad aad ayaa ay u cabsi badan tahay. Mar saddexaadna, waa aad ku dhiirranaysaa arrinkan! Nolosha qalbiga addoonkuna sii jirimayso, haddii aanu hadhsanayn macnaha iyo hanuunka magacan weyn. Waxa aynnu aamminsannahay in uu Ilaahay og yahay shay kasta, haddana ma dhuuxno. Haddii aynnu u fiirsanno daqiiqad, waa aynnu dawikhi lahayn!

Cumar binu Khaddaab RC ayaa aynnu muunad ahaan u qaadanaynaa. Waxa aynnu u bandhigaynaa magaca Eebbe ee *al-Caliim*. U fiiso sidaa uu innoo yaabgeliyo cilmiga Ilaahay. Rabbigeen waxa uu sii ogaa Aadan oo dhoobo ah in uu abuurayo Cumar! Dhalashadiisa, magaciisa, sannadkii uu dhashay iyo ka uu dhimanayo, abtirsiintiisa, tirada unugyadiisa, riyooyinkiisa, goorta uu islaamayo, muddada uu noolaanayo, xaaladaha noloshiisa, tirada erayada uu maqli doono, xuruufta uu ku hadli doono, tallaabooyinka uu qaadi doono iyo ubadkiisa iyo tarantiisa oo dhan ayaa uu sii ogaa. Siduu Alle u og yahay xog kasta oo la xidhiidha Cumar, ayaa uu uga warqabaa wax kasta oo ka jira dunida; waayo waa aqoon badane iyo xog-ogaal aanay waxba ka qarsoomin!

## Waa uu maqlay

Caa'isha RC dacalka gurigeeda ayay fadhiday markii ay Khawla bintu Saclaba u timid Nebiga ﷺ iyada oo uga ashtakoonaysa ninkeeda. Caa'isha mararka qaar waxa soo gaadhayay hadalka Khawla, marar kalena ma ay maqlayn. Muddo yar ka dibna, waxa soo degtay aayaddan:

﴿ قَدۡ سَمِعَ ٱللَّهُ قَوۡلَ ٱلَّتِي تُجَٰدِلُكَ فِي زَوۡجِهَا وَتَشۡتَكِيٓ إِلَى ٱللَّهِ وَٱللَّهُ يَسۡمَعُ تَحَاوُرَكُمَآۚ إِنَّ ٱللَّهَ سَمِيعُۢ بَصِيرٌ ﴾ المجادلة: ١

*"Dhab ahaantii, Alle wuxuu maqlay hadalka tii (gabadhii) kaala doodaysay arrinka ninkeeda, una ashtakoonaysay Ilaahay. Alle waa uu maqalayaa wada hadalkiinna. Alle waa maqal iyo arag badane."*

Caa'isha RC waxa ay odhan jirtay: *mahad oo dhan waxa iska leh Allaha maqalkiisa u ballaadhiyay codadka.*

Waa layaab xaaladda Caa'isha! Sidee ayaa ay u maqli weyday cod u jira mitirro, halka uu Allaha ka sarreeya toddobada samo ka maqlay! Iimaan ahaan, waa masalo fudud, dhammaanteenna waa aynnu isla og nahay. Laakiin, marka ay arrimahani hortaada ka dhacayaan, waa in aad yaabto oo aad ku baraarugto in ay kugu hareeraysan tahay aqoonta Ilaahay!

## Waa uu og yahay

Marka ay kugu habsato dayrta oo xambaarsan dabaysheeda kulul iyo cimiladeeda qallafsan; dhab iyo dhalanteed mid ay noqotaba, soo booqo kaymaha waaweyn ee ay ku yaallaan malaayiinta geed ee iska daadinaya caleemaha cawlan, ka dibna akhri aayaddan:

﴿ وَمَا تَسۡقُطُ مِن وَرَقَةٍ إِلَّا يَعۡلَمُهَا ﴾ الأنعام: ٥٩

*"Warqaddii dhacda, Ilaahay uun baa og." Haa, waa uu og yahay.*

Ibnu Musayab waxa uu yidhi: "habeen habeennada ka mid ah, oo uu nin hoostaagnaa dhir aad u badan, ayaa ay soo dhacday dabayli, ka dibna waxa uu iswayddiiyey: *Ilaahay ma og yahay caleemahan daadanaya?"* Dhirta dhexdeedii ayaa cod dheer loogu dhawaaqay aayaddan:

﴿ أَلَا يَعۡلَمُ مَنۡ خَلَقَ وَهُوَ ٱللَّطِيفُ ٱلۡخَبِيرُ ﴾ الملك: ١٤

*"Miyaanu (sir iyo caadba) ogeyn, ka wax abuuray, isaga oo ah ka waxyaabaha cilmigoodu qarsoon yahay si dhibirsan u maareeya ee xog-ogaalka ah[1]."*

[1] Tafsiirka Dabari: 18/214

Caleemahan badani Rabbigaa ayaa ay u tirsan yihiin! Hase ahaatee u fiirso. Ma waxa uu yidhi: *waxa uu og yahay tiradooda? Mise: waa uu og yahay?* Eebbe SWT, tirada caleemaha oo qudha ma oga, balse waxa kale oo uu ka warqabaa xog kasta oo la xidhiidha *muggeeda, xididdadeeda, qaabka ay u qaybsan tahay, dhadhankeeda, qaybeheeda, maadooyinka ay ka samaysan tahay, xilligii ay soo dhacday iyo intii aanay jirin!*

*Waa uu og yahay!*

﴿ وَلَا حَبَّةٍ فِي ظُلُمَٰتِ ٱلۡأَرۡضِ ﴾ الأنعام: ٥٩

*"Ma jirto xabbad ku dhacday mugdiyada dhulka."*

*Haddii ay jirtana, waa uu og yahay.*

Rabbi isaga oo xusaya wax kasta oo aynnu sawiran karno, amaba ka weyn humaagga maskaxdeenna waxa uu leeyahay:

﴿ وَلَا رَطۡبٍ وَلَا يَابِسٍ ﴾ الأنعام: ٥٩

*"Mid qoyan iyo mid qallalanba."*

Duniduba saw ka ma koobna qoyaan iyo qallayl! *Haa. Wax kasta waa uu og yahay Alle SWT!*

## Salafkii[1]

Cilmiga Alle SWT, waxa uu ahaa wixii ugu weynaa ee hoggaaminayay humaagyadii salafkii wanaagsanaa. Habsami-u-socodkii noloshooda

[1] Dad badan baa ka dida magaca Salaf, sababtana waxa aynnu u aanayn karnaa magacan sharafta leh oo ay isku koobeen qolyo dano gaar ah leh oo aad mooddo in ay hayaan furaha jannada iyo ka naarta, ama ay wakiil ka yihiin Ilaahay SWT. Waxa aad arkaysaa iyaga magacyo xunxun iyo axkaam halis ah dusha uga tuuraya cid kasta oo aan ku jirin kooxdooda. Haddaba ayaa salafi ah? Salafinimadu ma sifo dad gaar ah u xidhan baa? Goorma ayaa salafi la noqdaa? Khamiis, gadh iyo afar kitaab oo la bawsado, miyaa lagu noqdaa salafi? Mise waxa jira astaamo gaar ah oo ay lahaayeen salafkii hore?

**Salafinimadu:** waa raacidda manhajkii iyo jidkii Nebiga NNKH iyo asxaabtiisii qiimaha badnayd. Hase yeeshee, in laga dhigto manhaj gaar ah, lana gaalaysiiyo ciddii khilaafta xaqba haku taagnaato e' waa arrin khilaafsan salafinimada. Maxaa yeelay salafkii waxa ay dadka ugu baaqayeen in lagu midoobo Sunnada Rasuulka SCW, bidcoolena ku ma ay tilmaami jirin cidda ay ku kala duwan yihiin wixii aan

ayaa uu hagayay, oo waxa uu ku dhiirrigeliyay u shaqaysiga aakhiro iyo cabsida ka dhalata u-dhowaanshaha Ilaahay SWT.

Cumar binu Khaddaab ayaa yidhi: *"qofkii ay niyaddiisu daacad noqoto, Alle ayaa kaga filnaada wixii dadka kala dhexeeya. Qofkii dadka iskugu qurxiya wax aan qalbigiisa ku jirin oo aan Alle ogaynna, Eebbe ayaa u cadhooda.*[1]*"*

Waxa aad caabuddaa Rabbi og qalbiyada. Sidaas awgeed, waxa waajib kugu ah in aad iska jirto oo ay kugu weynaato iska ilaalintiisu; waayo, Allaha og waxyaabaha ay qarsato naftaadu, u ma qalmaan camallada aad ku badhaxday dheeftaada iyo aragtidaada gaaban ee adduunkan! Docda kale, in aad rumayso cilmigiisa ayaa kuu fududaynaysa baryadiisa; waayo, ducadu waa kuruska iyo baarka cibaadada!

**"الدعاء هو العبادة"**

*"Ducadu waa cibaado."*

Qaabkee ayaa ay suurtagal kuugu tahay in aad caabuddo mid aan ka warqabin *baryadaada, baahidaada iyo xaddiga keliyeynta ku jira qalbigaaga*? Fudayl binu Ciyaad ayaa ku yidhi nin: *"waxa aan ku barayaa eray ka khayr badan adduunkan iyo waxa dhexyaalla: Alle, ayaa aan ku dhaartay ee haddii uu Rabbi ogaado in aanay ilma aadan meel ku lahayn qalbigaaga iyo ikhlaaskaaga, wixii aad weyddiisato waa uu ku siinayaa*[2]*."*

*Tallaabada ugu horraysa ee ay waajib tahay in aad ku suubbiso ducadaada iyo daacadnimadaadu, waa in aad ka warqabto in uu Ilaahay og yahay!*

## fudud

﴿ أَلَمۡ تَعۡلَمۡ أَنَّ ٱللَّهَ يَعۡلَمُ ﴾ الحج: ٧٠

*"Miyaanad ogayn in uu Ilaahay og yahay.."*

---

ahayn masalooyinka caqiiqada. Cilmi-badane Ibnu Baas AHUN oo la weyddiiyey: maxaa aad ka leedahay qofka isku magacaaba Salafi ama Asari? Waxa uu ku jawaabay: *"haddii ay ka dhab tahay oo uu raacayo jidkoodii, waxba kuma jabna."* (Turjumaha)

[1] Xilyatu al-Awliyaa wa Dabaqaatu al-Asfiyaa: 1/50.

[2] Safwatu as-Safwa: 1/340.

*In yar istaag. Ha dhammastirin akhrinta aayaddan ee bal hadda ka yar feker waxa uu og yahay Eebbe?* Waxa kasta oo ku soo dhacay xusuustaadu waxba ka ma aha warka ay siddo aayaddani. Aynnu dhammasytirno aayadda:

﴿ أَلَمْ تَعْلَمْ أَنَّ ٱللَّهَ يَعْلَمُ مَا فِى ٱلسَّمَآءِ وَٱلْأَرْضِ ﴾ الحج: ٧٠

*"Miyaanad ogayn in Alle ka warqabo waxa ku dhex sugan cirka iyo dhulka."*

Wax kasta oo ku sugan cirarka iyo dhulka! Shayo, camallo, humaagyo, fekrado, tagto, taagan iyo timaaddo, waa uu og yahay Alle! Unug kasta oo ku jira jidhkaaga, waa uu ka warqabaa Alle. Atom walba oo ku sugan kownkanna waxa uu og yahay sooyaalkiisa iyo taariikh-nololeedkiisa!

Ka warran aqoontan weyn! Alle SWT waxa uu ku yidhi:

﴿ إِنَّ ذَٰلِكَ عَلَى ٱللَّهِ يَسِيرٌ ﴾ الحج: ٧٠

*"Arrinkaasi waa uu u fudud yahay Ilaahay."*

Waxba ma dhibaan Alle; waayo waa cilmi badane aanay aqoontiisu ku xidhnayn barasho, balse ay iskeed u jirto. Ma jirto xog arladan taallaa, haddii ay jirtana, waa uu ka warqabaa. Xitaa astaanta layaabka (!), waa uu og yahay amminka ay ku dhacayso ishaadu!

## Kitaabka Ibnu Kasiir

Waxa jira nin aannu saaxiib nahay oo aad iyo aad wax ugu fiirfiirsada. Ma tirin karo mararkii uu iiga sheekeeyay magaca Alle ee *al-Caliim*. Waxa jira shay cajiib ah oo uu saaxiibkay ka dhex arkay magacan weyn!

Waqti uu u fiirsanayay magacan, ayaa uu iiga sheekeeyay buugga *al-Bidaaya wa an-Nihaaya* ee uu qoray ibnu Kasiir AHUN. Saaxiibkay ayaa iga codsaday in aan si aan ku-talagal ahayn u furo bogga aan doono. Ka dibna, aan akhriyo sooyaalka dadkii dhintay waayo-waayo ee ay noloshu hilmaamtay astaamohoodii. Haddana waxa uu i faray in aan istaago; si aan ugu fiirsado sida uu Alle warkooda oo dhan u hayo!

Eebbe waxa uu u og yahay meytidan, sida uu innagaba innooga war hayo. Raggii ka tirsanaa ciidankii Muslinka ee furtay magaalooyinka, iyo kuwii godgalay maalmihii cunaqabataynta ee aanay taariikhyahannadu ka hayn wax xog ah, ayaa u diwaangashan Allaha aanay waxba ka lumin.

Saaxiibkay waxa uu furay bog ka mid ah bogagga khariidadaha. Waa uu soo dhoweeyay ilaa aannu aragnay baabuur waddo dhex taagan. Waxa uu i weyddiiyey: maxaa xog ah ee aynnu ka haynaa wadaha baabuurkan iyo shakhsiyaddiisa? Waxa aan ugu warceliyay: waxba. Waxa uu igu yidhi: *Alle SWT, ayaa og magaciisa iyo ka aabbihii, halka uu ku nool yahay, xaaladda uu ku sugan yahay, tirada ubadkiisa, magacyada xigtadiisa iyo goobta uu ka shaqeeyo.* Intaa ka dib, waxa uu gudogalay in uu ii mariyo faahfaahinno cajiiba oo la xidhiidha aqoonta uu Alle u leeyahay qofkan qarsoon!

## Xasillooni

Haa waxa jirta deganaan maanshaynaysa jiritaanka Muuminka, marka uu ogaado in uu leeyahay Rabbi wax walba og. Marka uu wax kasta og yahay abuurahaaga, gargaarahaaga, ilaaliyahaaga iyo ka kaa difaacaya wax kasta oo jira ayaa aad ka baqanaysaa? Maxaa aad ka murugoonaysaa? Maxaa aad mudnaanta siinaysaa? Murugo kasta oo ku haysa, waxa uu og yahay sababta keentay iyo qaabka looga baxayo. Walaac kasta oo ku xanuuniya, waxa uu og yahay muggiisa iyo awooddiisa. Xanuun kasta oo jiifka kuu diida, waxa uu og yahay sababta keentay iyo dawadiisa. Aad ayay u raaxo badan tahay in aad aamminto cilmiga iyo ogaalka Rabbigaa!

Uma baahnid in aad ducadaada ku faahfaahiso baahiyahaaga oo dhan. Waxa kugu filan: *Allahayow, iga kor qaada dhibka i haysta;* waayo, ma jirto cid uga xog-ogaalsan xaaladdaada iyo sida lagaaga dulqaadayo dhibka!

Maxaa ka qaalisan in aad garabsato Rabbiga ducadaada maqlaya saqda dhexe habeenkii, maalinkii arkaya tallaabadaada, si dhab ahna u og waxa kugu xeeran, waxa laguu qorshaynayo iyo arrinka lagula damacsan yahay!

Waxyaabaha kor u qaada kalsoonida aad ku qabto Rabbigaa, waxa ka mid ah marka aad aragto shay aan u wanaagsanayn noloshaadu in uu ku dhacay cilmigiisa dhammayskatiran iyo xikmaddiisa cajiibka ah!

Alle, saddex iyo toban meelood ayaa uu ku yidhi:

﴿ وَٱللَّهُ عَلِيمٌ حَكِيمٌ ﴾ النور: ١٨

*"Alle waa cilmi badane falsan."*

*Ujeeddadu waa in aad ka dhaadhiciso qalbigaaga, wax kasta oo dhacayaa in uu ku dhacayo ogaalkiisa iyo xikmaddiisa addoomuhu aanay gaadhi karin!*

Iiga warran dareenkaaga marka aad akhriyayso aayaddan:

﴿ وَمَا كَانَ ٱللَّهُ لِيُعۡجِزَهُۥ مِن شَيۡءٖ فِي ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَلَا فِي ٱلۡأَرۡضِۚ إِنَّهُۥ كَانَ عَلِيمٗا قَدِيرٗا ﴾ فاطر: ٤٤

*"Alle, ma aha mid uu wahsi gelinayo shay ku dhex sugan cirarka iyo dhulka; waayo waa cilmi badane wax kasta awooda."*

Alle SWT cilmiga uu wax kasta u leeyahay, ayaa u dhigma awooddiisa! Qalbigaaga ka fur khaanad, una bandhig wixii ugu adkaa ee aad sawiran kari weyday adiga oo akhriyaya: "*Alle, ma aha mid uu wahsi gelinayo shay.*" Wax kasta oo u muuqda khayaali, cilmiga Ilaahay SWT ayaa rumaynaya!

## Cabsi

Haddii aad og tahay in Alle SWT ka warqabo wax kasta, waxyaabaha uu og yahayna ay ka mid yihiin camalladaada xunxun, isbiimayntaada carruurinimada ah, humaagyadaada liita iyo arrimaha aanu ku farxayn in uu kugu arko. Alle, waxa uu kugu cabsigelinayaa in uu ku arkayo! Adiga oo xaaladdan cabsida leh ku jira ayaa ay imanaysaa aayaddan qalbigaaga ka saaraysa baqaha iyo argagaxa, taas oo kaaga warramaysa in ay siman yihiin cilmigiisa iyo dulqaadkiisu.

﴿ وَٱللَّهُ يَعۡلَمُ مَا فِي قُلُوبِكُمۡۚ وَكَانَ ٱللَّهُ عَلِيمًا حَلِيمٗا ﴾ الأحزاب: ٥١

*"Eebbe ayaa og waxa ku jira qalbiyadiinna, waana cilmi iyo dulqaad badane."*

In kasta oo ay fekradahaagu yihiin waxa ugu fudud ee uu og yahay, haddana waa dulqaad-badane aan ku degdegayn ciqaabtaada iyo in uu kaa aarguto. *Waa uu dulqaataa, naxariistaa, dambidhaafaa oo cafiyaa!*

Maxaa ka qurux badan oo ka weyn naxariista iyo dambidhaafka uu Alle ku soo afmeeray aayaddan ka warramaysa in uu og yahay shay kasta!

﴿ يَعۡلَمُ مَا يَلِجُ فِي ٱلۡأَرۡضِ وَمَا يَخۡرُجُ مِنۡهَا وَمَا يَنزِلُ مِنَ ٱلسَّمَآءِ وَمَا يَعۡرُجُ فِيهَاۚ وَهُوَ ٱلرَّحِيمُ ٱلۡغَفُورُ ﴾ سبأ: ٢

*"Alle, ayaa og waxa gelaya dhulka, iyo waxa ka soo baxaya, waxa ka soo degaya samada iyo waxa fuulaya, waana naxariis iyo dambidhaaf badane."*

Waa raaxo iyo deganaan aanay jirin wax u dhigmaa!

Mar kale, Alle waxa uu inooga digayaa cilmigiisa, haddana waxa uu innoogu laabqaboojinayaa dulqaadkiisa:

﴿وَٱعۡلَمُوٓاْ أَنَّ ٱللَّهَ يَعۡلَمُ مَا فِيٓ أَنفُسِكُمۡ فَٱحۡذَرُوهُۚ وَٱعۡلَمُوٓاْ أَنَّ ٱللَّهَ غَفُورٌ حَلِيمٞ﴾ البقرة: ٢٣٥

Dardaaran-werintaada guud
Adaa naxariis ku daray

Hadraawi (AHUN)

Badanaa dambi aynnu galnay oo aynnu sugayno ciqaabtiisa! Waaba naxariistii Alle oo ina maanshaynaysa, nolosheennana beddelaysa!

*Wax aad u yar oo ka mid ah camalladeenna iyo gefafkeenna ayaa uu Eebbe ku hufaa ciqaabtiisa. Hase ahaatee, xumaanta ugu badan, cafiskiisa, naxariistiisa iyo dambidhaafkiisa ayaa uu innagaga dhaafaa; waayo waa cafis, naxariis iyo cilmi badane! Miyaanu Eebbe SWT ku odhan Qur'aanka kariimka ah:*

﴿وَيَعۡفُواْ عَن كَثِيرٖ﴾ الشورى: ٣٠

"Oo *waliba wax aad u badan baa uu idinka dhaafayaa."*

Maxaa ka qurux badan dulqaadka ka dambeeya cilmiga; waayo, qofku waxa uu ka cadhoodaa in uu ogaado gudaha dadka. Laakiin, aqoonta Alle waxba ka ma dhimaan dulqaadkiisa, cafiskiisa iyo naxariistiisu!

## Badda Gunteeda

Mar haddii aynnu woxogaa ka soo iftiiminnay cilmiga Alle, markanna aynnu diiraddasaarno jahliga insaanka; si aynnu u ogaanno qaabka uu Rabbigeen u yahay cilmi badane, xog-ogaal, iyo maqal iyo arag badane!

﴿قُل لَّآ أَمۡلِكُ لِنَفۡسِي نَفۡعٗا وَلَا ضَرًّا إِلَّا مَا شَآءَ ٱللَّهُۚ وَلَوۡ كُنتُ أَعۡلَمُ ٱلۡغَيۡبَ لَٱسۡتَكۡثَرۡتُ مِنَ ٱلۡخَيۡرِ وَمَا مَسَّنِيَ ٱلسُّوٓءُۚ﴾ الأعراف: ١٨٨

Dad baan ahayoo Rabbow
Kolley denbi way ag yaal

Hawiyo damac baa i sida
Hiyiga falan baa i dira
Dareenka xun baa i shida
Ta ii daran baan jeclahay. (Hadraawi AHUN)

Insaankan tamartadarani ma oga waxa maqan. Sidaas awgeed ayaanu u badsan wanaagga, xumaantuna ay u taabataa hadh iyo habeenba!

Qof ku turunturrooday dhagax, haddii uu sii ogaan lahaa, miyaanu ka leexdeen?! Kan ku dhacay godku, haddii uu ogaan lahaa gudka ku yaalla jidka, miyaanu ka digtoonaadeen? Insaanku waxba ka ma sii oga qaybka. Sidaas darteed ayaa uu u dhibban yahay xilli kasta! Qofka gelaya shilku, haddii uu sii ogaan lahaa, waa uu ka dheeraan lahaa. Se waa warmooge!

﴿ وَٱللَّهُ يَعۡلَمُ وَأَنتُمۡ لَا تَعۡلَمُونَ ﴾ آل عمران: ٦٦

*"Alle uun baa og oo waxba ma ogidin."*

Fircoonkii badda lagu daboolay haddii uu sii hayn lahaa wax uun xog ah, miyaa uu badda ku biimayn lahaa naftiisa iyo ta ciidankiisa?

Qaaruunkii dhulka lala jaray, haddii uu sii ogaan lahaa in berri subaxa lala jarayo gurigiisa, saw ma raadsadeen hoy kale oo uu u dhaxo? Waxa aan aamminsanahay haddii uu fanan lahaa buuraha Masar, in dhulka lala goyn lahaa; waayo, dhibku ma ahayn hoyga, ee ka deggan baa uu ahaa!

Alle, waxa uu ku yidhi Qur'aanka kariimka ah:

﴿ وَمَا تَدۡرِي نَفۡسٞ مَّاذَا تَكۡسِبُ غَدٗاۖ وَمَا تَدۡرِي نَفۡسُۢ بِأَيِّ أَرۡضٖ تَمُوتُۚ ﴾
لقمان: ٣٤

Ajasha iyo geerida
Uunka waad ka qarisoo
Ma ogsoonin gooraha
Lana oofsan doonee. ( Yamyam AHUN)

Saaxiibkay ayaa iiga warramay aabbihii oo u baxay safar tacsiya, in uu ku dhintay shil baabuur. Ma uu sii ogayn in ay tiisii gaadhay!

Guud ahaan dadkii la dilay tan iyo maalinkii la uumay dhulkan, haddii ay sii ogaan lahaayeen in la dilayo maalin heblaayo, wax baa ay ka beddeli lahaayeen hawlmaalmeedkoodii! Hase yeeshee, waa warmoogayaal!

**نؤمل آمالا ونرجو نتاجها وآجالنا مما نرجيه أقرب**

Waxaad adigu miihaalatiyo, malaba waa beene
Waxaad moodday mowd baa sokada, kaaga soo maraye[1].

## Sirmaqabe!

Insaanku si kasta oo uu iskula hanweyn yahay, Qur'aanka kariimka ah ayaa sheegay in aanay waxba u qarsoonayn. Sababta oo ah, Rabbigiisa cilmiga, aragga iyo maqalka badan, ayaa ka warhaya xaaladihiisa oo dhan. Alle SWT, ayaa og jihooyinka kaa fog iyo dunida kaa dambaysa:

﴿ يَعۡلَمُ مَا بَيۡنَ أَيۡدِيهِمۡ وَمَا خَلۡفَهُمۡ ﴾ طه: ١١٠

*"Waxa uu og yahay waxa ka horreeya iyo waxa ka dambeeya."*

Wax kasta oo aad damacsan tahay, Alle ayaa og. Waxa uu ka warqabaa tagtadaada, taagantaada iyo timaaddadaada! Warka oo kooban, Alle waa ogaal badane! *Noloshu saw hore iyo gadaal ma aha?!* Waa tan macnaha koobiddu! *Alle, waxa uu ogaa wixii jiray, waxa jira iyo waxa aan jirin haddii uu jiro sida uu u jirayo!*

Gaalku waxa uu jeclaysan doonaa in lagu celiyo dunidii; si uu wax uga soo beddelo habnololeedkiisii, dibna aanu ugu noqon gaalnimadii iyo daacad-ka-bixii. Alle ayaa warkiisa soo koobay oo ku yidhi Qur'aanka:

﴿ وَلَوۡ رُدُّواْ لَعَادُواْ ﴾ الأنعام: ٢٨

*"Haddii la celiyo, halkii ayaa ay ka miisayaan."*

Rabbi SWT waxa uu og yahay haddiiba lagu celiyo adduunkii, in aanay waxba iska beddelayn oo ay halkii ka sii ambaqaadayaan hawlihii xumaa!

U kaalay humaagyada ka guuxaya maskaxdaada, hadallada aad hoos u leedahay iyo arrimaha aad u malaynayso in aanay cidi ogaan karayn. Dhammaantood bannaanka ayaa ay yaallaan!

---

[1] Qammaan Bulxan

﴿ وَٱللَّهُ يَعۡلَمُ مَا تُبۡدُونَ وَمَا تَكۡتُمُونَ ﴾ المائدة: ٩٩

In daalacan baad taqaan
Intii dedan baad og tahay (Hadraawi AHUN)

﴿ أَلَا يَعۡلَمُ مَنۡ خَلَقَ ﴾ الملك: ١٤

*"Miyaanu ogayn ka abuuray"*

Imaamu Qurdubi waxa uu yidhi: *"sirta miyaanu ogayn kii abuuray."*

Bal hadda ka warran khariidaddan aad laabta ku haysato ee ka kooban maalmahaagii iyo riyooyinkaagii? Dhab ahaantii, bannaanka ayay taallaa!

﴿ يَعۡلَمُ مَا تُكِنُّ صُدُورُهُمۡ وَمَا يُعۡلِنُونَ ﴾ القصص: ٦٩

*"Waxa uu og yahay waxay qarinayaa laabohoodu iyo waxa ay muujisanayaan."*

Ama afka ku ballaadhi, ama iska aamu! Waxa aad muujisaa waa in yar oo ka mid ah xogaha ku kaydsan naftaada. Marka cilmiga Alle la fiiriyo, waxba ka ma qarsoona, oo wax kastaa bannaanka ayaa ay yaallaan!

﴿ وَإِن تَجۡهَرۡ بِٱلۡقَوۡلِ فَإِنَّهُۥ يَعۡلَمُ ٱلسِّرَّ وَأَخۡفَى ﴾ طه: ٧

*"Haddii aad kor u qaaddo hadalka, waxa uu og yahay sirta iyo hadalka qarsoonida badan."*

Waa aynnu garanaynaa sirta, ee waa maxay hadalka ka sii qarsoonida badani? Mufasiriintu waxa ay yidhaahdeen: *waa waswaaska, oo ah shay aan wali gaadhin feker, iyo waxyaabaha qarsoon ee aanay suurtagalka ahayn muujintoodu! Alle ayaa og.*

﴿ وَلَقَدۡ خَلَقۡنَا ٱلۡإِنسَٰنَ وَنَعۡلَمُ مَا تُوَسۡوِسُ بِهِۦ نَفۡسُهُۥۖ وَنَحۡنُ أَقۡرَبُ إِلَيۡهِ مِنۡ حَبۡلِ ٱلۡوَرِيدِ ﴾

*"Dhab ahaantii, annaga ayaa abuurnay insaanka, oo waxa aannu og nahay waxa ay ku waswaasinayso naftiisu, annaga ayaana uga dhow xawlalmariidka."*

# الْفَتَّاحُ

Waa xadiisyahankii imaamu Dahabi AHUN, oo sheekh ka mid ah culimadu uu arkay fartiisii, ka dibna ku yidhi: fartaadu waxa ay u eg tahay fartii muxaddisiinta. Alle ayaa jeclaysiiyay xadiiska, waxa aanu noqday hormoodkii xadiiska ee xilligiisii!

## AL-FATAAX (BANNAYN BADANAHA)

Dunidani waa beer weyn oo la ciirciiraysa qufullo, guuldarrooyin iyo niyadjabiyayaal is xig-xiga! *Mustaqbalkana waxa la filayaa in ay sii adkaan doonaan waayaha kugu hareeraysani!* Hase yeeshee, Allaha fure iyo cilmi badanaha ah ayaa furaya arrimaha xidhma oo dhan. Isaga ayaa kuu sahlaya adaygyada nolosha. Isaga ayaa wax aan dhici karin kaaga dhigaya dhab; sababta oo ah, furayaasha guushu gacantiisa ayaa ay ku jiraan!

Si siman aynnu u akhrisanno qaybo ka mid ah macnayaasha magacan weyn, si aynnu u aragno noloshan wada dhibaatooyinka ahi qaabka ay ahaan lahayd haddii aanu jiri lahayn Allaha Fataaxa ahi?!

### Bishaaro

Alle SWT waxa uu ku yidhi Qur'aanka kariimka ah:

﴿ مَّا يَفْتَحِ ٱللَّهُ لِلنَّاسِ مِن رَّحْمَةٍ فَلَا مُمْسِكَ ﴾ فاطر: ٢

Dulleynna adaa ku filan
Daryeelna adaa ku faxan
Sidaad damacdaaba fudud (Hadraawi AHUN)

Haa, waxa loo furayaa naxariisahan oo dhan; si ay inoogu burqadaan, nolosheenana u buuxiyaan! Haddii aad doonayso naxariis waarta oo aan kala go'ayn, weyddiiso Rabbigaa, adiga oo xusuusan: *cid celin kartaa ma jirto*. Waxa qudha ee lagaa doonayo ayaa ah in aad ku dabarto mahadnaqa oo shardi u ah joogitaankeeda!

﴿ وَإِذْ تَأَذَّنَ رَبُّكُمْ لَئِن شَكَرْتُمْ لَأَزِيدَنَّكُمْ ﴾ إبراهيم: ٧

*"Xus markii uu Rabbigiin idin ogaysiiyay haddii aad mahadnaqdaan, waa aan idiin kordhinayaa."*

Mahadnaqu keli ah ma dabro naxariista, balse waa uu kordhiyaa.

*Wali ma maqashay Qaanuunka Bishaarada?*

Sunnayaasha uu Alle raallida ka noqday, isla markaana uu doonay in ay ka soo horreeyaan bishaarada naxariistiisa, waxa ka mid ah rejadaada

oo soo laabata iyo qalbigaaga oo ku dega neecawda ka horraysa. Dhab u aammin in ay rumowday riyadaadii, dhibka ku hayaana uu tegayo!

﴿ وَهُوَ ٱلَّذِىٓ أَرۡسَلَ ٱلرِّيَٰحَ بُشۡرَۢا بَيۡنَ يَدَيۡ رَحۡمَتِهِۦۚ ﴾ الفرقان: ٤٨

*"Alle waa ka diray dabayl bishaaro ah oo ka horraysa naxariistiisa."*

Aayaddan ayaa si cad farta ugu fiiqday qanuunkan!

Alle SWT ma soo dirayo naxariis qudha, hase ahaatee waxa uu ka soo horraysiinayaa bishaarooyin kuu diyaarinaya qaabka aad u guddoomayso naxariistan iyo barakadan! Intaa ka dibna, naxariista Alle ayaa dhan kasta kaaga imanaysa oo waxa aad la yaabi doontaa habka ay u hirgelayaan arrimaha qaar aad shalay ku qancisay naftaada in aanay dhici karin!

## Furidda Cilmiga

Furashooyinka Alle siiyo addoomaha, ayaa uu ka mid yahay cilmigu.

Alle SWT, *cilmi cusub ayaa uu u furaa addoonka, cilmigii uu baranayay ayaa uu u sii kordhiyaa, ama mid cusub oo aan hore u jirin ayaa uu u furaa!*

In Eebbe cilmi cusub u furayo addoonkiisa, waxa tusaale u ah sheekh Ibnu Teymiya AHUN. Sheekha waxa ku adkaan jiray qayb ka mid ah macnaha Qur'aanka kariimka ah. Xilliyada qaar boqol tafsiir baa uu ka akhriyi jiray masalo, mana uu heli jirin. Inta uu bannaanka u baxo oo uu foolkiisa ciidda marmariyo ayuu ku ducaysan jiray: *macallinkii Daa'uudow, i bar. Kii fahansiiyay Saleebaanow i fahansii*[1]. Sheekhu waxa uu heli jiray furashooyinka Alle-yaqaanka, hadalka ugu toosanna waa uu haleeli jiray! Raadka siismooyinka Rabbi, waxa aad ka arkaysaa dhaxalka weyn iyo dhigaalka qaaliga ah ee uu ka tegay. Sida muuqatana, waa furid ku saabsan aqoon gaar ah oo aanu ka helin dhaxalkii iyo dhigaalkii culimada.

In Alle SWT, addoonka u siyaadiyo cilmigii uu baranayay, waxa lagu tusaaleeyaa: *qof baa muddo dheer baranayay laan ka mid ah cilmiga, hase ahaatii*

[1] Addoon yidhi Allahayow
Kaan qadinin Eebbow!
Yamyam (AHUN)

*waa ay ku adkaatay. Dabadeeto Eebbe ayaa u furay fahankeeda.* Tusaalayaasha waxa ka mid ah Rabiic Muraadi. Waxa la yidhi: suuraynta masalooyinka fiqiga ayaa lagu dhibay sheekha. Shaafici baana ugu celcelin jiray. Shaafici ayaa yidhi: *"Rabiicow, haddii aan awoodo in aan ku cunsiiyo cilmiga, waa aan ku cunsiin lahaa*[1]*."*

Sannado ka dib, Alle ayaa u furay fahankii cilmiga, waxa aanu ka mid noqday hormuudka iyo imaamyada Mad'habka Shaaficiga. Xitaa sida uu Shaafici AHUN laftiisu qiray Rabiic ayaa kaga horreeyay fiqiga!

Waxa la ii sheegay nin ka mid ah culimada nool oo aan barigii hore qaybi jirin xadiis qudha, in uu ictikaafay masjid, Allena ka baryay in uu u furo fahanka cilmiga. *Markii aan dhammaystay ictikaafkii iyo baryadii, shay kasta oo aan maqlo maskaxdayda ayaa uu ku qormi jiray",* ayaa uu yidhi ninkii!

In Eebbe, addoonka u furo cilmi cusub oo aan hore u jirin, aynnu ku tusaalayno imaamkii Muxammed binu Idiris ash-Shaafici AHUN oo ku mashquulsanaa gabayga. Alle, ayaa cilmiga ugu furay hadal ay ku tidhi hooyo waayeel ah. Alle, ayaa ku hanuuniyay culuunta shareecada oo ah wax la barto shayga ugu qaalisan. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa ay maqashay Shaafici oo suugaan tirinaya, deedna waxa ay ku tidhi: *gabaygu da'yar ayaa uu quruxiyaa, gadhmadoobana waa uu foolxumeeyaa!* Shaafici baa weyddiiyey: *maxaa i qurxinaya laba gooraba?* Hooyadii ayaa ugu warcelisay: *Fiqiga!* Dhankaa iyo cilmiga fiqiga ayaa uu u xeraystay, waanu ka libin keenay oo waxa uu noqday aqoonyahankii dunidan! Sidoo kale, waxa uu halabuuray *Usuulu Fiqiga* oo markii hore ahaan jiray masalooyin baahsan oo aan nidaamsanayn. Laakiin, waxa uu ka dhigay laan iskeed u-madax-bannaan. Alle ha u naxariisto Shaafici!

Xadiisyahanka weyn ee Dahabi ayaa uu Barasaali arkay fartiisa, ka dibna ku yidhi: *fartaadu waxa ay u eg tahay farta muxaddisiinta.* Alle, ayaa jeclaysiiyay cilmiga xadiiska oo waxa uu noqday hormuudkii xadiiska ee xilligiisii! *Arrinkani waxa uu ku yimid furidda Rabbi iyo waafajintiisa weyn!*

[1] Jaamicu Al-bayaan al-Cilmi wafadlihi: 1/483)

## Furidda Baryada

Indhodaalisyada furashooyinkan, waxa ka mid ah in Alle kuu furo xuskiisa, mahadnaqiisa iyo baryadiisa! Furiddani waa laba qaab:

**Kow:** in laguu furo albaabada khushuucda iyo isbihinbihinta xilliga xuska iyo baryada, aanad dareento dareen gaar ah oo ay og tahay cidda tijaabisay. Xaaladdan, baahidaada oo dhan ayaad codsanaysaa, dhib oo dhan ayaa kaa tegaya, waxa aanad jeclaanaysaa noloshaada oo dhami in ay noqoto saacadahan aad hortaagan tahay Allaha jabbaarka ah adiga oo u baryaya sidii in aad arkayso. Waa daqiiqado dhif iyo naadir ku ah nolosha, qofkii dareemana waxa loo rejaynayaa in la aqbalo baryadiisa!

Waxa aad mooddaa in aan arkayo ducadii Nebiga ee maalinkii Beder. Ducadii uu la ilmeeyay ilaa uu ka dhacay go'iisii, kuna sigtay in uu illaawo yabooha Alle: *guul ama geeri aakhiro*, ilaa uu Abu Bakar xusuusiyay!

Haddii aad dhadhamiso macaankan, aadna dareento xilli ka mid ah noloshaada, ka faa'iidayso; waayo ma jiro wax loo dhigaa! Waa cibaado badhax la' iyo dhowaansho Alle u gaar ah. Waa in aad si dhab ah u xidhaa albaabada adduunka, aadna dib dhigataa ballankaaga iyo arrin kasta oo muhiim ah! Sababta oo ah, waxa aad ku jirtaa xaalad gaar ah!

**Laba:** in Eebbe kuu furo *mahadnaq, ammaan iyo duco aanad hore u aqoon, oo aanay suurtagalna ahayn in aad samayso*. Waxa aan u malaynayaa qaabkani in uu u qalmo Nebiga SCW xaalad keli ah oo ah marka uu ku sujuudayo carshiga hoostiisa qiyaamaha. Nebigu, waxa uu ka warramay in loo furi doono mahadnaq aanu hore u aqoon! Waxa dhici karta in loo furo magacyo iyo sifooyin wanwanaagsan oo aanu hore u garanayn, kuwaas oo loo waxyoonayo xaaladdan cabsida leh. Eebbe, oo lagu ammaano magacyadan, sifooyinkan iyo falalkan, ayaa ah gallad iyo hibo weyn oo ka timid xaggiisa!

Docda kale, Eebbe waa deeqsi, oo waxa la hubaa in uu u furo addoonkiisa duco koobsanaysa weedho iyo erayo qurux badan, oo aan waligii ku soo dhicin maankiisa, deedna uu ku helo wabiyo iskugu jira furashooyin, hibooyin iyo siismooyin!

## Oohintii Nawawi AHUN

Furashooyinka ugu waaweyn ee uu Alle u furo addoonka, waxa ka mid ah in uu ka dhigo mid u heellan akhrinta, qaybidda iyo ku dhaqanka Qur'aanka! Ammin kasta oo ay bataan hawlaha iyo waayaha adduunku, waxa loo sii kordhiyaa waafajin. Sheekooyinka la xuso waxa ka mid ah hadal uu Yaasiin Maraakishi ka yidhi Nawawi oo wiil yar ah: "*waxa aan arkay Nawawi oo toban jir ah. Ubadka ayaa nici jiray in ay la ciyaaraan, isaga oo ooyayana waa uu ka baxsan jiray maadaama oo ay necbaayeen. Qur'aanka ayaanu akhriyi jiray. Dhab ahaantii waa aan jeclaaday Nawawi!*"

Ma doonayo in aan kaaga warramo halka uu ku dambeeyay wiilkii xidhiidhka la lahaa Qur'aanka kariimka ah iyo barakooyinkii uu Alle ku gaaryeelay; waayo keli ah waxa kugu filan in aad isku beegto kutubtiisa barakaysan iyo da'diisa yar, si aad u ogaato hibooyinkii uu Rabbi u furay!

Muhiim ma ah in aan kula wadaago tusaalayaal fog; waayo waxa aad awooddaa in aad gasho masjidka kuugu dhow salaadda casar iyo maqrib ka dib. Waxa aad ku dhex arki doontaa da'yar ku mashquulsan xifdinta Qur'aanka kariimka ah. Mar kale fiiri boqollaalka ay isku da'da yihiin, kuwa ka weyn iyo kuwa ka yaryar ee ku ciyaaraya jidadka iyo garoonnada xaafadaha. Dhab ahaantii, waxa aad arki doontaa in uu Eebbe u doorto kitaabkiisa cidda uu doono, wanaagyo iyo cilmiyo badanna uu u furo!

## Deeqaha Indhodaaliska ah

Hibooyinka Rabbi waxa ka mid ah in uu deeq kugu siiyo hab aan hore loo arag. Tusaale: waxa dhacda in uu muddo yar kugu siiyo deeq ay filkaa baadigoobayeen muddo dheer!

Waxa la wariyey: wadaadka *Samakhshari AHUN* ee qoray kitaabka *al-Kashaaf* ee tafsiirka ah in uu soo degay Maka isaga oo jira 60-70. Isaga oo ah cadceed casar-liiq joogta ayaa uu bilaabay qoridda kitaabkiisa. Qoraal ay qayrkii ku qori lahaayeen soddon sannadood, ayaa uu ku dhammeeyay saddex sano! Ka dibna, waxa uu yidhi: *"Alle ayaa i waafajiyay oo waxa aan kaga faraxashay waqti le'eg khilaafadii Abu Bakar Sadiiq. Dhammaystirkiisa*

*waxa lagu qiyaasay muddo ka badan soddon sannadood. Hase ahaate, barakada xaramka ayaa aan u aanaynayaa shaqadan weyn*[1]*."*

Qof aan ku kalsoonahay ayaa ii sheegay sheekh ka mid ah culimada casrigan oo garsoore ka ah Madiina in uu isaga oo yar Qur'aanka qaybay bil Ramadaan! Waa arrin adag. Balse marka loo fiiriyo furashooyinka Allaha wax kasta awooda, waxba ma aha! Alle ha barakeeyo ee wali ma arag qof ka qaybsan Qur'aanka, culuunta shareecada iyo shay kasta!

Hibooyinka amakaagga ah waxa ka mid ah in gallad lagu siiyo xaalad aanad deganayn. Tusaaluhu waa markii uu Ibnu Qayim qoray kitaabkiisa mar la aragga ah ee uu ka qoray Suubbanaha NNKH *"Saad al-Miicaad fii hadyi khayr al-Miicaad",* oo aanu jirin kitaab loo dhigaa! Waxa uu qoray isaga oo safar ah oo ka dheer kutubtiisii iyo ehelkiisii. Sheekhu waxa uu yidhi hadal macnihiisu yahay: "*waa weedho fudud oo aanu sina uga maarmayn barashadooda qofka uu hankiisa u fogi yahay barashada Nebigiisa, siiradiisa iyo hanuunkiisa. Waxa qortay maskax daallan oo safar ah, oo aan haysan sahay cilmiya iyo tixraac ku filantoona. Qalbigu waa uu mashquulsan yahay, hanku waa uu yar yahay, kitaabna ma haysto oo qofkii akhriyaa xog badan ka heli maayo."*

Sidaas oo ay tahay, iftiin iyo ilays ayaa ku maanshaynaya marka aad akhrido kitaabkan barakaysan, waxa aanad is odhanaysaa: *malaha Jibriil, ama malaa'ig kale ayaa goobjoog ahaa markii uu qorayay.* Masalooyin ayaa uu sheegi, cutub baa uu ku qurxin, fahankana waa uu soo dhowaynayaa!

Hibooyinka amakaagga leh waxa ka mid ah in uu Alle ku siiyo hibadii aad ka filaysay mid ka sii weyn!

Xaafid ibnu Xajar AHUN markii uu tegay Cumrada, waxa uu doonay in uu dhaqangeliyo xadiiskan: *"biyaha Samsamku waa wixii loo cabbo."* Biyaha Samsamka waxa uu u cabbay in uu xadiiska ku noqdo Dahabi oo kale. Waa uu noqday, haddii aanu kaga wanaagsanaynba!

*U fiirso sida ay doonista Ilaahay SWT uga sare martay rabitaankii imaamka!* Tusaalayaashan waxa ka mid ah sheekada Nebi Muuse. Waxa uu arkay dab meel ka baxaya. Dabadeeto waa uu aaday; si uu uga soo qaato qori dab ah. Waligii ku ma riyoon in uu Alle siin doono derajo la isa siiyo tan

[1] Tafsiirka Samakhshari, hordhaca: bogga 4aad.

ugu qaalisan oo ah nebinnimo, iyo in uu ka mid noqn doono xulka rususha CS! Waxa uu doontay qori dab ah. Hase ahaatee, waxa la siiyay nebinnimo! *Akhriste isku qiyaas nebinnimo iyo hanuun, iyo qori dab ah!*

﴿ مَّا يَفْتَحِ ٱللَّهُ لِلنَّاسِ مِن رَّحْمَةٍ فَلَا مُمْسِكَ ﴾

*"Wixii uu Alle u furo dadka ee naxariis ah, ma jirto cid celin karaa."*

## Hibooyinka Fataaxa

Waxyaabaha uu Alle siiyo awliyadiisa waxa ka mid ah haybadda, in uu dadka jeclaysiiyo oo ay wanaag ka sheegaan iyo qof kasta oo arkaa in uu jeclaado! Gabayada lagu cabbiray hibadan weyn waxa ugu caasan midkan aan ku celceliyo tobannaanka jeer aniga oo macaansanaya:

**فإذا أحب الله باطن عبده ظهرت عليه مواهب الفتاح**
**وإذا صفت لله نية مخلص مال العباد عليه بالأرواح**

Ammintuu Ilaahay
Addoonkiisa caashaqo
Irridaha wanaagiisa
Baa oodda laga feydi,
Laabtii Ilaahay
Ikhlaas looga yeelo
Arwaaxda uunkiisa
Ayaa soo miciin bidi.

Hibooyinkan ayaa ka muuqda jaad ka mid ah addoomaha qarsoon ee aanay bulshadu si fiican u garanayn, kuwaas oo u eg Uways al-Qaranigii ugu fadliga badnaa Taabiciinta, ee uu wanaagiisa sii sheegay Nebigu ﷺ. Qof ayaa yidhi: "*hadal ayaa aannu ka maqli jirnay Uweys iyo qayrkii. Hase ahaatee, marka aannu maqalno hadalka Aweys, iftiin ayaa aannu sawiran jirnay.*" *Arrinkani waxa uu ka mid yahay hibooyinka Alle!*

Hibooyinkan waxa ka mid ah wixii uu Ibnu Mascuud ka arkay foolkii Rabiic binu Khusayma ilaa uu ku yidhi: *"haddii uu Nebigu ﷺ ku arki lahaa, waa uu ku jeclaan lahaa!"*

Waxa kale oo ka mid ah wixii uu Cabdillaahi binu Salaam RC ka arkay foolka Rasuulka ﷺ, oo waa kii yidhi: *"waxa aan ogaaday in aanu wajigiisu ahayn waji beenaale."*

Qof baa iiga warramay in uu ku riyooday Rasuulka ﷺ. Hurdada ayaan ka kacay aniga oo si bilaa dareena u leh: *sidee ayaa ay u awoodeen beenintiisa?!*

Hibooyinkani kuma koobna foolka oo qudha, hase yeeshe waxa ay noqdaan hadalsan iyo arrimahaaga oo si cajiib ah laguugu sakhiro!

Waxa aan garanayaa nin qaraabadayda ah oo aad u daryeeli jiray agoonta iyo carmasha. Waa uu ka war hayn jiray oo hawlaha ayaa uu la dhammayn jiray. Goobaha caafimaadka ayaa uu kaga war hayn jiray, ubadkoodana dugsiyada waxbarashada ayaa uu geyn jiray. Alle ayaa aan ku dhaartay ee bari dambe oo ay agoontii hanaqaadday ayaa aan arkay. Ninkani ma booqdo xafiis, xarun, ama wasaarad. Haddii ay dhacdana, arrimo ku qaadan lahaa bilo ayaa loogu dhammeeyaa daqiiqado kooban.

*Waxa la odhan karaa waa hibo iyo hadiyad uu Alle ugu abaalguday!*

Ma jirto meel ka madhan hibada iyo siinta Eebbe. Hase ahaatee, waxa aan tusaalayaashan ka soo qaatay meelo aanan hore waxba uga odhan oo khuseeya magacan weyn: *aqoonta, iimaanka iyo ogaalka guud.*

Alle, waxa aan weyddiisanayaa in uu u furo qofka akhriya weedhahan hibooyinka Alle-yaqaanka, iyo in uu ka dhigo mid ay ku dul habtaan neecawda naxariisitiisa iyo dheeraadkiisu. Waxa aan weyddiisanayaa in ay addoomahan ka soo muuqdaan hibooyinkiisa qarsoon; *waayo Alle SWT, waa deeqsi maamuus, naxariis iyo cilmiba badan!*

# الْقَدِيرُ

Abuurtu dahaysanaa
Sir iyo duluc raaranaa
Daabkeedu aroorsanaa
Degaandeg ballaadhanaa
Dawgeedu aloosanaa
Rugaanrugo durugsanaa
Muggeedu daruuranaa.

Abu Hadra AHUN

# AL-QADIIR (AWOOD BADANAHA)

﴿ فَعَّالٌ لِّمَا يُرِيدُ ﴾ البروج: ١٦

*"Waa (Allaha) samayn-og wixii uu doonayo."*

Sidaas ayaa uu Alle ka yidhi naftiisa. Wax kasta oo uu doono, waa uu dhacaa; waayo, waa sameeye-og waxa uu doono. Ma jirto cid ka hor istaagi karta, ama wax ka weyddiin karta falalka uu samaynayo!

Maxaa ka weyn caqiidadan ka dhigta madaxa Muuminka mid taagan! Rabbigii ayaa wax kasta sameeya! Doonista Rabbi, ayaa lafdhabar u ah dhabnimada iyo dhicitaanka mucjisooyinka. Albaabka doonistan ayaa uu addoonku ku garaacaa *baryo, isbihinbihin iyo khushuuc.* Cibaadada baryada ayaanu uga gudbaa cibaadada sugitaanka farajka iyo naxariista Alle! Quusina ku ma soo dhacdo fekerkiisa; waayo, Rabbigii ayaa Qadiir ah!

## Biyo aan Shubmayn

Astaamaha awoodaha Alle meel kasta ayay ka muuqdaan. Awoodda Alle ayaa ka dhigtay insaankan mid hadla, arka oo maqla. Docda kalena, Alle waxa uu abuuray noolayaal aan arag, maqal iyo hadaltoona lahayn!

*Awoodda Alle ayaa sidan kaa dhigtay, noolayaasha kalena sidan u qaabaysay.*

Ina aadan waxa dhaqan u ah in aanu fiirin hareerihiisa, isla markaana aanu la dhicin waxyaabaha uu caadaystay. Haddii aanay sidan ahayn, maxaa ay u saamayn waayeen meerayaashan wareegaya iyo xiddigahan iftiimayaa!? Muxuu ugu fiirsan la'yahay dhulkan muggan weyn ee ballaadhan ee u badan biyaha aan daadanayn? Sababma ayay u dhaqaajin la'yihiin dareenkiisa qarsoon, quruxda dhirta cagaaran, khudradda bilicdasan iyo udugga ubaxyadu?!

Kownku waa buug furan oo ay ka muuqato awoodda weyn ee Alle.

**تأمل في نبات الأرض وانظر إلى آثار ما صنع المليك**
**عيون من لجين شاخصات بأحداق هي الذهب السبيك**
**على قضب الزبرجد شاهدات بأن الله ليس له شريك**

Dhulka iyo naqiisiyo
Nimcaduu Rabbigay dhigay

Farsamadiisa lala dhacay
Dhuumaha dureeree
Laga dhurayo dahabkiyo
Dhagaxaanta luulka ah
Giddigood dhammaantood
Eebbe inuu dhammays yahay
Ruuxna lagu dhererin karin
Yaad ka dheehanaysaa[1]!

Beydadkan weyn waxa tiriyay Abu Nawaas oo loogu yeedho gabyaagii anshaxa darraa. Waxa la weriyaa: dhimashadiisii waxyar ka hor ayaa uu tiriyay gabaygan, ka dibna sariirtiisa ayaa uu hoos geliyay. Geeridiisii ka dib, ayaa uu nin ku riyooday oo weyddiiyey: *maxaa uu Alle kugu sameeyay?* Abu Nawaas baa yidhi: *waa uu ii dambidhaafay!* Ninkii oo la yaabban sooyaalkii Abu Nawaas ee kharribnaa, ayaa weyddiiyey: *maxaa laguugu dambidhaafay?* Abu Nawaas: beydad aan tiriyay oo aan hoosdhigay sariirtaydii! Ninkii waa uu raadiyay gabaygii, waanu soo helay! Saxnimada warkan Alle ayaa og. Balse, Eebbe waa dambidhaaf iyo naxariis badane. Sidaas awgeed, ha layaabin, hana fogaysan dambidhaafkiisa iyo cafiskiisa!

## Dhulkii Indhodaraandarrada

Bogsiinta bukaanka, caafinta dhibbanaha iyo koryeelka kadeedka haysta qofka murugaysani waxa ay ka mid yihiin meelaha ugu hooseeya ee ay gaadho awoodda Alle SWT! Allaha boqorka ah, waxba la ma aha in uu uga faydo sidii oo aanay jirin. Eebbe, waxa uu ku xusay kitaabkiisa sharafta leh war arrimahan oo dhan ka weyn oo ka yaab badan!

Markii uu Sakariye CS fogaystay in la siiyay wiil; maadaama oo uu duqoobay, xaaskiisuna ay tahay madhalays -arrimahan oo isbiirsaday waa yaabe- Allaha awoodda badan ayaa ku yidhi:

﴿ قَالَ كَذَٰلِكَ قَالَ رَبُّكَ هُوَ عَلَيَّ هَيِّنٌ ﴾ مريم: ٩

[1] Maxamed Shaaxuur.

*"Alle waxa uu yidhi: arrinku waa sidaas. Rabbigaa waxa uu yidhi: waa uu ii fudud yahay."*

Markii ay ku weynaatay Maryan bintu Cimraan RC in loo hibeeyay wiil aan aabbe lahayn. Allaha awoodda badan ayaa ku yidhi:

﴿ قَالَ كَذَٰلِكِ قَالَ رَبُّكِ هُوَ عَلَيَّ هَيِّنٌ ﴾ مريم: ٢١

*"Alle waxa uu yidhi: arrinku waa sidaas. Rabbigaa waxa uu yidhi: waa uu ii fudud yahay."*

Akhriste isku eeg bogsiin bukaan iyo abuuridda qof aan aabbe lahayn! Sidaas awgeed, marka aad Alle weyddiisanayso baahiyahaaga, maanka ku hay in uu yahay awood badanaha wax kasta ku siin karaya!

## Qaylo

Ma waxa aad la yaabtay addoon indhaha sare u taagaya, lugahana dhulka ku garaacaya oo haddana fogaysanaya in uu Alle bogsiinayo, in uu balaayada ka kor qaadayo, ama uu u fulinayo muraadkiisa!

﴿ لَخَلْقُ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ أَكْبَرُ مِنْ خَلْقِ ٱلنَّاسِ ﴾ غافر: ٥٧

*"Abuurka cirarka iyo dhulka ayaa ka weyn abuurka dadka."*

U fiirso *abuurka dadka.* Ma aha bogsiinta, balaayo ka korqaadka iyo muraadsiinta dadka! Maadaama oo Alle abuuray shay weyn, maxaad uga labalabaysaa in aad weyddiisato shay ka yar oo ka liita abuurta?!

Xiddig kasta oo dabbaalanaya fakaaga sare, waa cashar inna tusaya awoodda Alle. Meere kasta oo soconaya kownkani, waa qaylodhaan ku socota damiirka qofka, oo u sheegaysa awoodda aan xadka lahayn ee abuurihiisa! Xaddi kasta oo uu le'eg yahay ogaansheheenna kownku, waa baraarujin joogto ah oo inna tusaysa macnaha awoodda Rabbi.

## Biyo Fatahaya

Eebbe ayaa wax kasta jaangooya, mana jiro waxa aanu awoodi karin! Hase ahaatee, waxa muhiim ah in ay qalbigaaga ka buuxaan kalsoonida iyo iimaanka aad ku qabto awooddiisa, iyo in aanad ku garaacin albaabka

awooddiisa gacan shakisan, ama tijaabo ku jirta! Albaabka Alle, ku garaac gacan la mid ah tii uu nebi Muuse CS ku dhuftay badda:

﴿ فَٱنفَلَقَ فَكَانَ كُلُّ فِرۡقٖ كَٱلطَّوۡدِ ٱلۡعَظِيمِ ﴾ الشعراء: ٦٣

*"Way kala dhambalantay, qayb kastaana waxa ay noqotay buur weyn oo kale."*

Waxa aan isswayddiiyey: *maxaa uu addoonku u aammini la'yahay awoodda Allahan ka abuuray meel madhan, nimcooyinkiisa oo dhanna siiyay?* Ma markii uu jirsiiyay isaga iyo noolayaashan badan, ayaa uu ka shakisan yahay in aanu ka aqbalayn baryadiisa oo uu waliba tijaabinayaa!

Allaha sharafta iyo maamuuska lihi, waxba ma siiyanayo kuwa aan ku kalsoonayn awooddiisa iyo xaqnimadiisa! Faraha ayaa uu ka qaadayaa addoomahan, ilaa ay iska helayaan gaajada. Haddaba, ilbidhiqsiga ay si dhab ah u ogaadaan in uu yahay Allaha xaqa ah ee muuqda iyo kan keligii ka saari kara dhibka haysta, ayaa uu u furayaa albaabada siintiisa oo aad mooddo biyo fatahaya! Balse, haddii ay wali qalbiyadoodu ku sii mashquulsan yihiin meelo kale iyo male, guul iyo gargaar ka dheer!

## Dayaxii kala dillaacay

﴿ ٱقۡتَرَبَتِ ٱلسَّاعَةُ وَٱنشَقَّ ٱلۡقَمَرُ ﴾ القمر: ١

*"Saacaddii ayaa dhowaatay, dayaxiina waa uu kala dhambalmay."*

Aayaddani waxa ay inna xusuusisay wax ka mid ah awoodaha Allaha shay kasta kara ee aanu wahsigelin shay ku sugan cirarka iyo dhulka!

Gaaladii Qureysheed ayaa maalin maalmaha ka mid ah ku soo ururtay Nebiga NNKH agtiisa iyaga oo u soo bandhigay codsi cusub iyo soo jeedin cajiib ah!

Miskiinsanaa caqliga insaanku! Qureysh ayaa u malaysay in ay halabuurtay codsi wahsigelin doona Muxammed iyo Rabbigii, soona afjari doona awoodihii iyo kartidii Alle ee ay ka maqli jireen Suubbanaha. Waxa ay yidhaahdeen: haddii uu maanta Rabbigaa kala dhambalo dayaxan, waa aannu ku rumaynaynaa!

Aad iyo aad ayaa ay u fakereen oo waxa ay la yimaaddeen shay aanay sawiran karin caqliyadu! Waxa ay codsadeen in Alle SWT iyaga oo arkaya uu laba u kala jabiyo dayaxa!

Eebbe ayaa u waxyooday ergaygiisa: *farta ku fiiq dayaxa, si ay u arkaan awoodda iyo weynida Rabbi*. Nebiga NNKH ayaa weyddiiyey: *haddii aan idiin kala dhambalo, ma i rumaynaysaan*? Af buuxa ayaa ay ku yidhaahdeen: *haa!*

Sababma ayaanay sidaas u odhanayn? Saw ka ma ay codsan arrin ka baxsan awoodda aadanaha?! Suubbanaha ﷺ ayaa farta ku fiiqay dayaxa. Waa runtii oo hortooda taagan! Waa kuwan daawanaya dayaxii oo u kala dillaacay laba isle'eg: *qayb dulsaaran buurta Abu Qubays iyo qayb dultaagan buurta Qucayqicaan!*

Miskiinyahow, haddii aad isku daydo in aad cariso awoodda boqorka, waxa aad noqonaysaa sida bus uu afuufay ilme yar oo Allihii rumaysan! Dayaxan weyni waxba ma aha marka loo eego awoodda Eebbe SWT!

## Kala firdhin

Gaal baa habeen seexday, deedna waxa uu la soo toosay weyddiin uu is yidhi Nebiga ﷺ ayaa kaga laaban doono diintiisa! Weyddiin uu is lahaa waxa ay wax weyn ka beddelaysaa qorshaha ay ku socoto diintu!

*Muxammedow, ka warran buuraha? Maxaa uu ku samayn doonaa Rabbigaa maadaama oo ay aad u waaweyn yihiin?* Gaalkani waxa uu is yidhi: Alle, ma laha tamar iyo taag uu ku maareeyo buuraha waaweyn!  Si ahaan, waa weyddiin ku weyn gaalka.  Hase ahaate, muuminku isaga oo qoslaya ayaa uu ka warceliyaa! Jawaab toos ah oo xididdada u siibtay jahligii iyo qabkii gaalka ayaa si toos ah uga timid xagga Alle SWT:

﴿ وَيَسْـَٔلُونَكَ عَنِ ٱلْجِبَالِ فَقُلْ يَنسِفُهَا رَبِّى نَسْفًا ﴿١٠٥﴾ فَيَذَرُهَا قَاعًا صَفْصَفًا ﴿١٠٦﴾ لَّا تَرَىٰ فِيهَا عِوَجًا وَلَآ أَمْتًا ﴿١٠٧﴾ ﴾ طه: ١٠٥ - ١٠٧

*"Waxay ku weyddiinayaan buuraha ee dheh: Rabbigay ayaa kala firdhinaya, oo  dhulkanna ka dhigaya ban safan oo aanad ku arkayn qallooc iyo taagtoona."*

Sidaas ayaa ay aayaddani ku gashay caqliyadoodii barbilawga ahaa. Iftiinkii ayaa ay ka damisay, haddana waa ay u daartay. Waa buurihii oo noqday bus la afuufay!

*Kala firdhin! Allahayow, maxaa kaa weyn!*

Eebbe, ma odhan: waa aan burburinayaa, ama waa aan duminayaa; waayo burburinta iyo dumintu si dhammaystiran u ma tirtirayaan hadhaaga iyo taagagga. Balse, firdhintu bus ayaa ay ka dhigaysaa!

Qur'aanka kariimku waxa uu badka iyo bannaanka keenaa heerka ugu fog caqliga diiddan xaqa, warcelintiisuna waa ay ka fog tahay ujeeddadan! Taas oo dhadhansiisa ruuxda dafiraadda badan qadhaadhka liidashada!

Tani waa awoodda Allaha xaqa ah ee ka dhigta riyooyinkeenna meel madhan marka loo eego waxa uu ku sameeyo erayga KUN[1] ee cajiibkaa!

## Mustaxiil

Layaabyada awoodda iyo kartida Eebbe waxa ka mid ah in aanay awooddiisu ku joogsan waxyaabaha aynnu u malaynayno in aanay sinaba u dhici karin. Maya! Awoodda Alle ee farsamayntu waxa ay u eg tahay halabuurkiisa abuurta! Arrimaha uu Alle samaynayo sida *kala dhambalidda baddu*, sina ugu ma soo dhacaan humaaggeenna! Ku ma soo dhacaan maanka iyo maskaxda malag Eebbe u dhow iyo nebi la soo diray kala dhambalanku in uu yahay shay ay mustaxiil tahay in uu ka dhaco badda dhexdeeda! Maxaa yeelay, waxa aan dhici karin in ay sawirtaan arrinkan oo kale! Dhicitaanka kala dhambalanka baddu, ma aha uun mustaxiil, balse in la sawirto ayaa mustaxiil kale ah! Sababta oo ah, waxa uu ka sarreeyaa awoodda sawirashada. Sidaas oo ay tahay, haddana Alle ayaa ka dhigay dhab iyo run biyo ka ma dhibcaan ah. Waayo, Ilaahay waa awood iyo karti badane aanay cidina isku dhererin karin! Waxa la mid ah wixii ku dhacay reer banii Israa'iil markii ay ka codsadeen Muuse CS in ay arkaan Alle.

[11] Ka ahow yidhaahdee
Ay ahaato Eebbow
Yamyam (AHUN)

﴿ وَإِذْ نَتَقْنَا ٱلْجَبَلَ فَوْقَهُمْ كَأَنَّهُۥ ظُلَّةٌ وَظَنُّوٓاْ أَنَّهُۥ وَاقِعٌۢ بِهِمْ ﴾ الأعراف: ١٧١

*"Xus markii aannu dul keennay buurtii oo aad mooddo hadh, oo ay u maleeyeen in ay ku soo dhacayso."*

In kor loo qaado buur, waa arrin aan marna ku soo dhicin khayaalka insaanka, iska dhaaf in uu sawirtee. *Hase ahaatee, awoodda iyo kartida Allaha aan dhimanayn ayaa ka dhigtay xaqiiq hortimid iyo digniin cabsi gelisay qalbigooda!*

## Marka ay diidaan

Layaabyada awoodda Alle ayaa ay ka mid tahay in ay dulqaadkiisa iyo kalgacalkiisu innaga hortaagan yihiin ciqaabtiisa! Haddii uu addoonku u sameeyo xumaan kibir iyo madax-adayg, waxa soo degta ciqaab aan la celin karin; waayo Eebbe waa Allaha wax kasta awooda.

Samakhshari AHUN ayaa ku wariyey tafsiirka aayaddan:

﴿ قُلْ أَرَءَيْتُمْ إِنْ أَصْبَحَ مَآؤُكُمْ غَوْرًا فَمَن يَأْتِيكُم بِمَآءٍ مَّعِينٍۭ ﴾ الملك: ٣٠

*"Dheh: haddii ay biyihiinnu idinka gudhaan, ayaa idiin keenaya biyo macaan!"*

Aayaddan baa lagu akhriyey qof, ka dibna waxa uu yidhi: *"faashashka iyo billaawayaasha ayaa keenaya."* Indhaha ayaa qallalay ninkii.

*Alle ayaa aynnu ka magangelaynaa in aynnu ku dhiirranno[1]."*

Waxa aan la yaabay sida uu ugu dhawaaqay hadalkan, iyo sida aanay qalbiyada qaar ugu jirin inyar oo cabsiyii! *Ha dhayalsan awoodda Alle!*

Ibnu Jawsi ayaa ku wariyey kitaabkiisa Sayd al-Khaadir: *"xumaan la isku ciqaabo waxa ugu dhakhso badan ta addoonka illawsiisa dareenka diidmada. Xumaantani waxa ay isku beddelaysaa canaad iyo la soo-banbax. Haddii ay keensanayso ka hor imaanshaha abuuraha iyo awooddiisa weyn, looma dhaafo addoonka, gaar ahaanna haddii ay ka dhacdo qof Alle garanaya.[2]"*

Mar kale waxa uu xusay sheekhu sheekada nin reer Khuraasaan ah oo kitaab Qur'aan ah ku qoray saddex maalmood oo qudha. Nin la kulmay

[1] Tafsiirka Samakhshari: 4/583.

[2] Sayd al-Khaadir, bogga: 314.

baa weyddiiyey: *imisa ayaa aad ku qortay kitaabkan? Murdisada, fardhaxada iyo faadumada*, ayaa uu tilmaamay. Saddex jeerna waxa uu ku celceliyay:

﴿ وَمَا مَسَّنَا مِن لُّغُوبٍ ﴾ ق: ٣٨

*"Wax daal ahina na ma taaban."*

Ninkii sheekada u joogay baa yidhi*: saddexdii farood ayaa qallalay oo dib uma uu intifaacsan.* Rabbi waa awood badanaha aanay habboonayn in laga cadhaysiiyo. Sababta oo ah, waxa uu awoodaa in uu kugu aamusiiyo kun.

Sheekooyinka uu xusay Ibnu Jawsi waxa ka mid ah: nin Alle iskugu daray aftahamo iyo hadalyaqaannimo ayay ku soo dhacday in uu odhan karo Qur'aanka oo kale! *Alle ayaa aynnu ka magangalnay guuldarro.* Inta uu qol ka mid ah gurigiisii galay, ayaa uu yidhi: *ii kaadiya saddex maalmood!*

Saddex maalmood ka dib, ayaa loo galay ninkii. Waxa la arkay gacantii oo ku qallashay qallinkii iyo isaga oo dhintay!

*Maxaa kaa liita marka aad isku taarto Ilaahay SWT!*

Dahabi ayaa ku wariyey sooyaalka saxaabiga weyn ee Abu Dardaa RC: maalinkii la furtay Qubrus, ayaa la soo hormariyey Abu Dardaa dad la soo qafaashay. Abu dardaa ayaa ilmeeyay. Waxa lagu yidhi: ma waxa aad ooyaysaa maalinkan oo uu Ilaahay ciseeyay Islaamka iyo dadkiisa?!

Waxa uu yidhi: *waxa aan arkaa umaddan awoodda iyo kartida leh oo Alle caasiday, ka dibna la kulmay waxan aad arkaysaan.* Addoomaha, maxaa kaga liita Alle agtiisa, haddii ay caasiyaan[1]!"

Run ayuu sheegay Abu Dardaa: *maxaa ka liita oo ka tamar yar insaanka!*

---

[1] Siyar Aclaam an-Nubalaa': 4/22.

# الْوَلِيُّ

Loollanka ugu cabsida badan sooyaalka dagaalladu, waa midka uu Allaha awoodda, weynida, kibirka iyo sharafta badani kaa jiro; waayo waxa uu kugula dirirayaa awooddiisa aan xadka lahayn, aqoontiisa buuxisay if iyo aakhiraba iyo cadhadiisa daran! Shaki la'aan waa aad jabaysaa oo dabajeedin doontaa, xaaladdaaduna waxa ay ku soo idlaan doontaa dhammaad xanuun badan!

# AL-WALIYU (MICIIN BADANAHA)

Si xeeldheer ayaynnu ugu mahadnaqaynaa Allaha *Waliga ah* "الولي"!

Magacan *al-Waliyu*, waxa uu leeyahay laba macne: *ka la caabudo, loona hoggaansamo, iyo hiiliyaha, gargaaraha iyo garabsiiyaha.*

*Walinimada addoomuhu:* waa hoggaansan iyo cibaado.

*Walinimada Alle:* waa hiil, kaalmo, gargaar iyo garabsiin!

Walinimada Alle ee addoomihiisu waa laba heer: *mid guud iyo mid gaara:*

*Walinimo guud:* waa midda gaadha addoomaha oo dhan; waayo Rabbi baa maamula, isaga ayaana ka caawiya cidhiidhiga iyo baahida noloshan.

*Walinimo gaar ah:* waa midda ku kooban addoomihiisa rumeeyay, oo Alle ayaa ugu hiiliya: *guushiisa, hanuunkiisa, dheeraadkiisa iyo naxariistiisaba!*

Sheekh Sicdi[1] waxa uu yidhi: *"Eebbe waa hiiliyaha uu addoonkiisu ugu hoggaansamo cibaadadiisa, daacaddiisa iyo wixii suurtagal u ah ee ah jaadadka cibaadooyinka. Si guud ayaa uu addoomihiisa ugu gargaaraa, ugana warhayaa. Kuwa rumeeyayna, si gaara ayaa uu ugu hiiliyaa oo waxa uu ka saarayaa mugdiga, waxaanu u saarayaa iftiinka. Tudhaalkiisa ayuu ku barbaarinayaa, waxa aanu ka caawinayaa noloshooda oo dhan[2]."*

## Bus[3]

Maadaama oo aynaan awood lahayn, sidee ayaynnu ugu dhex noolaan lahayn dunidan ay ka buuxaan baahiyaha ka baxsan awooddeenna, waajibaadka ka culus taagteenna iyo caqabadaha innaga taagroon?!

---

[1] **Cabdiraxmaan Naasir as-Sicdi (1889-1957kii):** waxa uu ku dhashay Cunaysa. Hooyadii waxa ay dhimatay isaga oo afar jir ah, aabbihiina isaga oo toddoba jir ah. Isaga oo agoon iyo rajaya ayaa uu si fiican u barbaaray. Si kasta oo ay ugu adkaayeen waayuhu, waxa uu ahaa wiil ku dadaala waxbarashadiisa. Aakhirkiina waxa uu noqday caalim iyo mufasir weyn oo innooga tegay dhaxal iyo dhigaal loo aayay. Kutubtiisa waxa ugu caansan *Taysiir al-Kalaam fii Tafsiir Kalaami al-Mannaan.* (Turjumaha)

[2] Tafsiirka Sicdi, bogga: 853.

[3] **Bus**: ciid budo cad noqotay; boor; siigo; habaas; awaare. Q. Y. C. Keenadiid.

Marka la fiiriyo kownka ballaadhan, insaanku waa bus la afuufay. Haddii aanu helin kaalmada, waafajinta, iyo fududaynta Allena, waa uu lumayaa!

Markii uu Rabbi ogaaday tamardarradeenna iyo xeelad yaraanteenna, ayaa uu innoo sharciyeeyay in aynnu gargaar weyddiisanno; waayo, heerka ugu sarreeya addoonnimadu waxa uu ka muuqdaa darajada ugu hoosaysa baahida aynnu u qabno kaalmadiisa! Sidaas awgeed, ayaa uu Eebbe aayad ka mid ah aayadaha ugu waaweyn Qur'aanka oo koobsatay sirta Qur'aanka -sida ay tilmaameen culimada qaar- uu iskugu xidhay cibaadada addoonka iyo kaalmada Rabbi SWT.

﴿ إِيَّاكَ نَعۡبُدُ وَإِيَّاكَ نَسۡتَعِينُ ﴾ الفاتحة: ٥

*"(Eebbow) adiga uun baannu ku caabudaynaa, oo adiga uun baannu ku kaalmaysanaynaa."*

Addoonku ma noqonayo addoon dhab ah, haddii aanu caawimo iyo gargaar ka helin Rabbigii, ama aanu dareemin mudnaanta arrinkan.

Walinimada insaanka dhex martaa waa *saaxiibtinnimo, isgarabaysi iyo isgaashaamaysi!* Laakiin, marka ay u dhexayso Rabbi iyo addoonkiisa: *waa cibaado iyo hoggaansan ka imanaya dhanka addoonka, iyo gargaar, naxariis iyo hiil ka imanaya xagga Alle!* Sidaas darteed, ayaa uu Eebbe u yidhi:

﴿ أَمِ ٱتَّخَذُواْ مِن دُونِهِۦٓ أَوۡلِيَآءَۖ فَٱللَّهُ هُوَ ٱلۡوَلِيُّ ﴾ الشورى: ٩

*"Ma (Eebbe) sokadii ayaa ay samaysteen hiiliyayaal, Alle ayaa ah gargaare."*

*Ma jiro hiiliye beddel uga noqon kara ruuxda baahida ay u qabto hiilka Ilaahay ee iskugu jirta maamulka, kaalmada iyo gargaarka.*

## Bilawga Loollanka

Weynida magaca *al-Waliyu* waxa ka mid ah in uu tilmaamayo in uu Rabbi qaybo ka mid ah addoomihiisa u gargaaro, jecel yahay, ilaaliyo, isla markaana difaaco. Abu Hureyra RC waxa uu ka wariyey Nebiga NNKH:

**"إن الله قال: من عادى لي وليا فقد آذنته بالحرب."**

*"Alle sarreeye ayaa yidhi: qofk colaadiya waligayga, dhab ahaantii dagaal baa aan ogaysiiyay[1]."*

[1] Saxiixu Bukhaari: 8/105.

Allaha ku dul sugan carshigiisa ayaa ku dhawaaqay dagaal ba'an oo uu ku qaadayo liibaanta iyo ladnaanta kuwa u soo banbaxay dhibaatayntа awliyadiisa! Alle waa hiiliyohooda oo cidlo kaga tegi maayo. Waxa kale oo uu ku wareejiyay jacaylkiisa iyo ilaalintiisa! Waanu ka warhaynayaa!

Loollanka ugu cabsida badan sooyaalka dagaalladu, waa in Allaha awoodda, weynida, kibirka iyo sharafta badani uu kaa jiro! Waayo, waxa uu kugula dagaallamayaa awooddiisa aan xadka lahayn, aqoontiisa buuxisay if iyo aakhiroba iyo cadhadiisa daran! Muran la'aan, waa aad jabaysaa oo dabajeedin doontaa. Dagaalkanina waxa uu ku soo idlaan doonaa dhammaad xanuun badan!

Waxa soo arooray xadiis Qudsi cajiib ah oo ay wariyeen culimo badan oo uu ka mid yahay Ibnu Teymiya AHUN oo ku wariyey kitaabkiisa *al-Furqaan bayna Awliyaa ar-Raxmaan wa awliyaa ash-Shaydaan*.

**"إني لأثأر لأوليائي كما يثأر الليث الحرب"**

*"Awliyadayda waxa aan ugu aarayaa sidduu u aarsado libaaxa dagaallamaya."*

Ibnu Teymiya AHUN ayaa ku macneeyay: *ciddii colaadisa awliyadayda waxa aan uga aarsanayaa sida uu libaaxa dagaallamayaa u aarsado."*

Hoog iyo halaag baa u sugnaaday qofka isku taabta awliyada Ilaahay!

## Naxariista Eebbe

Amminka uu dhulku noqdo omos iyo abaar daran. Xilliga ay noloshu dhadho ee ay afka saarto jidka dhimashada, dadkuna ay fiiriyaan cirka iyaga oo dhawraya naxariis iyo faraj; waxa soo baxa magaca *al-Waliyu* oo fasaxa daruuraha da'a, naxariista Allena ku dhex faafiya addoomaha.

﴿ وَهُوَ ٱلَّذِي يُنَزِّلُ ٱلْغَيْثَ مِنۢ بَعْدِ مَا قَنَطُواْ وَيَنشُرُ رَحْمَتَهُۥۚ وَهُوَ ٱلْوَلِيُّ ٱلْحَمِيدُ ﴾

الشورى: ٢٨

Marka ay abaaruhu
Dadka oon ku laayaan
Cir irmaanshe Eebbow! (Yamyam AHUN)

Marka ay kugu habsadaan lakabyada mugdiga iyo indho la'aantu, ee aanad awoodin in aad ka gudubto xaaladdan halista ah. Waqtiga ay iskaga

kaa qasmaan xaqa iyo baadilku, iyo saxda iyo khaladku, ee aad ku dhex wareerto; *Allaha Waliga ah* ayaa kuu daaraya ilays aad kaga baxdo mugdiga, isla jeerkaasna aad ku kala soocdo xumaha iyo samaha.

﴿ ٱللَّهُ وَلِيُّ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ يُخْرِجُهُم مِّنَ ٱلظُّلُمَٰتِ إِلَى ٱلنُّورِ ﴾ البقرة: ٢٥٧

*"Eebbe waa hiiliyaha kuwa iimaanka leh, oo waxa uu ka saarayaa mugdiga, waxa aanu u saarayaa iftiinka."*

Magacani (Al-Waliyu) si joogto ah ayaa uu uga muuqdaa noloshaada oo waxa uu ku biiriyaa ammaan, nabadgelyo, liibaan iyo xasillooni.

## Qalbi Cabsada

Alle, waxa uu ku farayaa arrin, ka dibna waxa uu kugu caawinayaa awooddii aad ku fulin lahayd. Ruuxdaada ayaa u heellanaanaysa xaggiisa oo raaxo iyo rayn-rayn ayaa ay ku dareemaysaa shaqadan. Waxa uu kuu yaboohayaa abaal weyn, noloshana waa uu kuu sakhirayaa. Dabadeeto, si fudud ayaa aad ula falgelaysaa waaxyaha kala duduwan ee noloshan.

Alle SWT, arrin ayaa uu kaa reebayaa oo waa uu kugu adkaynayaa. Irrid kasta oo aad ka geli lahaydna, waa uu kaa soo xidhayaa. Sidoo kale, haddii aad u dhawaato, waxa uu kugu sallidayaa murugo iyo qalbi cabsada. Haddii aad ku dhacdo xumaantii, walaac culus ayaa uu kugu ridayaa; si aanad mar kale ugu noqon. Ciqaab daran iyo nolol cidhiidhiya, ayaanu kuugu gooddiyayaa haddii aad samayso xumaan! Alle, waa hiiliye ammaanan. Kaalmadiisan dhan kasta kaa xigtaana waa gargaarkiisii.

## Dirac-Adag

Muuqaallada hiilka Alle waxa ka mid ah in uu abuuray noole taag-daran, ka dibna u diyaariyay agabkii iyo aaladdii uu ku dhacsan lahaa xaqiisa, kuna difaacan lahaa xuquuqihiisa!

Shimbiraha ayaa uu abuuray oo waxa uu u sameeyay baalal ay ku duulaan. Maroodiga ayaa uu abuuray oo waxa uu u sameeyay awood uu iskaga celiyo ciddii ka soo hor baxda! Faraska ayaa uu abuuray oo waxa uu siiyay orod uu kaga gudbo halisaha. Deerada ayaa uu abuuray oo waxa uu siiyay geeso ay iskaga waabiso dugaagga. Jirjirroolaha ayaa uu uumay

oo waxa uu siiyay awood uu isku bed-beddelo; si uu wax u ugaadhsado, cadawgiisana uga dhuunto.

Noole kasta oo jira, Alle waxa uu u sameeyay difaac adag oo ka ilaaliya halisaha ku xeeran! *Waa ilaalin iyo kaalmo Rabbi!*

Muuqaallada naxariista Alle, waxa ka mid ah in uu ka dhigay hooyada mid si aan xad lahayn ugu naxariisata ilmeheeda oo aan la'aanteed jireen! Saw ma aad arag dheddig taag-daran oo marka lagu xadgudbo ubadkiisa isku rogaya aar cartamaya iyo halyeey hirdamaya?!

*Isbeddelkani waa jaad ka mid ah hiilka iyo gargaarka Alle!*

## Agoonkii

Haddii uu Alle SWT la doono addoon cilmi, irridaha kaalmadiisa oo dhan ayaa uu u ballaqaa. Waayo, waxa uu la doonayaa maqaam sare.

Agoon *Axmed binu Xambal* markii uu Eebbe la doonay sheekhnimo, qalbiga hooyadii ayaa uu jeclaysiiyay waxbariddiisa. Hooyadani waxa ay u adkaysan jirtay safarradii uu iskaga gudbi jiray xalqadaha cilmiga.

*Mar labaad* ayaa uu Eebbe siiyay maskax xifdi badan oo uu ku qaybo boqollaal kun oo xadiis oo uu u sii gudbin jiray ardaydiisii!

*Mar saddexaad* ayaa uu Eebbe siiyay fahan u sahlay samaynta *mad'hab* hodan ah oo ilaa hadda jira, isla jeerkaasna hodan ah!

*Mar afaraad* ayaa uu Alle SWT ugu deeqay dulqaadkii uu kaga hortegay caqiido xumadii iyo gardarradii siyaasiga ahayd, waxa aanu noqday imaamkii Ahlu-Sunnaha ee xilligiisii.

Runtii, sunnadii iyo diintii lala dagaallamay ayaa uu boodhka ka jafay!

*Axmed waa caalim qudha, ee bal ka warran aqoonyahannada ku takhasusay diinta, afafka iyo sayniska, ee uu Alle doonay in ay aqoontooda ku iftiimiyaan adduunkan, noloshanna u horseedaan horumar iyo ilbaxnimo is huwan?!*

## Warbixin waafiya

Aqbalidda baryada addoonka ayaa ka mid ah jaadadka hiilka, jacaylka iyo gargaarka Alle SWT!

Shakhsi lagu salliday jaadadka balaayooyinka iyo noocyada murugada ayaa la soo xidhiidhay sheekh ka mid ah culimada ka shaqeeya dacwadda! Si faahfaahsan oo waafiya ayaa uu uga warramay dhibaatooyinka haysta iyo xanuunnada uu la nool yahay. Sheekhii aad iyo aad ayaa uu ula damqaday ninkan! Ninkii ayaa weyddiistay sheekhii xalal uu ku maareeyo xaaladdiisa! Sheekhii ayaa ku yidhi: haddii aan wax kuu qaban karayo, dhibka iyo kadeedka ku haysta ayaa aan kaa qaadi lahaa! Hase ahaatee, waxa aan kugula dardaarmayaa dardaaran aan u malaynayo furaha farajka iyo khayrka. Waxa aan kaa doonayaa in aad kacdo caawa, ka dibna aad sujuuddo sujuud dheer oo aad Eebbe ugu sharraxayso baahiyahaaga oo dhan. Qaabkii aad iigu faahfaahisay xaaladdaada si la mida ugu faahfaahi Ilaahay oo waxba haka tegin! Hadalkan ayaa iskugu dambeeyay sheekhii iyi ninkii dhibbanaa; si uu ugu dhaqmay taladiina mooyi!

Toddobaad ka dib, sheekhii waxa la soo xidhiidhay ninkii oo markan faraxsan. Waxa uu yidhi: sheekhow, dhibkii i haystay, Alle ayaa iga kor qaaday. Sujuud keli ah ayaa uu igaga bogsiiyay xanuunkii i hayay sannadaha badan! Waxa aan ku farayaa in aad taladan siiso qof kasta oo dhibban; waayo, waxa laga yaabaa in uu Alle SWT ku anfaco.

﴿ وَإِذَا سَأَلَكَ عِبَادِى عَنِّى فَإِنِّى قَرِيبٌ أُجِيبُ دَعْوَةَ ٱلدَّاعِ إِذَا دَعَانِ ﴾

Addoon yidhi Allahayow
Kaan qadinin Eebbow. (Yamyam AHUN)

## Mudanta Bulshada

﴿ إِنَّ وَلِـِّۧىَ ٱللَّهُ ٱلَّذِى نَزَّلَ ٱلْكِتَٰبَ وَهُوَ يَتَوَلَّى ٱلصَّٰلِحِينَ ﴾ الأعراف: ١٩٦

*"Hiiliyahaygu waa Allaha soo dejiyay kitaabkan, isaga ayaana garabsiiya dadka wanwanaagsan."*

Sheekha qoray kitaabka *Ladaa'if al-Ishaaraat* ayaa yidhi: *"qofka u istaaga xaqa Alle, si dhammaystiran ayaa uu Rabbi ugu kafaalo qaadaa arrimihiisa. Uma baahiyo cid kale, haddii uu arrin doonana, qaabka ugu fiican ayaa uu ugu hirgeliyaa*[1]*."*

Aaluusi ayaa ku fasiray aayaddan: *"caadada iyo dhaqanka Alle, waxa ka mid ah in uu u hiiliyo addoomihiisan oo aanu garabkooda ka bixin."*

*Maxaa ka weyn caado uu Alle ugu soo laabanayo awliyadiisa mar kasta oo ay u baahdaan. Ma waxa jirta daqiiqad aanu addoonku u baahnayn ilaalinta, hanuunka iyo kaalmada Rabbigii?!*

Qaybta dambe ee aayaddani waxa ay farta ku fiiqday Qur'aankani in uu yahay jidka lagu hanto gargaarka Alle. Abu Sacuud[2] waxa uu leeyahay: *"in Alle tilmaamay soo dejinta kitaabku, waxa ay ina dareensiinaysaa gargaarkiisa."*

Qofkii u qabsada Qur'aanka aqoon ahaan, xifdi ahaan iyo hanuun ahaan, runtii Qur'aanku waa xaqa, ilaaliyaha iyo gargaaraha dhabta ah! Dadka wanaagsan ee uu Alle u gargaarayaana waa xerta Quraanka. Mar kasta oo uu addoonku u dhowaado Qur'aanka, waxa u soo dhowaada hiilka Alle.

Arrimaha ugu mudan ee ay habboon tahay in uu Muslinku ka dhigto mashaariicdiisa ugu horraysa, waxa ka mid ah xifdinta Qur'aanka kariimka ah, iyo in aanu marna ka madhnaan qalbigiisa iyo carrabkiisa. Ma qummana in uu addoonku kaga warwareego qaybidda Qur'aanka kariimka ah; ma ihi arday, carrabka ayaa iga weynaaday iyo gaabis ka imanaya xaggiisa. Xifdinta Qur'aanku waa mashruuca Muslinka, inta uu xusulkii xabaal ka sarreeyo. Waana isku mid in uu wada qaybo Qur'aanka iyo in uu ugu yaraan xifdiyo badhkii; waayo Qur'aanku waa iftiinka qalbiga iyo foolka. Waana astaan tusaysa in Alle agtaada ku weyn yahay. Qur'aanku waa wehelka qabriga iyo sharafta adduunka. Qaybidda Qur'aanku ku ma xidhna da' iyo takhasus gaar ah. Takhasuska Muslinku, waa Islaamka. Maadaama oo aad Muslin tahayna, laabtaada meel uga samee hadalka Rabbi. Dhab ahaantii, waa aad badhaadhi doontaa! Hana dhaafin qoraalka adiga oo aan go'aansan maanta laga bilaabo in aad la noolaato Qur'aanka. Ku bishaarayso guusha iyo gargaarka Rabbi, dhawrna maamuuska, hanuunka iyo iftiinka cad.

[1] Ladaa'if al-Ishaaraat: 1/597.

[2] **Abuu Sacuud al-Afandi:** waa fiqiyaqaan iyo garsoore dhashay dhammaadkii qarnigii sagaalaad ee hijriga. Macallin baa uu ahaa, hase yeeshee, garsoore ayaa uu uga wareegay. Waana ninkii ugu horreeyay ee sameeyay hay'ad fatwo.

# الْقَوِيُّ

Allaha awoodda badan baa ku gaaryeela addoomaha kibray dhammaadyada ugu cajiibsan, xanuunnada ugu daran iyo macaluusha ugu xun. Ujeedku waa; si ay u ogaadaan masaakiintu in uu Alle oo keliyii awood leeyahay, wax kasta oo ka soo hadhayna uu taagdaran yahay.

# AL-QAWIYU (XOOG BADANAHA)

Xumaan oo dhan waxa ka hufan Eebbaha *Tamardarrada* ka dhigay astaan ku ladhan nolosha gaaban ee insaanka! Cudur baa ka awood bata, baahi baa hanjabisa, ama noole kibray baa madaxa ka garaaca.

Awoodda, kibirka iyo weynidana, Alle ayaa isku gaaryeela, si ay kuwa liitaa u magangalaan oo uu ugu hiiliyo, si ay ugu iishaan qalbiyada dilani oo uu u kabo, iyo si uu dhibbanuhu ugu jeedsado, deedna uu uga qaado xanuunka haysta!

Alle, waa awood badanaha aan laga rayn. Ma jirto awood iska caabbin kartaa. Cid kasta oo isku qaadqaaddana, boqnaha ayaa uu ka jabiyaa.

Waxyar aynnu ka tilmaanno awoodaha Eebbe SWT; si ay u buuxiso qalbiyadeenna *cabsidiisa, u ilaashadiisa iyo jacaylkiisu*, iyo si aynnu iskaga sarraysiinno arrimaha yaryar ee innoola muuqda wax weyn oo qiimo leh!

Marka aynnu la kulanno qof kibirsan, waxa aynnu ogaanaynaa in uu dagan yahay oo uu Alle u kaadiyay, deedna uu isqaatay! Sidoo kale, waxa aynnu garanaynaa in Rabbi marka uu doono uu ku soo afjarayo kibirkiisa cayayaanka ugu yar, dhammaadka ugu cajiibsan iyo xanuunka ugu daran; waayo Alle SWT, waa lagama reeyaha aargoosta!

## Awoodi waa ta Eebbe

Macnayaasha Al-Qawiyu waxa ka mid ah in Alle u hibeeyo awoodda cidda ka codsata; sababta oo ah awoodda Alle ayaa ay ka dhalataa kartida uu Muslinku ku oogo cibaadooyinka, kuna qabsado hawlihiisa.

Qof baa tilmaamayay xaalad tamardarro oo soo martay, taas oo ka dhigtay mid Safa iyo Marwo ku dhex socda kursiga la riixo. Ma ahayn cumro iyo labatoona, hase ahaatee ugu yaraan shan cumro ayaa uu xaaladdan ku sugnaa! Shaki la'aan waxa uu aamminsanaa awoodda Alle iyo in uu keligii bixiyo awoodda. Kalsoonida jaadkan ahi marar badan ayay isdhintaa oo uu waqtiga adagi dhaawac iyo burbur u geystaa.

Waxa uu yidhi: bil Ramadaan ayaa aan maqlay wadaad ka sheekaynaya fadliga iyo wanaagga wardigan لا حول ولا قوة إلا بالله, in uu Alle awood cajiib

ah siiyo qofkii aammina, in ay doorinta xaaladuhu tahay hibo uu Alle bixiyo iyo in uu wardigani soo jiido awooddan!

Wacdigan iyo xusuusintan ayaa si xeeldheer u saameeyay qalbigiisa. *Waa uu joogteeyay isaga oo dhuuxaya, ku digriyaya, qalbigiisana ku dhaqaya.*

Muddo yar ka dib, Allaha awoodda badan ayaa siiyay awood, karti iyo firfircooni. Ninkii bishii Ramadaan iyo bishii xigtay, saddex jeer ayaa uu soo cumraystay isaga oo cagihiisa ku socda! Xitaa waxa uu gaadhay heer uu ka dheereeyo saaxibbadii ku riixi jiray kursiga! Awoodda Alle, ayaa ay ka yimaaddaan awooduhu, fadligiisana waxa ku taga in badan oo ka mid ah macaluusha, xanuunka iyo kadeedka; waayo Allaha awoodda badan baa kaa dhigaya xoog-badane ka gudba tamardarrada jidhka, liidashada ruuxda iyo qalbijabka!

## Faynuuskii Weynaa

Eebbe SWT, goor iyo ayaanba waxa uu ku tusayaa awooddiisa, si ay cabsidiisu u buuxiso naftaada, gargaarna aanad u weyddiisan qayrkii.

Qawaaniinta kownkan, waxa ka mid ah shay kasta oo kor loo qaaday, cid baa qaadday. Ma jiro shay iskii isku qaadaa. Haddaba, marka ay naftaadu aamminto xeerkan iyo xaqiiqooyinka fisigiska; waaba awoodda Alle oo ku wareerinaysa, isla markaana ka gudbaysa xeerarkan iyo xaqiiqooyinkan. Waxa aad arki qorraxdan weyn ee shaqada xeeshadheer haysa oo xajiye la'aan soconaysa. Casharkan weyn ayaa ku jeedinaya qalbigaa awoodda Alle ee aan xadka lahayn!

Marka kale, fiiri cirkan weyn ee ballaadhan ee tiirar la'aanta taagan!

﴿ وَٱلسَّمَآءَ بَنَيۡنَٰهَا بِأَيۡيْدٖ وَإِنَّا لَمُوسِعُونَ ﴾ الذاريات: ٤٧

*"Samadana annaga ayaa ku dhisnay awood, annaga ayaana ballaadhinayna."*

Waxa aad iswayddiinaysaa: *waa maxay shayga hor istaagi kara awoodda koryeeshay samadan sarraysa ee ilaashan?!*

Haddii aad aragto shakhsi sheeganaya awood dhab ah, u fiirso halka uu ka taagan yahay samada tiirar la'aanta taagan. Runtii waxa aad ogaan heerka tamardarradiisa iyo in aanu Alle agtiisa waxba ka ahayn!

## Xanuunka

Xilliyada xanuunka, qofku waa in uu barto wax ka mid ah awoodda abuurihiisa; si uu u fahmo xoog iyo xeelad la'aantiisa baahsan!
*Halisaha sida daran ee qallafsan u haleela insaanka, waxa ka mid ah xanuunka iyo noocyadiisa kala duduwan. Haddii uu yahay duray iyo haddii uu noqdo xanuun dilaaya, laba gooraba waxa uu wataa jawi ay ka buuxaan taah iyo tamardarro!*
Eebbe ayaa ku rida insaanka xanuunno badan maalmaha uu nool yahay. Ujeedku waa si loo tuso awoodyaridiisa iyo baahida uu u qabo Rabbigii.
*Alle, waxa uu ugu sallidaa insaanka xanuunka, si aanu ugu dagmin awooddiisa, hantidiisa iyo qabiilkiisa oo si fudud loo waayo haddii uu yimaaddo xanuun!*

Heerkulka jidhka ilmaha oo gaadha *afartan darajo,* ayaa keena gariirka oo lagu tiriyo sababaha geerida, ama ugu yaraan in uu dhinac bakhtiyo! Heerkulkan sarreeyaa haddii uu aad u soo laalaabto, waxa uu keeni karaa caqliga badhkii oo taga, taasna waxa ka dhasha isla hadal aan dhab ahayn!

Waxa dhif iyo naadir ah in ay Hablobaas ku dhacdo qof ka mid ah qoyska, deedna aanay wada gaadhin qoyska. *Maxaa ka liita insaanka!*

Heerka Ogsajiinta oo yaraada ayaa halis geliya nolosha uurjiifka, oo waxa ka dhasha maskax-qallal keena *naafanimo, waalli iyo karti yaraan!*

Haddii uu qofku u dhaco dhabarka oo uu ka dhaawacmo lafdhabarta, waxa ka dhasha in uu si guud, ama qayb ahaan uga tago dareenku!

Haddii uu insaanku isku dhigo laydh qabow, waxa ka dhasha in ay qayb ka mid ah wajigiisu qallasho! Waxa dhacda in uu qofku habeenno dhan la soo jeedo gaws, dheg ama madax xanuunay! Calool xanuunku jaxiima yar baa uu ka dhigaa nolosha insaanka, afkiisana waxba ma saaro!

Dhawr sano ka hor ayaa uu walaalkay iga weyni martigeliyay oday da'a oo uu ku dhacay xanuunka kansarku; maadaama oo uu magaaladayada ku yaallay dhakhtarkii la tacaalayay xaaladdiisa caafimaad. Maalinkii waxa uu aadi jiray cisbitalka, habeenkiina waa uu ka iman jiray isaga oo daallan. Waxa aan xusuustaa isaga oo ubadkiisa ku leh: *goorma ayaan dhimanayaa?!* Waalidkani waxa uu jeclaysan jiray in looga raaxeeyo noloshan!

In ka badan toddoba sannadood ayaa uu ayeeyday hayay *Elarjika;* oo ah xanuun ku dhaca jidhka insaanka. *Wedka ayaa ay u gacan haadin jirtay, ilbidhiqsi kastana waxa ay diyaar u ahayd in uu wedku ka saaro jaxiimadan.*

## Kibir-Jabiye

Namruud binu Kancaankii yidhi *aniga ayaa wax nooleeya, waxna dila*, ayaa uu Alle ku salliday kaneeco ka gashay sanka, ilaa madaxana socotay. Xanuun daran baa uu dareemi jiray, shayga keli ah ee uu ku degi jirayna waxa uu ahaa madaxa oo uu kabo iskala dhaco. *Maxaa uu naftiisa oo keli ah u noolayn waayay haddii uu waxna dilo, waxna nooleeyo?!*

Ninkii sheegtay rabbinnimada ayaa uu Eebbe SWT ku halaagay biyo. Ninkii ku tookhay xooggayga iyo xeeladdayda ayaa aan ku xamaashay hantidayda, dhulka ayaa lala jaray isaga iyo hoygiisii.Kii yidhi cantoobo ciida ayaa aan ka soo qaaday raadkii rasuulka oo waa aan tuuray, naftayda ayaana sidaas ii qurxisay, ayaa uu Alle ku riday xanuun nafsiya oo dilay. Lamadegaanka ayaa uu meeraysan jiray isaga oo leh: *la ima taabanayo!*

Friedrich Nietzsche, oo ku dhawaaqay *dhimashada Alle,* ayaa waashay, noloshiisiina waxa uu ku dhammaystay xarumaha caafimaadka. In badan oo ka mid ah buugtiisa waxa uu qoray isaga oo dareemaya waswaas, cabsi iyo argagax cajiiba! Xitaa buuggiisa *"Sidaas ayaa uu u hadlay Saraadashti",* seddex cutub oo ka mid ah waxa uu qoray isaga oo ku jira xaalad daran oo aanu garanayn xaqiiqadeeda!

Ninkan, ayaa dhigay cusbitalka dhammaadkii noloshiisa? Docda kale, dumarka oo dhan ayaa diidi jiray in ay u soo dhowaadaan; waayo waxa ku dhacay xanuunka jabtida! Ayaa ka dhigay mid u jiifa furaashka sidii bisad bukta?! *Dheh: Allaah! Ka dibna, ka tag haku indhobeelaan qooqooda e'*[1].

Badanaa awoodda Eebbe ayaa ka muuqata *falalkiisa*, si uu u xusuusiyo addoonka tamardarradiisa, baahida uu u qabo iyo heerka uu ka fogaaday xeerarka uu u soo dejiyay abuurtiisa. Dhaqanxumo ayaa ku dhex faafta bulshooyinka qaar oo dibadda ayaa ay ula soo baxaan. Dabadeeto waxa ka dhex qarxa xanuunno aanay hore u arag sida AIDSka, oo lagu sallido dadka sinaysta. Waa xanuun cajiib ah oo hoos u dhiga difaaca jidhka, ka dibna xanuunnada ugu fudud ayaa dila qofka uu ku dhaco.

---

[1] Aabi iyo aftaagiyo
Marka qoon isbiday jiro
Kibir badane Eebbow.
Yamyam (AHUN)

﴿ وَهُمۡ يُجَٰدِلُونَ فِي ٱللَّهِ ﴾ الرعد: ١٣

*"Gaaladu, Alle ayaa ay ka doodayaan."*

## Kabbasho

Walaalkay ayaa ay kelyuhu xanuuneen. Amminkii uu jiifay sariirtii caddayd, muuqaalkiisu aad ayaa uu ii dhibayay! Shimbir dhaawaca ayaa aad moodday oo ma lahayn wax awood ah oo xanuun daran baa hayay. In badan ayaa aan tamanniyay in aan la qaybsado xanuunkii hayay!

Saaxiibkay ayaa si khalad ah u cunay xaddi ka badan intii looga qoray dawadiisa. Dhakhtar ayaa aan u qaaday. Aniga oo arkaya ayaa uu kacayay oo ay xididdada wajigu barareen. Waxa aan sawirtay mulxid sida Jean-Paul Sartrekii[1] ku dhawaaqayay *ilaahnimada insaanka! Muxuu qiimo leeyahay ilaah aan iska difaaci karin xanuunnadu!*

Ma waxay ka maarmeen Allaha awoodda badan, oo ay aadeen miskiin aanay gacanta ugu jirin: *dhib, dheef, nolol iyo dhimasho, iyo isa-soosaartoona?!*

## Buuraha

Mar kasta oo uu shay ku weynaado insaanka, eray qudha ayaa uu Alle ku tirtirayaa! Buuraha ayaa ku weynaaday nafaha mushrikiintii Maka. Nebiga CSW ayaa ay u yimaaddeen iyaga oo wax ka weyddiinaya. Waxa ay u malaynayeen in ay hayaan war weyn iyo weyddiin madax-daalisa. Eebbe SWT ayaa ku yidhi Qur'aanka kariimka ah:

﴿ وَيَسۡـَٔلُونَكَ عَنِ ٱلۡجِبَالِ فَقُلۡ يَنسِفُهَا رَبِّي نَسۡفٗا ١٠٥ فَيَذَرُهَا قَاعٗا صَفۡصَفٗا ١٠٦
لَّا تَرَىٰ فِيهَا عِوَجٗا وَلَآ أَمۡتٗا ١٠٧ ﴾ طه: ١٠٥ - ١٠٧

[1] **Jean-Paul Sartre (1905-1980):** waa faylasuuf, sheeko curiye, riwaayad qore iyo siyaasi firfircoon oo Faransiis ah. Shaqadiisii ugu horraysay macallinnimo ayaa ay ahayd oo Jarmalka ayaa uu ka dhigi jiray falsafadda muddadii uu socday dagaalkii kowaad ee adduunku. Markii uu Jarmalku qabsaday dalkiisii, waxa uu ku biiray xoogaggii guumaysi-diidka ahaa ee la dagaallamayay Jarmalka. Waxa uu caan ku ahaa waxsoosaar tiro iyo tayaba leh.

Eebbe SWT, dhagaxna ka reebi maayo buurahan ku weyn naftooda.
Badahan ballaadhan, awooddiisa ayaa u rogaysa dab!
Buurahan dhulka ku aasan, awooddiisa ayaa u beddelaysa daruuro!
Qorraxda iyo dayaxana, gunta jahannama ayaa uu ku tuurayaa!

Shayga ugu weyn ee ay suurtagalka tahay in aad ku dabagabbato, si uu kuu ilaaliyo. Shayga qudha ee kaa kaxaynaya cabsidaada. Shayga keli ah kuu ahaanaya tiir adag oo aad ka weheshanayso dunidan cabsida badani waa awoodda Ilaahay SWT!

Haddii uu xanuun ku cabsigeliyay, magangal Allaha awoodda badan!
Haddii ay cabsiyi ku argagaxgelisay, talasaaro Allaha awoodda badan!
Haddii laguu awood sheegtayna, magangal Allaha awoodda badan!

## Kaneeco

Allaha awoodda badan ayaa ku sallida kibrayaasha dhammaadka ugu cajiibsan, xanuunka ugu layaabka badan iyo macaluusha ugu daran; si ay u ogaadaan tamarlaawayaashu in Alle oo keliyii yahay awood badane, wixii ka soo hadhayna ay yihiin awoodlaawayaal aan waxba iska dhicin karin!

Ma taqaannaa qaabkii lagu soo afjaray Namruud binu Kancaankii yidhi *aniga ayaa wax nooleeya, waxna dila?* Kaneeco sanka ka gashay ayaa dishay!

Ma taqaannaa qaabkii lagu soo xidhay riwaayaddii Fircoonkii yidhi *waxa aan ahay rabbigiinna ugu sarreeya?* Fircoonkii faray wasiirkiisii Haamaan in uu u dhiso dhisme dheer, si uu u fiiriyo Allaha awoodda badan! Ma og tahay waxa uu ku sameeyay awood badanuhu?! Hirarka badda ayaa uu ku kiciyay, si uu u dhinto oo ay u quutaan kalluunka iyo noolayaasha baddu!

Muuqaallada awoodda Eebbe waxa ka mid ah in uu isku diro cadawgiisa. Adolf Hitler oo ka mid ah raggii kibray ayaa go'aansaday in uu gacanta ku dhigo adduunkan oo dhan. Dartii waxa u qudhbaxay toddobaatan milyan oo qof! Ma taqaannaa waxa uu Alle ku sameeyay?! Waxa lagu diray ciidanka cabsida oo dhan kasta kaga soo qaaday weerar ba'an! Aakhirkiina waxa uu cabbay sun! Hitlerkii aan la loodin jirin. Hitlarkii ay dunida oo dhami ka baqan jirtay awooddiisa, ayaa nafta iska jaray. Sababta miyaad garanaysaa?! Ma ahayn ilaah awood badan oo Eebbe ayaa abuuray. Suurtagalna ma aha miskiin tamardarani in uu awood isbido.

Kibrayaashii dunidan soo maray ee sheegtay awoodda, maskaxda iyo geesinnimada, hadda waa ay wada dhinteen, sheeko ayaana ka hadhay! Haa waxa ay noqdeen sheekooyin habeenkii lagu seexiyo carruurta yaryar!

﴿ فَجَعَلْنَاهُمْ أَحَادِيثَ ﴾ سبأ: ١٩

*"Waxa aannu ka yeelnay sheekooyin."*

Qasriyadii, awooddii cabsida lahayd iyo ciidankii waardiyeyn jiray, ayaa ku biiray xaggii loo badnaa. Halkan ayaana lagu xisaabin oo lagu abaalmarin!

## Teendhooyinka

Hoggaamiyihii Muslimiinta ee Saleebaan binu Cabdimalik iyo Cumar binu Cabdicasiis AHUN ayaa xajay. Saleebaan baa u baxay Daa'if. Deedna onkod iyo hillaac ayaa isqabsaday. Saleebaan oo argagaxsan ayaa ku yidhi Cumar: *miyaanad arkayn? Waa maxay waxani?* Cumar baa ugu warceliyay: *"waa naxariista Alle oo da'aysa ee ka warran ciqaabtiisa oo da'aysana[1]?!"*

Waxa uu safray isaga oo ay la socdaan ciidamadiisii iyo saraakiishiisii. Waxa uu ahaa boqor ay boqorradu ka wada haybadaystaan. Waxa raacay ciidankiisii aan la tirin kari jirin. Habeen ayaa uu dareemay xanuun daran. Dhakhaatiirtii oo dhan ayaa iskugu yimid, balse waxa ay u sheegeen in ay tiisii soo dhowdahay oo aan waxba laga qaban karayn. Xitaa ma gaadhi karayo qasrigii madaxtooyada ee Dimishiq. Habeen uu hayay xanuun daran ayaa uu ka baxay teendhadiisii, si uu u soo fiiriyo teendhooyinkii ciidankiisa oo fidsan ilaa ilqabad. Isaga oo ay ka muuqato tamardarro ayuu sare fiiriyay, ka dibna, yidhi: *"Allaha aanay boqortinnimadiisu dhammaanow, u naxariiso mid ay dhammaanayso boqortinnimadiisu."*

Ma jirto awood iyo boqortinnimo u dhigma, ama hor istaagi kara kuwa Alle! Awooddiisu isma beddesho, kibirkiisuna ma dhinto!

Saleebaan binu Cabdimalik isma lahayn awooddaada ayaa aad ku waayi doontaa dawo. Xusuustiisa ku ma soo dhicin adiga oo boqor ah ayaa aad ku dhimanaysaa teendho hoosteed. Mana filayn in uu dhowaan dhimanayo!

Hoggaamiyihii Cabbaasiyiinta ee Haaruun Rashiid iyo boqorkii weynaa ee ku odhan jiray daruuraha: *halka aad doonto ku da', midhahaagu waa ay ii iman*

[1] Xilyatu al-Awliyaa wa dabaqaatu al-Asfiyaa: 5/288.

*doonaane,* ayaa maalin maalmaha ka mid ah isaga oo dhex fadhiya qasrigiisii dheeraa iyo daartiisii ballaadhnayd, waxa soo booqday xanuunkii geerida. Waxa uu jiifi jiray qolkiisii wada fadhiyada iyo barkimooyinka ahaa. Waxa uu arkay doobiile saboola oo wabiga Dijla ku dhaqaya maryo, isla jeerkaasna si deggan u heesaya. Laxankiisii iyo luuqdiisii macaanaa ayaa daaqadda uga soo galay Haruunkii hantida iyo boqortinnimada badnaa. Iyada oo ilmadii ka dareertay qoysay gadhkiisa ayaa uu yidhi: *hooggayga ee miyaan noqdo doobiile! Hooggayga ee maxaa aan u bartay madaxtinnimada!*

Allaha awoodda badan baa doonay in uu xaaladdan xanuunka badan ku soo afjaro awooddii iyo boqortinnimadii Haaruun. Ujeedkuna, waa si aynnu u baranno awoodda dadka, iyo si aynaan u talasaaran cid aan Alle ahayn!

## Dhimay

Saaxiibkay ayaa iiga warramay deris hore oo ay wada deganaan jireen xaafadda Shacbiya. Waxa uu ahaa nin awood badan oo muruqyo waaweyn. Qofka uu gacanta ku dhigo, cadaabaha ayaa uu marin jiray. Haddaba, qaybo ka mid ah dadkii xaafadda deganaa ayaa wiilkan wanjalay oo ku yidhi ninkii kibirka badnaa: marka aad maqan tahay, ayaa uu xaaskaaga iyo carruurtaada dusha sare ka daawadaa!

Wiilkii yaraa iyo ninkii kibirka badnaa ayaa ku kulmay surin ka mid ah surinnada xaafadda. Inta uu si daran u qabtay ayaa uu garaacay wiilkii. In kasta oo aan ka weynaa da'dii oohinta, haddana maalinkaa waa aan ooyay, ayaa uu yidhi wiilkii. Isaga oo sii wata hadalkiisa, waxa uu yidhi: markii uu i sii daayay ayaa aan si toos ah u aaday masjidka. Masjidku waxa uu ii ahaa ammaan, hiiliye iyo gargaare! Waxa aan tukaday laba rakcadood. Guul iyo gargaar, ayaa aan weyddiistay awood badanaha!

Xanuunka murugada iyo quudhsiga ayaa ka dhigay miskiinkan yar sida shimbir aan baad lahayn. Waxa uu jeclaystay in uu helo awood uu iskaga dhiciyo kibraanigii dadka hortooda iskugu daray garaaca iyo quudhsiga.

Waxa aan tegay guriga aniga oo lugaha dhulka jiidaya, isla jeerkaasna dareemaya macnaha dulmiga, xeelad yarida iyo quudhsiga!

Waxyar ka hor eedaankii salaadda subax, ayaa uu i toosiyay walaalkay oo dawakhsani. *Hebel baa dhintay ee ka kac hurdada, ayaa uu yidhi.* Waxa dunidan ka tegay daalimkii xoogga iyo xeeladda ku tookhi jiray!!

*Miyaa uu dhintay? Haa waa uu allaystay!*

Allaha awoodda badan ayaa maqlayay ilbidhiqsigan. Shay kasta ayaa uu arkayay, maqlayay, oo awoodayay! Ducadii wiilkii yaraa waa uu aqbalay!

Awoodi waa ta Alle, ma jirto cid ka awood badani, waana lagama reeye!

## Wadne-Qabad

Saaxiibkay ayaa iiga warramay sheeko ku dhacday qoyskooda. Walaashay oo xaamilo ah iyo seedigay oo socday waddo ka mid ah jidadka Tabuug ayaa uu si khalad ah u jiidhay gaadhi xawaare sare ku socday! Shilkan foosha xumi waxa uu galaaftay walaashay iyo uurjiifkeedii!

Maalmo ka dib, ayaa arrinkii loo gudbiyay maxkamadda gobolka. Wiilkii fududaa waxa uu keensaday markhaati beenaale ku dhaartay in uu khaladka lahaa seedigay. Garsoorihii ayaa siiyay wiilkii fududaa toddobaad, si uu u keeno markhaatiyo kale, ka dibna loo soo afjaro kiiskan. Walwal daran ayaa nagu abuurmay oo waxa aannu iska dhaadhicinnay helimaysaan magteedii.

Saaxiibkay baa yidhi: waxa aannu isku ballansannay in aannu kacno habeenkii ka horreeya ballanka oo aannu habaarno wiilkan iyo markhaati beenaalaha. Waxa ay u baahnaayeen in Alle khayr kaga dhammeeyo arrinka.

Subaxii ayaa aannu iska xaadirinnay maxkamadda. Waxa aannu u galnay garsoorihii kiiskayaga gacanta ku hayay. Wiilkii fududaa waxa uu qirtay dambigiisii iyada oo aan cidna cadaadin! Garsoorihii ayaa weyddiiyey: *maxaa beddelay hadalkaagii iyo go'aankaagii hore?* Wiilkii dhalinyarta ahaa ayaa yidhi: *markhaatigii ayaa salaaddii subax waxyar ka hor u dhintay wadne-qabad!*

Kani waa Allaha awoodda badan oo maqlay baryo daacad ah oo habeen madow ka soo fushay aadane dulman oo ilmaynaya. Waxa uu yidhi: sharaftayda iyo weynidayda ayaan ku dhaartay ee waan kaa aqbali doonaa! Dhibkii iyo kadeedkii haystay qoyskani waxa uu ku soo idlaaday in uu Alle birta dhaafiyay dulmi kalkaalkii!

## Abaallaawe!

*Pompeii* waa magaalo qadiimiya oo ku taalla carriga Talyaaniga. Waxa ay ahayd magaalo weyn oo lagu majeeran jiray *ilbaxnimo, horumar iyo hanti cajiiba!* Taariikhyahannadu waxa ay xuseen in dahabka lagu daadin jiray jidadka magaalada; maadaama oo aanay u baahnayn dadkeedu!

Ma ka mahadnaqeen galladahan? Sida uu Eebbe ku sheegay Qur'aanka kariimka ah, insaanka waxa dhaqan u ah kibir iyo qooq:

﴿ أَن رَّءَاهُ ٱسۡتَغۡنَىٰٓ ﴾ العلق: ٧

*"Waxa uu istusay in uu kaaftoomay."*

Reer Pompeii way kibreen oo waxa ay dafireen Allaha awoodda badan! Waxa ay bilaabeen in ay bannaanka ula soo baxaan dambiyada waaweyn iyo sinada. Waxa ay ka dhigteen dhaqan ay ku sameeyaan xarumaha danta guud, beeraha iyo bannaanada. Waxay u baaqeen cadhada Allaha awoodda badan iyo ciqaabtiisa daran. *Maxaa ku dhacay?*

Maalinkii casaa! Alle waxa uu doonay in baro reer Pompeii awooddiisa daran iyo ciqaabtiisa xanuunka badan! Waxa uu baray in uu ka weyn yahay cid lagula dagaallamo xumaan. Ciqaabtii Alle ayaa siyar-siyar ugu soo siqday oo dhulgariir kooban baa ku dhuftay. Irridihii iyo daaqadihii ayaa ku dumay!

Si kado ah, duhurkii cadhada, fulkaane weyn ayaa ka qarxay meel u dhow magaaladan. *Waxa kacay qiiq madow oo qariyay iftiinkii qorraxda. Qiiq maalinkii u beddelay habeen, barwaaqadiina bus iyo baas!* Dambiilayaashii ayaa ku toosay xanuunkii cadaabta. Waxa ay dooneen in ay ka baxsadaan. Hase ahaatee, halkee ayay aadayaan? Dabkii iyo holacii fulkaanaha ayaa ku da'ay, halkaas ayaanay ku soo dhammaadeen xumaanfalayaashii!

Laba kun oo sannadood ka dib, waxa la arkay cadaabka Allaha awoodda badan oo ka muuqda wajiyadoodii gubtay. Alle ayaa ilaaliyay foolalkoodii.

Allaha awoodda badan ayaa aynnu ka magangelaynaa xumaanta oo banka loola soo baxo iyo cadhadiisa daran!

## Dabayl Daran

Luud CS tolkii markii ay diideen amarkii iyo diintii Eebbe, waxa loo soo diray malag. Inta uu kor u qaaday, ayuu ku dhuftay garabkiisa. Runtii, xaalad xanuun badan ayaa ay ahayd!

Markii ay Nuux CS tolkii ka dhego adaygeen dacwaddii iyo diintii Alle, gacmaha ayuu sare u taagay. Allaha awoodda badan ayaa biyo ku halaagay.

﴿ فَفَتَحۡنَآ أَبۡوَٰبَ ٱلسَّمَآءِ بِمَآءٖ مُّنۡهَمِرٖ ﴾ القمر: ١١

Arlada iyo ciddii ku dul sugnayd, waxa loo baabi'iyay Nuux CS dartii.

Waa awood aan lahayn xuduud xidha!

Alle, qolo ayuu u cadhooday, ka dibna dhagaxyo daba ayuu ku da'siiyay.

Duul labaad ayaa uu u cadhooday, waxa aanu ku halaagay qaylo!

Kuwo saddexaad ayaa ku faanay dhismayaal dhaadheer, waxa uu ku halaagay dabayl daran oo madhalays ah! Daalin iyo kibraani kasta, awoodda Alle ayaa dhabarka ka jabin doonta!

# الْبَدِيعُ

Kownkani waa qasaacad midabbo ah oo weyn.

# AL-BADIIC (HALABUUR BADANAHA)

Eebbe waxa uu leeyahay magacyo wadaaga macnayaasha qaar, kuwo kalena ku kala duwan! Magacyadan waxa ka mid ah: *al-Khaaliq, al-Baari', al-Musawir iyo al-Badiic*. Waxa aynnu ka hadli doonnaa magaca *al-Badiic*.

Halabuurku waxa uu leeyahay macne aan ahayn jirsiin iyo abuurid. *Halabuurku waa in la uumo shay; iyada oo aan cidna lagaga dayan*. Halabuurka noolayaasha ayaa bata oo gaadha heer aan la sawiran karin, iska dhaaf in la tiriyo e'!

Shay kasta oo koryaalla kownkani waxa uu leeyahay halabuur gaar ah iyo summad sooc ah oo ay caqliga iyo fekerku ku dawakhaan! Waxa aan ku celinayaa *shay kasta*. Tusaale: qof isku dhan ka soo qaadi mayno shay. Hase ahaatee, qurub kasta oo uu ka kooban yahay sida: *unugyada, nudaha, xubnaha iyo habdhisyada* ayaa ah shay! Samaysanka unugga oo Keli ah ayaa ah halabuur ka mid ah halabuurrada Ilaahay, mana jiro buug koobi karaya halabuurka Eebbe iyo samayntiisa!

Magacan weyn ayaa aynnu dul istaagi doonnaa, si aynnu bannaanka u keenno wax ka mid ah halabuurrada Eebbe ee kownka! Uma baahnin wax ka badan caqli wax dhuuxaya, arag wax fiirinaya iyo gacmo wax taabanaya; waayo kownkani waa bog aan u baahnayn dhexquusid; si uu inoo tuso abuuraha iyo halabuurkiisa!

## Mucjisada Codka

Waxyaabaha uu Alle halabuuray isaga oo aan cidna kaga dayan, waxa safka hore kaga jira *caalamka Codadka*. Waxa layaab ah in ay ku raaxaysato abuurta cusubi -kownka iyo waxa ku nool- cod leh hirar uu ka soo fulo. Waxa ka sii yaab badan in ay dadka, noolayaasha iyo wax kasta oo uu Eebbe doonay ay leeyihiin kanallo-maqal oo awoodaya in ay u rogaan hirarkan macnayaal iyo tilmaamo leh ujeeddooyin gaar ah!

Sawiro qaabkii uu kownkani ahaa saddex daqiiqo ka hor abuurtiisii! Garaadku ma sawiran karo xaaladdan. U fiirso sida uu Alle u sii ogaa nolosha uu abuuri doono saddex daqiiqo ka dib, in aanay macno

yeelanayn haddii aanu ku biirin halabuurka codka! Alle, waxa uu abuuray duni uu ku xoojiyay kala-duwanaashahan quruxda iyo cajaa'ibta wata!

Intaa ka dib, waxa aad maqlaysaa laxannada iyo luuqda kala duduwan ee shimbiraha, biyaha iyo dhirta. Waxa aad dhaayaha saaraysaa qurux, weyni iyo nolol! *Maxaa kaa weyn Allahayow!*

## Codka Nolosha

Kala-duwanaashaha codadku waa *halabuur!*

Aynnu sawiranno dadka oo isku wada cod ah! Waxa aad maqlaysaa cod kaaga baaqaya qolka kugu xiga, balse ma kala saari karaysid ma hooyaa, mise waa aabbe? Ma ilmahaagii toddoba jirka ahaa baa, mise waa walaalkaagii afartan jirka ahaa?!

Adiga iyo qofka alaabta kaa iibinaya ayaa isku cod ah. Macmiil kale ayaa yimid oo codkaagii kugu weyddiiyey alaab gaar ah. Isla codkaagii ayaa uu iibiyihiina ku jawaabay. Maamulihii meheradda ayaa meel fog ka dhawaaqay isla ilbidhiqsigii ay hooyo wiilkeeda uga yeedhay bannaanka. Ilmihii ayaa si cadho leh u jawaabay. Codadkii baa hal mar isku dhex qasmay oo ma garanaysid qofka hadlayaa cidda uu yahay!

Dhab ahaantii, macaanka noloshan iyo in badan oo ka mid ah fahankeeda ayaa lumaya. Qas iyo isku dhexyaac, ayaana ku baahaya!

Caruuska ku jira bishii malabku, sidee ayuu ugu degayaa caruusad ay isku cod yihiin saaxiibkii, imaamka masjidka, caaqilkiisa iyo shaqaalaha bangiga! Dhab ahaantii, waa dareen cabsi iyo cadho leh!

Abuuruhu isku dhexyaacan ayaa uu sii ogaa ka hor intii aanu abuurin insaankii ugu horreeyay. Waxa uu u abuuray insaanka dhuun gaar ah, cod soocan iyo shakhsiyad gooniya! Codka dhedigga ayaa uu ka dhigay mid diirran oo xeeldheer. Codka ragga ayaa uu ka dhigay mid xooggan oo qallafsan. Ka hooyada ayaa uu ka dhigay cod u dabacsan sida qalbigeeda. Codka ilmaha waxa uu ka dhigay mid bari u ah sida indhihiisa oo kale. Cod baa kuu baaqaya. Markiiba waa aad garanaysaa codkan; waayo Alle ayaa ka dhigay mid ku habboon shakhsiyadda, magaca iyo muuqa qofka!

## Sirta Codka

Haddii aynnu sawirno xadhkaha codadka iyo dhuunta ee boqol qof, waxa innagu adkaanaysa in aynnu ku aragno kala-duwanaashe abuureed.

Halkee ayaa uu ka yimid kala-duwanaanshaha u dhexeeya codadka Cumar, Cali iyo Caynaanshe?! Waa maxay agabka qaabeeya codka ee mid u yeela xabeeb, mid dhuuba, mid weyneeya, mid afraadna dabacsanaan?!

Arrinku sinaba uguma xidhna dhuubnida iyo dhumucda codka; waayo waxa aad maqashaa tobannaan cod oo mid kastaa leeyahay hab iyo soocnaan gaar ah!

Cilmiga Codadka waxa lagu bartaa dabaqado u gaar ah labka iyo qaar ay dheddiggu leeyihiin. Cod kastana waxa soo hoosgala codadka dadka! Tusaale: dabaqadda *Baritone*[1] waxa hoos yimaadda boqollaal ka mid ah codadka ragga oo waxa laga yaabaa qaybo badan oo ka mid ah culimada akhrida Qur'aanku in ay ku jiraan dabaqaddan! Waxa kale oo la mid ah dabaqadaha *Tenor*[2], *Bass*[3] iqb.

Si aynnu u baranno halabuurka codka dadka, uma baahnin in aynnu gudagalno, balse waxa kugu filan in aad isbarbardhigto codkaaga iyo ka qofka kula nool, ka dibna iswayddii: sidee ayaa ay u kala duwan yihiin labadan cod; maadaama oo ay isku meel ka soo wada bexeen?!

Dhegayso qaariga caanka baxay ee Cabdibaasid Cabdisamad iyo sida uu codkiisa dheeri u ruxo qalbiyada dadka. Haddana, barbardhig codka qaariga weyn ee Shucayshac[4], oo ay isku dabaqad yihiin.

*Codadkan ka soo baxaya dhuunteennu waa sida midabbada noloshan oo kale. Haddii aad sawiran karto nolol aan midabbo lahayn, waxa kale oo aad sawiran kartaa hadal aan codad iyo laxammotoona lahayn!*

---

[1] **Baritone**: waa jaad ka mid ah laxammada heesaha oo ragga u gaarka ah.

[2] **Tenor:** waa jaad ka mid ah laxammada heesaha oo ragga u gaarka ah.

[3] **Bass:** waa jaad ka mid ah laxammada heesaha ee ragga.

[4] **Shucayshac (1922kii-2011kii):** Abu Caynayn Shucayshac waa qaari Masriya.

## Cida Diigga

Miyiga ayaa ay ku wada nool yihiin ey dhawaaqa iyo diig ciya. Allena, waxa uu og yahay cida diiggu in ay astaan u tahay waaberi barakaysan.

Sidoo kale, waxa ku dhaqan kumannaan xayawaan oo uu mid kastaa leeyahay cod iyo ci' u gaar ah! Haddii ay xawaannadani isku cod yihiin, ma aad kala garateen midka dheefta kuu leh iyo kan ku dhibaataynaya!

Haa, ku ma baraarugsanin muhiimadda codadka; waayo haddii aynnu u dhugma yeelan lahayn codadkan cajiibka ah, si fudud ayaa ay u buri lahaayeen doodaha isku deyaya in ay shaki geliyaan jiritaanka Alle!

## Ma shaki baa ka jira Ilaahay?!

Suurtagal ma tahay in ay nafaha qaar hadal ka keenaan jiraalka Allaha weyn ee aan moogganayn arrimahan oo dhan! Eebbe ku ma kaaftoomin abuuridda duni la ciirciiraysa xayawaanno qudha. Hase ahaate, noole kasta waxa uu u sameeyay dhuun soo saarta cod gaar ah. Codka xidhidda albaabku la ma mid aha codka weelka jabaya. Tallaabada iyo biyaha shubmayaana isku cod iyo shanqadh ma aha oo shay kastaa cod gaar ah baa uu leeyahay. Cod kastaa macne gaar ah ayaa uu taagan yahay. Macne kastaana waxa uu leeyahay gundheeraan saamaynaysa noloshan. Macnahan la'aantiina, noloshu waxa ay noqonaysaa xabsi-dareeneed cabsi leh!

## Mucjisada Indhaha

Halabuurka Eebbe waxa ka mid ah in uu insaanku arko waxyaabaha ku hareeraysan! Haddii aanu arkayn, noloshiisa ayaa istaagi lahayd.

Mar aan ardaydayda uga warramayay nimcooyinka badan ee aynaan dareensanayn, ayaa uu Eebbe i waafjiyay hab fudud oo aan u baahnayn hadal badan, isla jeerkaasna leh saamayntiisa togan! Inta aan arday kiciyay, ayaa aan indhaha ka xidhay, ka dibna waxa aan faray in uu qalin ka qaado miis, oo uu siiyo arday! Daqiiqado ayaa ay ku qaadatay in uu qallinkii ka dhex raadiyo fasalka. Maradii ayaa aan ka furay; waaba isaga

oo taagan meel aad uga durugsan qalinkii iyo ardaygii! Mar kale ayaa aan ka codsaday in uu qaado. Runtii ilbidhiqsi ayaa uu ku qaaday qallinkii.

Waxa aan isweyddiiyey: *qaabkee ayay noqon lahayd nolosheennu haddii uu Alle innagu abuuri lahaa indho la'aan? Qaabkee ayaynnu isku fahmi lahayn, isku garan lahayn, u socon lahayn, wax u qabsan lahayn, u horumari lahayn, una cammiri lahayn dhulkan?!*

Aniga oo ka soo baxay tukaan mobillada gada oo ku yaal magaalada Yanbac al-Baxri, ayaa aan isha ku dhuftay nin lixdan jir ah oo indho la'. Cidhifka jidka ayaa uu marayay, oo waxa uu raadinayay meel bannaan. Goobtu aad iyo aad ayaa ay u sarraysay oo haddii uu tallaabo qudha hore u qaado, waa uu ka shalwan lahaa! Hore ayaa aan u gaadhay oo gacanta ayaa aan qabtay. Gaadhiga ayaa aan saaray oo halkii uu u socday ayaa aan gaadhsiiyay. Waxa aan ogaaday in uu ku dhashay indho la'aanta. Waxa aan la boobay weyddiin iga dhex guuxaysay muddo dheer:

Sidee ayaa aad ku kala soocdaa midabbada? Qaabkee ayaa aad ku kala garataa qofka xun iyo kan wanaagsan?! Xanuun badanaa jawaabtiisu!

Wax la sheegi karo oo buuran ka ma garanayo quruxda dabeecadda, bilicda badaha, saafinnimada samada, iftiinka waaberiga iyo macnaha midabbada iyo sixirkooda soo-jiidashada leh, ayaa uu yidhi odaygii!

*Akhriste, imisa jeer ayaad aragtay ilme ciyaaraya, shimbir duulaya, masjid dheer iyo daruur widhwidhaysa? Waxa nool lixdan jir, toddobaatan jir iyo siddeetan jir aan waligood waxba arag[1]!*

## Mucjisada Midabka

Fiirintaada midabbadu waa lama-huraan miyaa; maadaama oo aad indho qabto?! Waxa jira noolayaal aan arag midabbada. Guud ahaan, waxyaabaha aad ku indhodoogsataana uguma duwana dambaska!

---

[1] Addoonku Rabbow ma dayo
Deeqdaa intuu hantiyo
Duntii maqan buu tebaa.
Hadraawi (AHUN)

Iska dhaaf noolayaasha oo dhan oo aan kaaga sheekeeyo saaxiibkaygii shaqada. Mar aannu ka wada sheekaysanaynay caleen cagaar ah oo ka soo laalaadday darbiga, ayaa uu saaxiibkay yidhi: *caleentani waa midabkee?* Aniga oo dhoollacaddaynaya, ayaa aan ku idhi: *waa cagaar ee maxaa aad ii weyddiinaysaa midabkeeda?* Ma arkayo cagaar oo bunni baa ii muuqda ayaa uu iigu jawaabay! Aniga oo yaabban ayaa aan indhaha isku qabtay!

Waxa uu yidhi: *xanuunka indho la'aanta midabbada ayaa aan qabaa!* Waxa uu sii raaciyay: *ma garanayo midabka cagaarka ah oo shay kasta oo cagaar ahi, bunni ayaa uu iigu muuqdaa. Marka aan ka gudbayo jidka, ishaaradu bunni ayaa ay iigu muuqataa; sidaas awgeed, marka uu shidmo iftiinka hoose ayaan gudbaa!*

Waxa aan xusuustaa in aan rumaysan waayay hadalkiisa, isla markaana aan xanuunkan ka raadiyay internetka! Hore uma aan maqal xanuunkan. Maalinkaa ka hor, isku ma aan hawlin raadintiisa. Se gadaal baa aan ka ogaaday in ay jiraan muraayado u gaar ah dadka qaba xanuunkan.

Aad ayaa aan u damqaday markii aan daawaday dad qaba xanuunkan oo markii ugu horraysay dhaayaha saaraya midabbada quruxda badan ee nolosha! Sida sanamka oo kale ayaa ay ahaan jireen, balse hadda ayaa ay la dhaceen quruxda kownkan. Waa markii ugu horraysay ee ay arkayaan midabbada dhirtan aynnu sida joogtada ah u daawanno!

Iswayddii: maxaa dhacaya haddii aanay noloshu lahayn midabbo, ama aynaan kala saari karayn midabbada?! Halkee ayaa ay gashaa farxadda aynnu dareenno marka aynnu fiirinno midabbada u roon aragga?! Iiga warran walxaha buluugga ah ee inna siiya farxadda? Qaabkee ayaa ay innoo farxadgelin lahaayeen haddii laga saaro midabkan?! Casaankan rasiinka ahi, maxaa uu ku samayn lahaa ruuxdeenna haddii uu isku beddelo cawlaan?!

Fiiri Hareerahaaga! Kownku waa quraarad midabbo ah oo weyn, haddii uu summaddan waayana, waxbayahay ayaa uu noqonayaa!

Kaaga sheekayn maayo walxaha ay midab la'aantu saamaynta kooban ku yeelato. Balse, xoogga saar kuwa quruxda badan ee haddii ay waayaan midab baaba'aya! Waxa aad layaabaysaa Rabbi aan kaa doonayn in aad fiiriso walxaha dhabta ah oo qudha, balse, kaa doonaya in aad u wada aragto qurux!

Iswayddii: maxaa ay mulxidiintu ugu adkaystaan in aanu jirin Alle?

Liibaan iyo xasillooni badan ayaa ay lumiyeen markii ay khasaareen jacaylka Eebbe iyo u boholyowga la-kulankiisa!

## Koob

Marka laga tago codka iyo sawirka; halabuurka Eebbe ayaa ka soo muuqanaya walxaha *Dareerayaasha ah.*

Tusaale: marka aad qaab is le'eg iskugu qasto khad buluug ah iyo mid cawlaan ah, waxa ay iska dhalayaan khad cagaar ah. Haddaba, haddii uu qof khaldani u maleeyo in ay iska dhalayaan khad madow ama bunniya; si kasta oo uu u khaldamo, ma odhan karo: *tufaax baa ka dhalanaya!*

Sawiro adiga oo haysta weel saan ah oo ay ka buuxaan*: Uus iyo Dhiig.* Afka ka xidh, ka dibna ku dheh dadka: haragan ayaa aan daloolinayaa ee maxaad filaysaan in ay ka soo bixi doonaan? Muran la'aan waxa ay ku wada odhanayaan: *isku dar ka kooban uus iyo dhiig aad u qudhmuun oo madow!*

Waa sida maangalka ah ee la filayo, mana jiro caqli sawiranaya wax ka sidan ka duwan! Fisigiskuna ma soo saarayo shay ka geddisan walaxdan.

Aynnu fiirinno abuuraha fisigiska iyo kimistarigu shayga uu ka sameeyay isku qaskan! *Halabuuraha ayaa ka soo saaray sharaabka ugu macaan, midabka ugu quruxda badan iyo mucjisada ugu weyn oo ah caano saafiya oo hungurimar leh! Alle, waxa uu ku yidhi Qur'aanka kariimka ah:*

﴿ وَإِنَّ لَكُمۡ فِي ٱلۡأَنۡعَٰمِ لَعِبۡرَةٗۖ نُّسۡقِيكُم مِّمَّا فِي بُطُونِهِۦ مِنۢ بَيۡنِ فَرۡثٖ وَدَمٖ لَّبَنًا خَالِصٗا سَآئِغٗا لِّلشَّٰرِبِينَ ﴾ النحل: ٦٦

*"Mayeedhaankana wax lagu cibro qaato ayaa idiinku sugan, oo waxa aannu idin waraabinaynaa shay ku jira calooshooda oo ah uus iyo dhiig aannu ka dhignay caano saafiya oo hungurimar u leh kuwa dhamaya."*

Halkan waxa aad ku ogaatay isle'egta khadka buluugga ah iyo khadka cawlan ee soo saartay tufaaxu in ay ka suurtagalsan tahay isle'egta uuska iyo dhiigga ah ee soo saartay koob caano ah oo macaan. Markan oo kale waxa kula gudboon: *xumaan oo dhan waxa ka hufan abuuraha weyn!*

## Udugga

Halabuurka Alle waxa uu ka muuqdaa *Urta iyo Udugga.*

Haddii lagu hordhigo quraarad cadar ah oo aad furto oo uu ku qaado uduggeeda iyo udgoonkeedu, dabadeetana aan ku weyddiiyo: *miskigani dhirtee iyo ubaxee ayaa uu ka yimid?*

Haddii aanad garanayn, waxa aad tirinaysaa tobannaan ubax iyo dhir. Hase yeeshee, shayga aan kugu soo dhacayn ayaa ah *Qanjidh* ka go'ay jidhka xayawaan dhintay! Dad badani ka ma warqabaan miskiga udgooni in uu ka dhashay qanjidh ku jira caloosha jaad ka mid ah deerada oo lagu magacaabo *Deerada Miskiga*!

*Alle, waxa uu u abuuray layaabkan, si loo yidhaahdo mahadsanid Allahayow. Haddii aanay sidaas ahayn, maxaa ka dhexeeya deerada iyo cadarka?!*

Qanjidhkani sababma ayuu gaar ugu noqday caloosha labka deerada (liig)? Ubaxyada kala jaadjaadka ah ee aragga insaanka u rooni maxaa ay u dhaliwaayeen miskiga?! Maadaama oo ay noolayaashu dhalaan noole la mid ah, saw layaab ma aha abuurtani?! *Waa in aynnu qirno awoodda Allaha wax kasta kara ee halabuuray cirarka iyo dhulka!*

## Canbarka

Mar kale aynnu quusno badda gunteeda. Miyaanad arkayn loollankan daran? Waa nibiri weyn oo si bilaa naxariisa u cunaya tobannaan kalluun. *Aan ku weyddiiyo ee xayawaan jaadkee ah ayuu dhalaa nibirigan halistii? Si kale aan u dhigo, ee waa maxay astaamaha iyo awoodaha dhashiisu? Waxa la hubaa in uu noqon doono noole cabsi leh.*

Allaha halabuuraha ah ee xayawaan nool ka soo saaray mid dhintay, mid qurux badan ka abuuray mid foolxun, mid jilicsanna ka sameeyay noole qallafsan; ayaa nibirigan cabsida leh ee weynna ka soo saaray cadar qurux, bilic, weyni iyo haybad leh oo la yidhaahdo *Cadar Canbar!*

Canbarku waa cadar mar la-arag ah oo laga sameeyo walax midabbo badan oo ka soo baxda caloosha nibiriga. Si aad xogo badan uga hesho, aynnu faahfaahinno. Asalka canbarku waa quraarado cadcad oo aan ur lahayn. Laakiin, marka ay la falgalaan walax kale ayaa ay u qaybsamaan

laba maaddo oo dhaliya uduggan ashqaraarka ah. Ur aad u udgoon ayaa ka soo baxda shay aan ur lahayn! *Xumaan oo dhan waxa ka hufan Alle SWT!*

## Luul

Maadaama oo aynnu wali ku dhex jirno gunta badweynta, aynnu yar iftiiminno luulka oo ah quraarado cadcad oo sibibix ah, isla jeerkaasna leh qurux iyo bilic iftiimaya. Haddaba, si aad ii fahanto, xogihii aad hore u haysay iska xoor oo iiga warran noolaha aad is leedahay waa uu dhalay?

Midka aad doonto dooro. Waxa laga yaabaa in uu kugu soo dhacay noole qaab kubbadeed leh oo widhwidhaya, ama ugu yaraan qurux badan; waayo marka aad aragto quruxdiisa cajiibka ah, waxa aad aamminaysaa in uu ka yimid shay ka sii qurux iyo qaayoba badan! Ma aragtaa laftan bunniga ah ee aan quruxda lahayn? Dhaayaha ma saartay daboolkan iyo baruurtan muuqa xun? Ku baadh fartaada. Wax uun ma aragtaa? Waa ay widhwidhaysaa oo waa lu’lu’. Sidee ayuu noolahan quruxda badani u doortay in uu ku dhex noolaado noolahan cajiibka ah?!

Waxyar aynnu gadaal u laabbanno si aad u fahanto qaabka uu Alle u abuuray. Asalkiisu waa atom ciid ama wax u eg ah oo galay caloosha laftan. Laftii ayaa ku sii daysay maaddo dahaadhaysa. Sidaas ayaa uu ku galay meel dadan oo u diidaysa in uu dhaawac soo gaadho. Xabsigii ayaa sii adkaaday oo isqaabeeyay, ka dibna isku rogay lu’lu’a la isku qurxiyo.

*Bal hadda u fiirso sida uu halabuuruhu ugu beddelayo dahaadhkan fooshaxun, shay ay qalbiyadu la dhacaan quruxdiisa iyo qiimihiisa!*

## Amakaagga Abuurta!

Inta aynnu ku gudajirno layaabyadan iyo abuurtan amakaagga ah, waxa aad la dhici dhagax wanaagsan oo aad u qurux badan oo bilicsan. *Waa Marjaanka lagu qurxiyo taajka, laguna badhxo kuulaha la isku qurxiyo*! Waxa aad wax ka ogaanaysaa halabuurka Alle, marka aad ku baraarugto in uu yahay dhir-badeed aan ahayn dhagax iyo macdantoona!

Biyaha macaan ee aynnu u cabno qaabka hungurimarka leh, cuntada ku karsanno, mar seddexaadna ku daminno dabka! Waxa aad yaabaysaa

marka aad ogaato in ay ka samaysan yihiin laba curiye oo midkood gubto (Hydrogen), ka kalena ka caawiyo gubashada (Oxgen) ($H_2O$)

Mar labaad u fiirso codkan macaan ee ay ku celcelintiisa u riyaaqayaan qalbiga iyo ruuxdu! Waa dhaqdhaqaaq ay samaynayaan xadhko hilbo ah oo ku jira gudaha afka noolaha! Shaygan qallalani qaabkee ayaa uu u soo saaray codka macaan ee ay ku raaxaysato ruuxdu?! Hadalka, khudbadaha, wada-sheekaysigeenna iyo qasiidooyinku waxa ay ka samaysan yihiin *Xuruufta* oo ah dhaqdhaqaaqa uu carrabku ka sameeyo gudaha afka!

Fasax araggaaga, ka shaqaysii caqligaaga, hareerahaagana fiiri! Runtii, waxa aad arkaysaa layaabka abuurta, iyo kala duwanaashaha halabuurka oo ku dhawaaqaya: *cirkan sarreeya waxa ka sii sarreeya Eebbe mudan cibaado!*

## Nafihiinna

Jidhka insaanku waa duni mucjisooyin iyo layaabyo ah. Qayb kasta oo ka mid ahna, waxa ku duugan casharro keensanaya mahadnaq badan. Mahadnaqa ka hor, waxa lagaa rabaa in aad si xeeldheer u rumayso Alle.

*Eebbe SWT, waxa uu innagu jeedinayaa jidhka, xubnihiisa, shaqadiisa iyo abuurtiisa; si aynnu u dhuuxno, ka dibna ugu kalsoonaano Rabbi SWT.*

﴿ وَفِيٓ أَنفُسِكُمۡۚ أَفَلَا تُبۡصِرُونَ ﴾ الذاريات: ٢١

Mar kale ayuu Alle innoola hadlay hab cajiib iyo carin ah:

﴿ سَنُرِيهِمۡ ءَايَٰتِنَا فِي ٱلۡأٓفَاقِ وَفِيٓ أَنفُسِهِمۡ ﴾ فصلت: ٥٣

Eebbe waxa uu la hadlayaa maskax aan si fiican u fahmin aayaddan. Waana sida dhacda marka ay doodayaan nebi iyo tolkii. Alle ayaa Nebiga ku xoojiya mucjisooyin keena in ay rumeeyaan ciddii uu iimaan la doono. Mucjisooyinkan waxa ka mid ah: *kala jeexii badda, kala dhambalkii dayaxa, hashii nebi Salaax iqb.*

Aayaddan cajiibkii waxa ay ka sheekaynaysaa kacdoon ku saabsan aqoontii caashagaratayda ahayd, iyo afgambi ku imanaya dhaqankii guud. Waayo, aayado, mucjisooyin iyo arrimo cusub ayaa aad ku arki doontaan nafihiinna! Weynida Eebbe, waxa ka mid ah in ay xitaa naftaadu tahay

mucjiso wax-ku-qaadasho mudan. Sideedaba, mucjisadu ku ma koobna waxa aad aragto, balse waxa ay noqotaa dareen kugu dhex jira.

Mucjisada jiritaankaagu ka ma yara mucjisadii kala jeexidda badda. Mucjisada dhiigaaguna ka ma yaab yara mucjisadii kala dhambalidda dayaxa!

## Qorraxda

Maxaa dhici lahaa haddii aanay jiri lahayn Qorrax?

Qur'aanka ayaa iftiimiyey arrinkan isaga oo u dhigay hab weyddiina:

﴿ قُلْ أَرَءَيْتُمْ إِن جَعَلَ ٱللَّهُ عَلَيْكُمُ ٱلَّيْلَ سَرْمَدًا إِلَىٰ يَوْمِ ٱلْقِيَٰمَةِ مَنْ إِلَٰهٌ غَيْرُ ٱللَّهِ يَأْتِيكُم بِضِيَآءٍ ۖ أَفَلَا تَسْمَعُونَ ﴾ القصص: ٧١

*"Dheh: ka warrama haddii uu Alle habeenka ka dhigo joogto ilaa qiyaamaha, waa ayo cidda aan isaga ahayn ee idiin keenaysa iftiin, miyeydaan waxba maqlayn?"*

Waxa aan xusuustay in aan waqti hore ka akhriyay buugga *Jiilaalka Nuliyeerka* dhibaatooyinka ka dhalan kara haddii uu dagaal nukliyeer ah ka dhex qarxo quwadaha Bariga iyo Galbeedka! Iyo boodhka iyo qiiqa ka dhashaa siduu sannado badan innooga hor istaagi doono fallaadhaha qorraxda, taas oo keeni doonta musiibooyin aan la mahadin! Waxa aad sawirataa shayga kaa celiya fallaadhaha qorraxdu in aanu ahayn qiiq iyo daruurtoona; waayo, qorraxda lafteeda ayaa maqan! Maxaa dhici lahaa? Dunidani mugdi dhammaystiran ayaa ay ahaan lahayd oo waxa la waayi lahaa iftiinka qorraxda ee ay soo celiyaan dayaxa iyo xiddiguhu.

Waxa aad i odhan doontaa: balo ma jirto oo sidii uu Thomas Edison u sameeyay laydh, ayaa aannu u samaysanaynaa! Inta aanan kaaga jawaabin weyddiintaada, aan ku weyddiiyo: maxaa ay samayn jireen dadkii mugdiga ku noolaa Edison ka hor? Sidee ayaa uu insaanku u samaysan karaa faynuus, haddii aanu arkayn waxyaabaha ku hareeraysan sida: biraha, dubaaradaha iyo saliidda?! Araggu ma ugu filan yahay in uu galo socdaallo isbiimayn ah oo uu ku marayo bannaannada, buuraha iyo badaha, isaga oo raadinaya bir iyo quraarad uu ka samaysto faynuus?

Kaba soo qaad in uu helay beddelka qorraxda. Sidee ayaa uu u helayaa cunto? Sida aynnu ka warqabno dhirtu waxa ay ku tarantaa ilayska iyo iftiinka qorraxda. Sidee ayaynnu ku helaynaa jaadadka kala duduwan ee khudradda haddii aanu jirin ilays? Ma waxa ay kula tahay in ay innagu filan yihiin xooluhu?! Saw nolosha xooluhuna kuma xidhna dhirta?!

Fiiri heerkulka kownka! Boqollaal darajo ayaa uu ka hooseeyaa eber. *Isha kulka kownku saw ma aha qorraxda?* La'aanteed qabow iyo dhaxan ayaa aynnu u dhiman lahayn oo waxa fadhiisan lahaa ballayada, badaha iyo wabiyada! Kownkuna waxa uu isku rogi lahaa tallaagado waaweyn!

Wali ma ka fekertay qorraxdan weyn ee inna siisa galladahan iyada oo aan innagu soo dallacin shilin lacag ah? *Ma ugu mahadnaqdaa Ilaahay?!*

## Ogsajiinta

Aad ayaa ay u adag tahay in aad sawirato nolol aan Ogsajiin lahayn. Haddii aanay suurtagal ahayn nolol aan qorrax lahayn, waxa kale oo aan sinaba suurtagal u ahayn nolol aan lahayn ogsajiin!

Si ay u samaysmaan unugyada jidhka insaanku, waxay u baahan yihiin Ogsajiin. Awoodda insaanka, iyo dufanka iyo sonkoraha ku kaydsan jidhkiisa in loo beddelo awood iyo tamar uu ku shaqeeyo, ayaa iyana u baahan Ogsajiin. Neefqaadashada oo aanu qofna ka maarmin ilbidhiqsi qudha, ayaa ku tiirsan Ogsajiin. Xitaa biyaha oo ah lafdhabarta kowaad ee nolosha, ayaa ka samaysma atom Ogsajiin ah iyo laba Haydarajiin ah. Hadda iswayddii: *waa maxay noolayaashii ka horreeyay ogsajiinta, qorraxda, maqalka, aragga, midabka, udugga iqb, ee looga tusaale qaatay, lana horumariyay?*

Halkan ayaa aad ku ogaanaysaa macnaha *al-Badiic* iyo in uu Alle hal-abuuray oo sugay shay kasta oo uu uumay! Waxa aad ogaanaysaa haddii aad noloshaada oo dhan sujuudsanaato, in aanad gudi karin mahadnaqa gallad keli ah oo ka mid ah galladaha uu abuuray ee uu kuu hibeeyay Alle, adiga oo aan weyddiisan, garanayna ilaa heerka aad u baahan tahay.

## GUNAANAD

Ka dib, socdaalkii aan la galay magacyada Alle ee wanaagsan iyo sifooyinkiisa sarreeya, iyo sharaftii, dhammaystirnaantii, weynidii iyo qabkii aan iskugu hawlay sidii aan ugu dhowaan lahaa ruuxda akhristaha caadiga ah ee ay aqoontiisu dhexdhexaadka tahay. Kaas oo aan ahayn dadka dhex xulay cilmiga badhaxa la'. Hase ahaatee, jecel afka suugaanta, sheekada saamaynta leh iyo waanada deggan.

Socdaalkan ka dib, gacmaha ayaa aan xagga sare u taagayaa aniga oo Alle ka durraamanaya in uu i waafajiyo in aan baro akhristaha wax uun ka mid ah macnayaasha magacyadan, in aan noqdo mid nuxurkooda ku cuga qalbiyada, iyo in aan ahaado mid ku qora qallinkiisa liita iyo aqoontiisa kooban, wax ka mid ah weynaanta iyo dhammaystirnaanta magacyadan[1].

Allahayow, waxa aan dambidhaaf kaa weyddiisanayaa in aan wax kaa qoray aniga oo ku jira xaaladdan aad og tahay. Allahayow, iga dhaaf wixii gef iyo gaabisa. Allahayow, niyaddayda ka yeel mid daacada, camalkayga ka dhig mid aad igaga raalli noqoto oo aad sida ugu fiican iiga aqbasho, iguna farxadgeliso maalinka aan kula kulmayo.

وصلى الله وسلم على نبينا محمد، وعلى آله وصحبه أجمعين

[1] Ka nastahan Ilaahay
In af lagu tilmaamee
Addoon qirasho mooyee
Wax kaloon idhaahdaa
Iima ay ekoonee…
Yamyam (AHUN)

Maxaad ka faa'iidday akhrinta buuggan?